

# BUUGGA LAYSANKA

# DARAWALKA EE IOWA



KA EEG BUUGGA LAYSANKA DARAWALKA IOWA ONLAYNKA  
[IOWADOT.GOV/DRIVERSMANUAL](http://IOWADOT.GOV/DRIVERSMANUAL)



*Kim Reynolds*

Kim Reynolds, Guddoomiyaha gobolka Iowa

## FARIIN MUHIIM AH OO KU SOCOTA DARAWALADA

Gaari wadista marka ugu horeysay waxay noqon kartaa khibrad cabsi leh, laakiin xiiso leh. Inaad haysato xorriyadda aad gaari ku wadi karto waxay furaysaa adduun cusub oo suurtagalo ah, laakiin inaad diyaargarowdo oo aad ogaato shuruucda waddada ka hor inta aanad furaha kumajiirin gaariga waxay kor u qaadi doontaa badbaadada dhammaanteena wadaaga waddada.

Akhrinta, fahmida, iyo fulinta walxaha ku jira buug-gacmeedkan darawalka ayaa ku dejin doona jidkaaga aad ku noqon lahayd darawal badbaado leh. Faahfaahinta buug-gacmeedka ayaa wax badan kuu sharxi doona, laakiin raacitaanka xeerarkan badbaadada aasaasiga ah ayaa ku bilaabi doona.

- Suunka gaariga dhujso, meel kasta oo aad kaga fadhido gudaha gaariga.
- U hoggaansan xadka xawaaraha.
- Sii dareenkaaga buuxa hawsha wadista.
- Miyir qabka darawalka.

Waad ku mahadsan tahay wakhtiga aad gelisay si aad u barato waxyaabaha muuqaal ahaanta ah gudaha buug-gacmeedkan oo aadna ku biiriso tababbarka aad kusoo qaadatay wadista gaariga. Labadaas khibradood ee labaranayo iyo sida ay kaaga go'an tahay inaad noqoto darawal badbaado leh ayaa ay u mahadcelinayaan dhammaan kuwa wadaaga waddooyinka Iowa.

## BOOQASHADA GOOBTA ADEEGA SHATIGA DARAWALKA IYO AQOONSIGA

Waxaa jira goobo adeeg dhammaan gobolka oo dhan oo ku yaal Xarumaha Adeegga DOT ee Iowa iyo Xafiisyada Khasnajiga Ismaamulka. Waxaad booqan kartaa goob kasta; Ma'aha in ay noqoto kan kuugu dhow meesha aad ku nooshahay oo kaliya. Intaa waxaa dheer, adeegyada qaarkood, sida cusboonaysiinta shatiga, ayaa laga heli karaa onlayn haddii aad tahay 18 jir ama ka weyn oo aad buuxisay shuruudaha kale.



### BALAN KA QABSO GOOB DOT AH:

[www.iowadot.gov/service-selector](http://www.iowadot.gov/service-selector)



### XAFIISKA KHASNAJIGA EE ISMAAMULKA:

Isticmaal shabakada hoose si aad ula xiriirto goobta aad qorshaynayso inaad booqato si aad u aragto sida ay hawsha u wadaan.

[www.iowadot.gov/mvd/iowa-dot-locations](http://www.iowadot.gov/mvd/iowa-dot-locations)



### ONLAYNKA:

Hubi si aad u aragto haddii aad u qalanto adeegyada onlaynka ah.

[www.mymvd.iowadot.gov](http://www.mymvd.iowadot.gov)

Tani waa meesha KALIYA ee aad ku cusbooneysiin karto shatiga gudaha onlaynka. Waxaa jira dhowr shabakadood oo iibiya macluumaadka aan ku bixinno sida bilaashka ah. Waxay kaa dhigayaan inaad u malayso inaad helayso shatiga cusub ee darawalnimada, laakiin ma heleysid.

# LIISKA MAWDUUCYADA

## CUTUBKA 1: LAYSANKA DARAWALKA..... 4

1.1 Yaa u baahan laysanka darawalnimada ee lowa? .....	4
1.2 Wadashada laysankaaga iyo caymiskaaga .....	5
1.3 Baaritaanada iyo tijaabooyinka caafimaad ee loo baahan yahay .....	5

## CUTUBKA 2: CALAAMADHAHARA TARAAFIKADA IYO SHARCIYAHA WADADA ..... 6

2.1 Calaamadaha taraafikada.....	6
2.2 Calaamadaha sharciyeynta .....	8
2.3 Calaamadaha digniinta .....	9
2.4 Calaamadda gaadiidka si tartiib ah u socda.....	10
2.5 Calaamadaha Hagida .....	10
2.6 Calaamadaha adeegga .....	10
2.7 Calaamadaha jidka.....	10
2.8 Calaamadaha Taraafikada.....	10
2.9 Isgoosyada wadada tareenada.....	11
2.10 Aagaga ay shaqada ka socdaan .....	11
2.11 Calaamadaha laamiga iyo kontaroolada haadka kale.....	12
2.12 Khadadka wado siinta.....	12
2.13 Calaamadaha marinada lugeeyayaasha, xariiqyada joogsiga, iyo falaaraha jihataynta .....	12
2.14 Haadadka dib loogu soo laaban karo.....	12
2.15 Wadaag haadka bidix-u-leexashada.....	13
2.16 Haadadka kayd-san.....	13
2.17 Isticmaalka guud ee haadka .....	13
2.18 Haadadka baaskiilka iyo calamadaha wadada.....	14
2.19 Calaamadaha baaskiilka iyo dadka lugaynaya.....	15
2.20 Dadka lugeeynaya ee aragga naafada ka ah .....	15
2.21 Isgoosyada.....	15
2.22 Gaadiidka waxyaabaha degdega ah loogu talagalay .....	16
2.23 Basaska dugsiga.....	17
2.24 Baarkinka .....	18
2.25 Baarkin looma ogollo.....	18
2.26 Kusoo dhawaanshaha gaawaarida taagan Sharciiga lowa ee Ka-gudubka ama Gaabinta Xawaaraha socodka.....	19
2.27 Gaari ka bixinta taraafikada hadduu galo shil fudud.....	19

## CUTUBKA 3: U DIYAAR GAROWGA WADISTA..... 20

3.1 Ilaalinta gaarikaaga.....	20
3.2 Hagaajinta kuraasta iyo muraayadaha .....	22
3.3 Nidaamyada la hormariyay ee darawal-caawinta .....	23
3.4 Ka warqabka meelaha aan sida fiican loo arkeynin .....	31
3.5 Suumanka kuraasta iyo kuwa xakameeya ilmaha.....	31

3.6 Sugidda walxaha dabacsan .....	33
3.7 Dabar-goynta waxyaabaha keena mashqulka.....	33
3.8 Khamriga iyo daroogada.....	34
3.9 Wadista iyadoo uu qofka lulmoonayo .....	34
3.10 U diyaargarowga wadada soo socota - lowa 511 .....	35

## CUTUBKA 4: XIRFADHAHARA AASAASIGA EE WADISTA BAABUURTA..... 36

4.1 Kicinta baabuurka .....	36
4.2 Baddelida marshada gaariga.....	36
4.3 Sheelareynta .....	37
4.4 Bareeg qabashada iyo joojinta .....	37
4.5 Xawaaraha ku habboon .....	39
4.6 Isteerinka.....	39
4.7 Gadaal u laabashada.....	40
4.8 Farsamooyinka habboon ee leexinta .....	40
4.9 Bedelitaanka haadadka.....	41
4.10 Gudbitaanka.....	42
4.11 Wadista badbaadada leh iyadoo xaaladuhu cakiran yihiin .....	44
4.12 Ku waditaanka gaariga taraafikada si badbaado leh.....	45
4.13 La-xiriirida - nalalka hore, hoon u yeerinta, iyo calaamadaha degdega ah .....	46

## CUTUBKA 5: ISTICMAALKA XIRFADHAHARA WADISTA..... 48

5.1 Isgoosyada .....	48
5.2 Ku wadista gobollada dhexdooda iyo jid weynaha .....	49
5.3 Kala leexashada isdhaafsiga ee sida dheemanka ah .....	50
5.4 Martooyinka .....	50
5.5 Kuwadista miyiga/wado jay leh.....	51
5.6 Wadista habeenkii.....	52
5.7 Deerada iyo xayawaanada kale.....	53
5.8 La-wadaagista wadada baabuurta waaweyn ee xamuulka qaada.....	53
5.9 La-wadaagista wadada mootooyinka .....	54
5.10 La-wadaagista wadada baaskiil wadayaasha iyo lugeeyayaasha .....	54
5.11 Baabuurta daaqadaha loo xiray maalin uu kuleeyl jiro.....	55
5.12 Ku-wadista cimilada xun .....	55
5.13 Xaaladaha degdega ee ku aadan fashilka ku imaada qalabka .....	58
5.14 Ka qeyb ahaanshaha shil .....	59
5.15 La macaamilitaanada sharci fulinta.....	60



## CUTUBKA 1

# LAYSANKA DARAWALKAAGA

### 1.1 YAA U BAAHAN LAYSANKA DARAWALNIMADA EE IOWA?

Gudaha Iowa, qof kasta oo ka shaqeeya baabuurta, mootada, ama mootada yar waddooyinka dadweynaha waxaa looga baahan yahay inuu haysto ruqsad ama shati. Waxaa lagu tixgelinayaa degane Iowa ujeedooyinka ah shatiga darawalnimada haddii aad samaysay ugu yaraan mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Ka diiwaan gashan inad ka codbixiso gobolkan.
- Ka diiwaan gelisay ilmahaaga dugsiga dadweynaha ee Iowa.
- Ka aqbalay shaqo joogto ah gudaha Iowa.
- Si joogto ah ugu noolaa gudaha Iowa 30 maalmood.
- Xareeyay cashuur dhaafka guriga ama cashuur dhaafka millatariga ee ku aadan hanti taallo gudaha Iowa.
- Ka helo kaalmada dadweynaha gobolka Iowa.


UMA baahnid laysanka darawalnimada haddii aad:

- Wado gaadhi milateri markaas oo aad shaqada ku jirto oo ayna kula socdaan Ciidamada Qalabka Sida ee Maraykanka.
- Kaxayneyso qalabka beerta inta u dhaxaysa beerta meeshey kuyaasho iyo dhul-beereed kasta oo u dhow ama meelo hawlgal beereed ah laba mayl gudahood.
- Ku wado laysanka haddeer ee gobolkaaga ama dalkaaga inta aad Iowa ku sugan tahay ka booqde ama arday ahaan.



## BOOQO IOWADOT.GOV SI AAD WAX BADAN U BARATO:

- ✓ Goorta aad cusboonaysiisanayso laysankaaga iyo sida loo sameeyo.
- ✓ Barnaamijka Laysanka Darawalka ee Qalin jabiyay (darawalada ka yar 18 sano).
- ✓ U qaadashada imtixaanka aqoonta guriga ama dugsiga (Ka boodida safarka)
- ✓ Noocyada gaarka ah ee laysanka darawalnimada sida laysanka mootada yar iyo CDLs.



Wax ku baro onlaynka adigoo isticmaalayo imtixaankeena ku tababaritaanka ah:  
[www.iowadot.gov/mvd/driverslicense/manuals-and-practice-tests](http://www.iowadot.gov/mvd/driverslicense/manuals-and-practice-tests)

## 1.2 WADASHADA LEYSANKAAGA IYO CAYMISKAAGA

Had iyo jeer waa inaad haysataa laysankaaga ama ruqsada oggolaanshahaaga markaad baabuur wadeyso. Darawalada baabuurta ka diiwaan gashan Iowa waa inay sidoo kale wataan kaarka caymiska (daabacan ama elektarooniga ah) si loo xaqiijiyo caddaynta mas'uulka caymiska. Ku guuldareysiga in sidaas la sameeyo waxa ay keeni kartaa ganaax iyo in gaariga la soo xiro.

## 1.3 BAARITAANADA IYO TIJAABOYINKA CAAFIMAAD EE LOO BAAHAN YAHAY

Markaad codsato laysankaaga, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad sameeyso waxyaabaha soo socda:

- Dhameystirto baaritaanka dhinaca aragga.
- Aad ku baasto aqoonta imtixaanka.
- Inaad tusto inaad si guul leh u dhammaystirtay koorsada waxbarashada darawalnimada ee Iowa ay ansixisay (haddii aad ka yar tahay 18).
- Ku baasto imtixaanka wadista (looma baahna haddii aad buuxiso shuruudaha koorsada waxbarashada darawalka).



## CUTUBKA 2

# CALAAMADAHA TARAAFIKADA & SHARCIYAHA WADADA

## 2.1 CALAAMADAHA TARAAFIKADA

Calaamadaha taraafikada waxay ka taliyaan sharciyada waddooyinka, khataraha, goobaha, jihooyinka, iyo meelaha adeegyadu ku yaallaan. Qaabka iyo midabka calaamadaha taraafikadu waxay tilmaan u siinayaan nooca macluumaadka ay bixiyaan.

### MIDABYADA CAADIGA AH

#### CASAAN

Jooji, wado sii, ama samee waxa ka muuqda calaamada.

#### CAGAAR

Jihada. Waxay tilmaamaysaa meesha ay goob ku taal, ama inta ay meeli uga fog tahay goobta aad joogto.

#### BULUUG

Adeegyada socdaallayaasha. Wuxuu kugu hagayaa meelaha sida meelaha nasashada, goobaha dalxiislayaasha, isbitaallada, hoy-yaasha, goobaha shidaalka, maqaayadaha, iyo meelaha dalxiiska.

#### JAALLE

Digniin guud.

#### JAALLE-CAGAAR

Calaamada digniinta ee marinada lugeeyayaasha, baskiilka, iyo dugsiga.

#### CADAAN

Sharciyad. Wuxuu bixiyaa macluumaadka ku aadan sharciyada iyo amarada la fulin karo.

#### ORANJI

Digniinaha muujinaya iney wadada shaqo ka socoto, xakamaynta taraafikada si kumeel gaar ah, iyo dayactirka. Xaqiiji inaad daawato beddelka xadka xawaaraha iyo shaqaalaha joogan waddada.

#### BUNNI

Waxey muujiyaan meelaha madadaalada iyo dhaqameedka ee xiisaha leh. Waxay bixiyaan jihada goobaha taariikhiga ah, beeraha nasashooyinka, ama meelaha madadaalada.

#### GADUUD-KHAFIIF AH

Waxey muujiyaan calaamadaha digniinta iyo kuwa hagitaanada ee loogu talagalay maaraynta shilka sida nadiifinta shilalka, qaadista qashinka kashasha burburka, iwm.

## QAABABKA GUUD

**SIDEED XAGALE**

Qaabka waxaa loogu talagalay calaamad joogsi oo keliya. Si buuxda u joogso isgoyska ay calaamadani xakameyso.

**SADEX XAGALE**

Bixi xaqa wada-siinta.

**AAGGA AAN LA BAASI KARIN**

Calaamadani waxay ku taal dhinaca bidix ee wadada. Waxay kaaga digaysaa aag aan la dhaafin.

**DHEEMAN**

Digniin. Waxay ku ogeysiinaysaa khataraha gaarka ee waddada. Erayada ama sawirada calaamada ku yaal ayaa ku tusi doona sababta aad ugu baahan tahay inaad hoos u dhigto xawaaraha ama aad taxaddar dheeraad ah isticmaasho.

**AFAR XAGALE**

Waxa loo isticmaalaa sharciga, hagida, iyo calaamadaha digniinta.

**SHAN XAGALE**

Isgoysyada dugsiga. Calaamaduhu waxay calaamadiyaan aagagga dugsiga iyo isgoysyada dugsiga.

**MAREEG**

Calaamadaha isgoyska tareenka ayaa la dhigayaa meel kasta oo isgoys ah. Lambarka calaamada ee ka hooseysa mareega waxay muujineysaa inta qaybood ee wadooyinka tareen ee ay tahay inaad gudubto.

**GOOBAABIN**

Wuxuu muujinaya jidka tareenka lamaraayo ee kaa horeeya.

## 2.2 CALAAMADAHA SHARCIYEYNTA AH

Calaamadahani waxay bixiyaan macluumaadka ku saabsan xeerarka jihada taraafiga, isticmaalka haadka, leexashada, xawaaraha, baarkinka, iyo xaaladaha kale ee gaarka ah. Qaar ka mid ah calamadaha sharciyeynta ayaa leh goobaabin casaan ah oo ay ku jeexan tahay calaamad. Kuwani waxay muujinayaan inaad waxba samayn karin; tusaale ahaan, uma leexan kartid bidix, uma leexan kartif midig, ama ma sameyn kartid kala wareegga U-da.



### CALAAMADAHA XADKA XAWAARAHA

Calaamadaha xadka xawaaruhu waxay muujinayaan ugu badnaan ama ugu yar xawaaraha nabdoon ee la ogolyahay. Xawaaraha ugu badan ayaa loogu talagalay xaaladaha wadista ku habboon. Mararka qaarkood waa inaad yareysaa xawaaraha marka ay xaaladuhu u baahan yihiin, sida marka waddadu ay simbiriraxasho leedahay (xilliyada roobka ama barafka) ama ay adagtahay in si cad loo arko hoosta wadada (inta lagu jiro ceeryaamo). Qaar ka mid ah waddooyinka xawaaraha sare leh waxay leeyihiin xadka ugu yar ee xawaaraha. Haddii xawaarahan ugu yar uu kuu yahay mid dheereeyo, markaa waa inaad isticmaashaa waddo kale.



### CALAAMADA WADO SIINTA

Calaamada wado siinta waxay ka dhigan tahay waa inaad hoos u dhigtaa xawaaraha oo aadna bixisaa xaqa wado-siinta marka lagu jiro taraafikada isgoyska aad ka gudbayso ama waddada aad gelayso.



### WADDADA WEYN EE KALA QAYBSAN

Waddada hor taada ah waa ay kala qaybsan tahay. Calaamadani waxay hagtaa isu socodka agagaarka martada ama xayndaabka.




### HAL WADO

Gaadiidku waxay u socdaan oo keliya jihada fallaarta.



### CALAAMADAHA KONTROOLKA HAADKA



Calaamadahani waxay calaamadeeyaan meeshaad aadi karto iyo meeshaad u leexan karto, waxayna inta badan isticmaalaan calaamad fallaar ah. Calaamaduhu waxay ku yaalaan wadada hareeraheeda ama waxey ka laadlaadaan wadada. Mararka qaarkood falaadhaha cadcad ayaa sidoo kale laga yaabaa in lagu rinjiyeeyo wadada.



### CALAAMADA HA GALIN

Waxaad calaamaddan ku arki doontaa meelaha bannaan ee waddooyinka aanad geli karin. Waxaad ku arki doontaa meelaha laga baxo, isgoysyada waddooyinka kala qaybsan, iyo meelo badan oo ku yaal waddooyinka hal-jidka ah.



### JID KHALDAN

Waxaad samaysay leexasho khaldan oo waxaad gashay haad ay gaadiidku kasoo soo socdaan. Ka saar gaarigaaga qaybta aad ka soo safartay ee wadada oo joogso una leexo gees sida ugu dhakhsaha badan oo badbaado leh ee surtagalka ah.



### CALAAMADAHA MUUJINAYA IN AAN LA BAASI KARIN

Calaamadahani waxay calaamadeeyaan meesha aan ammaan u ahayn in baabuur kale la dhaafo. Calaamada aagga aan baasi karin waxay ku taallaa bilowga aagga aan la dhaafi karin. Meelaha laga gudbayo waxay ku salaysan yihiin fogaanta aad hore u arki karto. Meelaha loo ogol yahay in la gudbo, waxaad samayn kartaa sidaas oo keliya haddii ay ammaan tahay. Calaamadaha muujinaya aaggaga aan la baasi karin ee laamiga ayaa lagu sifeeyay bogga 42.



### CALAAMADA JOOGSIGA

Calaamada joogsiga waxay la macno tahay inaad si buuxda u istaagto oo aad sugto ilaa inta gaadiidka iyo dadka lugaynaya ay gudbayaan ka hor intaadan sii socon. Ku joogso khadka joogsiga haddii uu qof maraayo. Haddii loo baahdo, waxaad u sii socon kartaa dhinaca calaamada joogsiga ama cidhifka isgoyska ka dibna sii socon kartaa marka ay nabdoon tahay in sidaas la sameeyo.



## 2.3 CALAAMADAHA DIGNIINTA

Calaamadaha digniintu waa jaale leh xaraf madow ama calaamado inta badana waxaa loo qaabeeyay sida dheeman. Calaamadahani waxay kaaga digayaan inaad hoos u dhigto xawaaraha oo aad u diyaargarowdo inaad joojiso haddii loo baahdo; xaalad gaar ah ama khatar ayaa hor ah. Calaamadaha digniinta caadiga ah qaarkood ayaa hoos ku yaal.

### ISGOYSKA WADADA

Waxaa jira waddo kale oo kaa horreysa oo ka gudubta waddada aad mareysa. Si taxadar leh u fiirso gaadiidka jidkaaga.



### WUU DHAMAANAYAA HAADKA

Labada haad ee taraafikadu waxay dhawaan noqonayaan hal haad oo taraafig ah. Gaadiidku waa inay wado bixiyaan marka ay isku soo darmayaan.



SI TARTIIB AH UGU QALOOCANEYSO MIDIG WADADA kaa horeysa waxey u leexaneysaa si tartiib tartiib ah dhanka midig. U diyaargarow inaad beddesho jihada.



### CALAAMADA TARAAFIGA AYAA KAA HOREYSA

Calaamadahani waxaa loo adeegsadaa waddooyinka loo isticmaalo xawliga sarreeyo. U diyaar garow isgoys iyo iftiinka joogsi.



### MASHIINADA BEERAHA

U digtoonow dhaqdhaqaaqa qunyar socodka ah, qalabka beeraha ee waddooyinka. Iska yaree xawaarahaaga oo si tartiib ah u gudub.



SIBIBIQ AH MARKII AY QOYAN TAHAY Waddada ka horraysa waxay noqotaa mid sibiig leh cimilada qoyan. Hoos u dhig xawaarahaada markey xaaladahan jiraan.

### ISKU-IMAATINKA TARAAFIKADA

Haddii aad ku sugan tahay wadada weyn oo aad aragto calaamadan, u diyaargarow baabuurta kale ee ku dhex milmaya haadkaaga.



### ISGOYSKA DADKA LUGEENAYA

Iska ilaali dadka ku socda ama ku hor ordaya gaarigaaga hortiisa.



### CALAAMADA MUUJINEYSA INEY KAA HOREYSO WADO LEEEXATO

Waxaa la isticmaalaa marka lagu daro calaamadaha qalooqa marka ay jirto baahi loo qabo in lagu soo jiito dareenka dheeraadka ah ee isbeddelka jihada wadada.


### WADO LABO JIHO LEH

Kusii nagaaw midigta sababtoo ah waxaad ka baxaysaa waddo hal-jiho ah waxaadna gelayso waddo laba-jiho leh.



### CALAAMADA JID-GOYNTA DEERADA

Waxaa laga yaabaa inay jiraan deero isku dayaysa inay ka gudbaan waddada aagga. Tartiibso oo si taxadar leh u daawo.



### XAWAARAHA KA BIXIDA WADO WEYN

Xawaraha lagu taliyay ee ku socda meesha laga baxo.

### WAXAA BILAABMEYSA WADADA WEYN EE KALA QAYBSAN

Waxaad ku soo dhawaanaysaa meesha ay xariijin dhexe taraafikada labada dhinac u kala qaybin doonto.



### BUUR

Calaamadani waxay digniin u tahay dhammaan baabuurta in wadada ka horeysa ay hoos ugu dhacdo buur. Waa in aad hubisaa biriigyadaada ka hor intaadan buurta hoos ugu dhicin.



AHEAD

OR

200 FT

OR

200 FEET

### KA GUDUBKA LA HORMARIYAY EE DUGSIGA

Waxaad ku dhawaaneysaa aag dugsi oo isgoys leh. U fiirso carruurta iyo isgoyska calaamadeysan ee dugsi. Midabka calaamadani wuxuu noqon karaa jaale.

### WAXAA DHAMAADAY WADADA WEYN EE KALA QAYBSAN

Taraafikada labada dhinac masii kala qaybin doonto xariijin dhexe. Iska ilaali baabuurta soo socota.



### ISGOYSKA T AYAA KAA HOREEYA

Waddada aad ku socoto toos uma sii socon doonto. U diyaari inaad u leexato midig ama bidix.

### GAADHIGA FARASKU RIIXAYO

Ka digtoonow gawaarida sida qunyarta u socda, ee farduhu riixayaan ee waddooyinka maraya. Iska yaree xawaarahaaga oo si tartiib ah u gudub.




### ISTAAGA BAS ISKUUL AYAA KAA HOREEYSA

Waxaad ku dhawaaneysaa meel bas dugsi oo istaagay uu ka soo qaadi doono ama ku dejin doono rakaabka. Iska eeg carruur. U diyaargarow inaad istaagto.

## 2.4 CALAAMADDA GAADIIDKA SI TARTIIB AH U SOCDA

Saddex xagale liimi ah oo dhalaalaya oo ka muuqda xagga dambe ee gaariga macnaheedu waa inuu ku socdaa 35 mph ama ka yar. Waxa laga yaabaa inaad calaamaddan ku aragto qalabka dayactirka waddooyinka, gawaarida beeraha, ama gaariyada fardaha ay riixayaan.



## 2.5 CALAAMADHA HAGITAANADA

Calaamadaha hagitaanadu waxay muujinayaan jihooyinka iyo fogaanta meelo kala duwan, ama meelaha sida magaalooyinka, garoomada diyaaradaha, khadadka gobolka; ama meelaha xiisaha leh sida jardiinooyinka qaranka, meelaha taariikhiga ah, ama matxafyada. Calaamadeeyaasha Maylka waxay muujinayaan inta mayl u jirta halka uu marinka gobolku ka soo galay gobolka aad ku socoto. Waxa loo isticmaali karaa in lagu xisaabiyo inta aad ka fog tahay bixiddaada ama meeshaad u socoto iyo in la sheego goobta saxda ah ee aad ku sugan tahay markey imaato xaalad degdeg ah.




## 2.6 CALAAMADHA ADEEGA

Calaamadaha adeegga ayaa muujinaya goobta adeegyada kala duwan; sida meelaha lagu nasto, goobaha shidaalka, meelaha kaamamka, ama isbitaalada.



## 2.7 CALAAMADHA MARINKA

Qaabka calaamada marinka waxa ay tusinaysaa nooca wadada ay tahay - wadada isku xirta gobollada, wadada wayn ee Maraykanka, wadada Iowa, wadada ismaamulka, iwm. Inta aad safarka ku jirto, raac calaamadaha si aad jidkaaga ugu sii socoto.



## 2.8 CALAAMADHA TARAAFIKADA

Marka lagu daro calaamadaha taraafikada, xakameeyaha taraafikada ayaa laga yaabaa iney bixiyaan sharci fulinta, shaqaalaha waddooyinka, ama ilaalada meesha dugsiga looga gooyo wadada. Waa inaad raacdaa tilmaamaha ka imaada dadkan.



Calaamada taraafikada ee caadiga ah

### Casaan tikh ah

Wuxuu ku farayaa inaad si dhammaystiran u joogsato.

### Casaan biligleynaya

Ula dhaqan sida calaamad joogsiga oo kale.

### Jaalle tikh ah

Ha gelin isgoyska haddii aad si ammaan ah u istaagi karto. Haddii aadan si ammaan leh u istaagi karin, si taxaddar leh uga sii gudub isgoyska.

### Jaalle biligleenaya

Si taxaddar leh usii soco. Wado see baabuurta iyo dadka lugaynaya oo sii soco marka ay nabdoon tahay.

### Cagaar tikh ah

Soco, laakiin kaliya marka isgoysku uu faaruq yahay. Wado sii baabuurta iyo dadka lugeynaya ee jooga guda isgoyska. Marka nalku is beddelo, gaadiid badan ayaa laga yaabaa in ay ku kulmaan isgoyska, marka waana inaad siisaa waqti ay ku faaruqiyaan.

### Falaarta cas

Darewalada u leexanaya bidix ama midig waa inay joogsadaan.

### Falaadh Jaalada ah

Calaamada leexashada bidix ama midig ayaa ku dhaw inay casaan noqoto. Ha gelin isgoyska haddii aad si ammaan ah u istaagi karto. Dhameystir leexashadaada bidix ama midig haddii aad horay ugu jirtay isgoyska.

### Falaarta jaalaha ee bigbigleeneysa

Wado sii gaadiidka iyo dadka lugeynaya ee soo socda; ka dibna bidix u leexo adigoo taxadar muujinaayo. Gaadiidka soo socda ayaa leh iftiinka cagaaran.

### Falaarta cagaaran

Darawaliintu waxay ku socon karaan inay u leexdan bidix ama midig. Gaadiidka soo socdaa waa inuu joogsadaa. Toos ha u socon. U wad gaariga kaliya jihada falaarta ay muujineysa. Bixi xaqa wado siinta gawaarida kale iyo dadka lugeynaya ee horay ugu sugnaa isgoyska.



Madaxa calaamada fallaarta

## 2.9 ISGOYSYADA WADADA TAREENADA

Isticmaal taxadar dheeraad ah markaad isticmaaleyso isgoosyada tareenada, waligaa ha ku joojin gaarigaaga jidka tareenada. Tareenadu dhaqso uma joogsan karaan.

Calaamadaha digniinta ee la hormariyay iyo calamadaha laamigu waxay muujinayaan waddooyinka tareenada ee ka gudbaya waddada kaa horeysa. Markaad ku soo dhawaanaysa dariiqyada tareenka, ka takhalus waxyaabaha ku mashquulinaya, daaqaadahaaga hoos u deji, oo dami muusiggaaga. U diyaargarow inaad istaagto ka hor intaadan gelin wadada tareenka haddii tareen ku soo wajahan yahay isgoyska. Calaamadaha laamigu waa “X” weyn oo ay ku qoran yihiin wadada xarfaha “RR”. Calaamadahani laguma isticmaalo dhammaan isgoosyada.

Calaamadaha muujinaya isgoyska wadada tareenka ayaa la dhigay isgoosyada tareenada dadweynaha. Calaamadani macneheedu waxa weeye eeg labada dariiq, dhegayso oo u hogaansama tareenada. Calaamadda uu ku qoran yahay lambar ee ka hooseysa calaamada isgoyska tareenka ayaa tilmaamaya inay jiraan wax ka badan hal waddo tareen kadib calaamadda.

Calaamadaha nalka ee biligleynaya ayaa laga yaabaa in lala isticmaalo calaamada muujineysa isgoyska wadada tareenka. Joogso marka nalalku ay bigleynayaan. Ha gudbin ilaa aad si badbaado leh u samayn karto. Haddii ay jiraan wax ka badan hal waddo oo tareen, taxadar muuji inaad iska fiiriso tareenada ka imaan kara isku jihada ama kala jihada.

Albaabyo leh nalal biligleynaya ayaa loo isticmaalaa isgoosyada qaarkood. Joogso marka ay nalalku bilaabaan inay bigleeyan ka hor inta aanu albaabku hoos u furmin. Sii joogsi ilaa albaabadu kor u kacayaan oo ay nalalku joojinayaan biligleynta. Waligaa haku wadin agagaarka albaabbada. Waa khatar sharcigana way ka soo horjeeda. Albaabada wadada tareenada iyo nalalka digniinta ayaa kaaga digaya in tareen uu soo socdo.


Isgoosyada jid-weynaha iyo wadada tareenka waxaa lagu calaamadeeyay magaca jidka tareenka iyo lambarka la wacayo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Haddii aad ka warhesho cilad ku imaada calaamada ama xaalad kale oo khatar ah (sida baabuur kharaabay, xannibaad kale, ama burbur ku imaada jidka tareenka), wac lambarka meesha ku dhagan si aad u ogeysiiso jidka tareenka ee habboon.



## LOO BAAHAN YAHAY IN AAD JOOGSATID

Dhammaan basaska dugsiyada, basaska waaweyn ee kirada ah, darawalada sida rakaabka ee kirada ah (sida Uber ama Lyft), iyo dhammaan baabuurta loo baahan yahay in lagu dhejiyo walxaha khatarta ah, waa in ay ku istaagaan 15 ilaa 50 tallaabo meel u jirta jidadka tareenada ka hor inta ayna gudbin. Haddi sarkaal booliis ah ama calaamada taraafikada wadada ay jiheeyaan gaadiidka wadada weyn si ay u socdaan, uma baahnid inaad istaagto. Sidoo kale uma baahnid inaad istaagto haddii isgoosyada lagu calaamadiyay calaamad “EXEMPT”.

## 2.10 GOOBAHA SHAQADA



Aaladaha xakamaynta taraafikada sida looxyada fallarta, calaamadaha taraafikada ee ku meel gaarka ah, calan wadayaasha, iyo aaladaha wadada haga ayaa la dhigaa goobaha ay ka socdaan shaqooyinka si darawalada looga dhigo kuwo og xaaladaha kala duwan. Inta badan calamadaha goobaha shaqadu waxaa loo qaabeeyay dheeman, inkasta oo calammo yar ay yihiin afar geesood. Oranji waa midabka aasaasiga ah ee calaamadahan iyo aaladaha digniinta.

Aaladaha iyo calamadaha xakameeya taraafikada ayaa loo isticmaalaa in lagu calaamadiyo goobaha shaqo ee ay ka socdaan dhismaha, dayactirka, sahanka, iyo dib-u-hagaajinta. Kuwani waxay caawiyaan in darawallada iyo dadka lugeynaya si badbaado leh loogu hago inta la maraayo goobta shaqada iyagoo ay ilaalinayaan shaqaalaha waddada. **Feejignow oo si taxadir leh u wad maadaama ganaaxyadu ay labanlaabmi karaan aagagga shaqada.**

Aagagga shaqadu waxay noqon karaan kuwo khatar leh, shaqaalaha waddooyinkuna adiga ayay kugu tiirsan yihiin si aad u ilaaliso badqabkooda:

LA SIM XAWAARAHAGA XAALADAHARA TARAAFIKADA.

ADEEC DHAMMAAN TILMAAMAHA AY BIXIYEEN CALAAMADAHARA, CALAAMADAHARA TARAAFIKADA IYO CALAN WADAYAASHA.

KORDHI MASAFAADA SOO SOCOTA.

DIGTOONIDAADA DHAN SII WADISTA.

## LOOXYADA FALAARAH



Falaaryada waaweyn ee biligleynaya ayaa caadi ahaan la adeegsadaa marka haadka ama garabka la xiro.


## CALAN SIDAYAASHA

Dadka haya baddiilada ay ku qoran yihiin joogso/gaabso ayaa gacan ka geysta xakamaynta taraafikada goobaha shaqada. Raac tilmaamahooda. Waa inay xiran yihiin garamo jaale-cagaar ah ama oranji ah, shaarar ama jaakado. Caadi ahaan waxay isticmaali doonaan calaamado joogsi/gaabis ah. Calamada cas ayaa laga yaabaa in la isticmaalo marmar.



## AALADAHARA HAGITAANADA

Calaamadeeyayaasha jid-goynada, baalalka toosan, durbaannada, koojooyinka, iyo qalabka tuubo ahaanta ayaa ah aaladaha ugu badan ee loo isticmaalo in looga digo darawallada xaaladaha aan caadiga ahayn iyo kuwa khatarta ah, iyo in lagu hago darawallada si badbaado leh marka la maraayo aagga shaqada.



Jaantuska 2.1: Calaamadaha xakamaynta haadka



Wao hal-seed leh




Wado labo-seed leh


Jaantuska 2.2: Khadadka wado siinta



Jaantuska 2.3: Calaamadaha ka-gudbitaanada isgoyska, laymanka joogsiga, iyo falaaraha jihooyinka



Jaantuska 2.4: Haadadka laga soo laaban karo



## 2.11 CALAAMADAHHA LAAMIGA IYO XAKAMEYNADA KALE EE HAADKA

Calaamadaynta laamigu waxay caawiyaan hagida iyo habaynta gaadiidka, sida calamadaha waddooyinka. Waxaad arki kartaa keligood ama ayagoo lala isticmaalay calaamadaha iyo calaamadaha taraafikada. Khadadka cadcad ayaa kala saaraya gaadiidka isla jihada u socda. Khadadka jaalaha ah ayaa kala saaraya gaadiidka u socda jihoyin iska soo horjeeda.

Waddooyinka labada seed leh waxaad ku arki doontaa khad jaale tikh ah leh oo ay ku ag yaalliin khad gogo'an meelaha qaar ah. U gudbitaanka dhinaca leh xariiqda jaalaha tikhda ah lama ogola. Baabuurta dhinaca leh xariiqda gogo'an ayaa laga yaabaa inay dhaafaan marka ay badbaado tahay in sidaas la sameeyo.

## 2.12 KHADADKA WADO SIINTA

Khadadka wado siinta waxay ka kooban yihiin safaf saddex xagale oo cadcad ah oo u jeeda dhinaca baabuurta kusoo socota. Khadadkani waxay ku fidsan yihiin haadka wadada si ay u muujiyaan barta ay tahay in baabuurtu wado bixiyaan iyada oo la raacayo calaamadda "Yield" ama calaamadda "Yield Here To Pedestrians".

## 2.13 CALAAMADAHHA KA-GUDBITAANADA ISGOYSKA, LAYMANKA JOOJSIGA, IYO FALAARAHHA JIHOYIINKA


Marka loo baahdo inaad istaagto sabab calaamad ama seenyaale ah, waa inaad istaagtaa ka hor inta aanu gaarigaagu gaarin khadka joogsiga, ama ka-gudubka wadada haddii uu mid jiro. Ka-gudbitaanada isgoysyada ayaa qeexaya aagga ay tahay in dadka lugeynaya ay ka gudbaan waddada. Waa inaad wado siisaa dadka lugeynaya ee soo galaya ama ku dhow inay galaan jidka isgoysyada. Dhammaan jidadka isgoysyada lama wada calaamadeen. Ka digtoonow dadka lugeynaya marka aad ka gudbeyso isgoysyada aan lahayn jid gooyooyin qeexan.

Calaamadaha fallaar oo khaas ah ayaa laga yaabaa inay ku yaalan oo marka la isticmaalo ay muujiyaan dhaqdhaqaaqa la oggol yahay ama loo baahan yahay marka gaari lagu wadaayo haadkaas.

## 2.14 HAADADKA LAGA SOO LAABAN KARO

Haadadka lagu safro qaarkood waxaa loogu talagalay in ay gaadiidka u jeediyaan hal jiho waqtiyada qaarkood iyo jihada ka soo horjeeda waqtiyada kale. Waddooyinkan waxaa badanaa lagu calaamadeeyaa khadadka jaalaha ah oo laba-labo iskula socdaan. Kahor intaadan bilaabin inaad ku dhex kaxeeyso, hubi si aad u aragto haadka aad isticmaali karto wakhtigaas. Waxaa laga yaabaa inay jiraan calaamado ku dhejisan wadada dhinaceeda ama dusheeda sare. Mararka qaarkood nalal gaar ah ayaa la isticmaalaa. Falaarta cagaaran waxay la macno tahay inaad isticmaali karto haadka hoosteeda ah; casaanka "X" macnaheedu waa inaad isticmaali karin. Calaamada Jaalaha biligleyneyso ee "X" macnaheedu waa in haadka loogu talagalay leexasho oo keliya. Jaallaha joogtada ah ee "X" macnahiisu waa in isticmaalka haadku is beddelayo oo ayna qasab kugu tahay inaad ka guurtaa isla marka ay nabdoon tahay inaad sidaas samayso.

**Jaantuska 2.5: Haadka leexashada-dhinaca bidix ee la wadaago**



## 2.15 HAADKA LEEHASHADA-DHINACA BIDIX EE LA WADAAGO

Haadadka leexashada dhinaca bidix ee la wadaago ayaa loo keydiyay baabuurta sameenaya leexashada dhanka bidixda labada jihoba. Laamiga, fallaaraha bidix-u-leexashada ee taraafikada halka jiho waxay isku beddeshaa fallaarta dhinaca gacanta bidixda ee taraafikada jihada kale ka imanaya. Haadadkani waxaa dhinac walba waxaa dhinac walbo ugu calaamadeeyan khad jaale oo joogto ah iyo mid layn jaale ah oo gogo'an. Gawaaridu waxa laga yaabaa inay soo galaan oo istaagaan haadka ka hor inta aanay u leexan bidix, laakiin haadka looma isticmaali karo in lagu gudbo.



**Jaantuska 2.6: Calaamada haadka horey loo qoondeeyay**

Tusaalahan, haadku waxa loo qoondeeyay baabuurta ay halka ruux ka badan kujiri karaan (high-occupancy vehicles, HOV) ee wada laba ama dad ka badan.


## 2.16 HAADADKA HOREY LOO QOONDEEYAY

Wadooyin kala duwan hal ama in ka badan ayaa laga yaabaa in loo qoondeeyo baabuurta gaarka ah. Haadadka horey loo qoondeeyay waxaa lagu calaamadeeyay calaamado sheegaya in haadka loo qoondeeyay isticmaal gaar ah, oo inta badan leh dheeman cad oo lagu dhejiyay wadada dhinaceeda iyo/ama lagu rinjiyeeyay oogada wadada. Ha ku safrin mid ka mid ah haadkan haddii aysan ahayn inaad ku shaqaynayso nooca gaadiidkaas.

## 2.17 ISTICMAALKA GUUD EE HAADKA

- Waddada leh laba haad ama in ka badan oo isku dhinac u socda, haadka bidix ayaa guud ahaan loo isticmaalaa in laga gudbo. Waddada leh saddex haad ama ka badan kusoco haadka midig ama bartamaha marka laga reebo inaad rabto inaad gudubto. Haddii ay jiraan gawaari badan oo soo galayaan, waxa fiican inaad isticmaasho haadka dhexe.
- Haddii aysan ku amrin aalada hagta gaadiidka ama mas'uulka, weligaa ha ku wadin garabka wadada.
- Waligaa garabka ha marin, hadday laami tahay iyo haddii kale. Darawalada kale makaa filaayaan inaad halkaas joogto waxaana laga yaabaa inay wadada kasoo baxaan ayagoona waxba eegin.
- Meeshii aysan jirin calaamado ama haad lagu calaamadeeyay in lagu xakameeyo leexashada, waa inaad ka leexataa haadka kuugu dhow jihada aad rabto inaad aado, oo aadna u leexato haadka kuugu dhow kan aad ka timid. *(Eeg jaantuska 2.7)*
- Markaad leexashooyin sameyneyso, ka gudub hal haad una gudub haadka kale sida ugu macquulsan adiga oo aan ka gudbin xariiqyada haadka ama faragelin gaadiidka wadada ku socda. Marka aad dhammayso leexashadaada, waxaad u beddelan kartaa haad kale haddii aad u baahato.

**Jaantuska 2.7: Markaad leexasho sameyneyso, haadkaaga joog oo u leexo haadka u dhow kii aad ka timid.**



## 2.18 CALAAMADAHA LAAMIGA IYO HAADADKA BAASKIILADA

### HAADADKA BAASKIILADA

Haadadka Baaskiiladu waa qaybo ka mid ah dariiqyada wadada ee loogu talagalay in ay isticmaalaan baaskiil-wadayaasha waxaana lagu calaamadeeyaa khadadka cad cad ee joogtada ah, oo ay la socdaan calaamadaha baskiilka oo laamiga lagu sawiray iyo tilmaamo.

- Waddooyinka baaskiilada qaarkood ayaa laga yaabaa in laga sii fogeeyo taraafikada iyada oo la adeegsanayo khadadka cad ee labo-labada ah, geesaha, qoraallo, ama kuwa waxyaabah lagu beero.
- Waddooyinka baaskiilka waxaa laga yaabaa in lagu buuxiyo rinji cagaaran, darawaliintuna waa in ay fiiro gaar ah u yeeshaan oo ay raadiyaan baskiil-wadayaasha ka hor intaysan gudbin laamiga cagaaran. Wadayaashu waa inaysan ku istaagin laamiga cagaaran. (Eeg jaantuska 2.8)
- Wadayaashu waxa laga yaabaa inay ku wadaan haadka baaskiilka marka ay dhaqdhaqaaqa leexashada oo kaliya waana inay si taxadar leh uga eegaan dhinaca iyo gadaasha baabuurkooda baskiileey oo ayna si taxadar leh uga gudbaan.

### CALAAMADAHA HAADKA LA WADAAGO

Calaamadaha haadadka laamiyada ee la wadaago, oo sidoo kale loo yaqaan "sharrows" waxay uga digayaan darawalada joogitaanka baaskiil wadayaal, ku dhiirigelinayaan darawaliinta maritaanka badbaadada leh ee baaskiil wadayaasha, waxayna yareeyaan dhacdooyinka baaskiil ku wadida wadada khaldan iyo suurtagalnimada shilalka albaabada. Si ka duwan jidadka baaskiilka, sawirada baskiilka ee laamiga lagu sawiray uma qoondeeyaan qayb gaar ah oo ka mid ah waddada isticmaalka gaarka ah ee baaskiillada. (Eeg jaantuska 2.9)

### BOXYADA BASKIILADA

Boxyada baaskiiladu waa calaamado laamiga lagu xardhay oo loogu xagaajiyay si loogu oggolaado baaskiil wadayaasha hab nabdoon oo ay ugu leexan karaan isgoys calaamadeysan. Boxyada baaskiiladu waa cagaar joogto waxayna leeyihiin sawirka baaskiil wade. Waxay ku yaalliin meel ku dheggan ka gudubka-isgoysyada waxayna daboolaan dhammaan ballaca haadka wadada. (Eeg jaantuska 2.10)

### ASTAANTA OGAADAHA BAASKIILKA


Calaamad ayaa lagu dhejin karaa laamiga taasoo tusinaysa booska ugu wanaagsan ee baaskiil-wadaha si uu u kiciyo calaamadda taraafikada.



Jaantuska 2.8: Haadka cagaaran ee baaskiilka



Jaantuska 2.9: Calaamadaha haadka la wadaago



Jaantuska 2.10: Boxyada baaskiilada



## 2.19 CALAAMADAHA BAASKIILKA IYO DADKA LUGEENAYA

### AALADA AFAR GEESKA EE SIDA DEGDEGA AH KU IFTIIMAYSA


Aalada afar geeska ee sida degdega ah ku iftiimaysa waxa gacanta ku dhaqaajiya dadka lugaynaya ayagoo badhanka riixaya waxayna inta badan ku yaalaan isgoysyada aan lahayn calaamadaha taraafikada ama isgoysyada badhtamaha wadada. Marka la daaro, nalalka jaale-oranjiga ayaa si degdeg ah u iftiimaya. Darawaliintu waa in ay u istaagaan dadka lugeynaya ee ku jira isgoysyada oo ayna ka digtoonaadaan dadka lugeynaya si ay u galaan isgoyska marka nalka uu biligleynayo.



Jaantuska 2.11: Aalada afar geeska ee sida degdega ku iftiimaysa

### ILAYSYADA ISKU-DHAFAN EE MUUJINAYA LUGEYAYAASHA

Ilaysyada isku-dhafan ee muujinaya lugeeyayaasha ayaa u oggolaanaya dadka lugeynaya inay si badbaado leh uga gudbaan waddada. Ilaysyadani waxay shaqeeyaan oo kaliya marka uu daaro qof lugeynaya. Marka nalalka oo dhami ay mugdi yihiin, darawaliintu waxay ku sii socon karaan si taxaddar leh. Marka la daaro, iftiinka jaalaha ee hoose ayaa iftiimaya, darawaliintuna waa in ay hoos u dhigaan xawaarahooda. Kadibna iftiinka jaalaha ah ee hoose ayaa noqda mid joogto ah, darawaliintuna waa inay isu diyaariyaan inay joogsadaan. Kadibna labada nalal ee cas ee sare waxay noqdaan kuwo joogto ah, darawaliintuna waa inay u istaagaan dadka lugaynaya. Muddo yar ka dib, labada nalal ee cas ee sare waxay bilaabi doonaan inay iftiimaan. Darawaliintu waa inay joogsadaan haddii aanay horeba sidaan sameyn, ka dibna waxay ku sii socon karaan si taxaddar leh haddii jid gooyntu faaruq tahay.



Jaantuska 2.12: Ilayska isku-dhafan ee muujinaya lugeeyayaasha

## 2.20 DADKA LUGEYNAYA EE ARAGGA NAAFADA KA AH

Haddii gaadhigaagu u soo dhawaado qof uu hogaaminayo xayawaanka adeega loo rabaayadeeyay, oo ku socda bakoord cad ama bakoord cad oo caarad guduudan leh, waxay u badan tahay in qofku aragga naafada ka yahay. Isticmaal taxaddar dheeri ah si aad uga hortagto dhaawac soo gaara qofkaas.

## 2.21 ISGOYSYADA

### GOORMA AYEY TAHAY INAAD BIXISO XAQA WADO-SIINTA

Meesha baabuurta ama dadka lugaynaya ay u badan tahay inay ku kulmaan midba midka kale oo aysan jirin calaamado ama seeynaale lagu xakameynayo socodka gaadiidka, waxaa jira sharciyo sheegaya cidda ay tahay inay bixiso xaqa jid siinta. Xeerarkani waxay u sheegaan darawallada qofka ugu horreeya ee baxaayo iyo cidda ay tahay inay sugaan xaaladaha kala duwan ee taraafikada. Sharcigu wuxuu leeyahay yaa ku qasban **bixinta** xaq wado siinta; qof walbo ma **siineyso** helida xaqa wado siinta. Iyadoo aan loo eegin cidda xaqa u leh wado siinta, waa inaad samaysaa wax kasta oo aad kari karto si aad uga hortagto inaad qof lugaynaya ama baabuur kale ku dhacdo.

Si gaar ah uga digtoonow wadayaasha baaskiilada. Halka wadayaasha baaskiillada iyo darawaliintu ay tahay in ay wadaagaan xuquuqda iyo mas'uuliyadda isticmaalka waddada, darawaliinta waa in ay ogaadaan wadayaasha baaskiiladu inay aad ugu nugul yihiin shilalka. Sidaa darteed, darawaliinta baabuurta waa inay adeegsadaan xirfadaha dhib kasto looga badqabi karo oo wanaagsan si ay uga fogaadaan inay isku dhacaan wadayaasha baaskiillada. U diyaargarow inaad bixiso xaqa wado-siinta, xitaa mararka qaarkood baaskiil wadayaashu waa inay adi wado ku siiyaan. Ma laha wax difaac ah oo ka dhan gawaarida, markaa waa masuuliyadaada darawal ahaan inaad ilaaliso iyaga.



KU GUULDAREYSIGA INAAD BIXISO XAQA WADO SIINTA WAA #1 EE SABABTA DHIMASHOYINKA LA XIRIIRA TARAAFIKADA GUDAHA IOWA.

## ISGOYSYADA LA KONTROOLO (LAGU ASTAAMEEYAY CALAAMADO)


Shuruucda soo socota ee xaq u yeelashada wadada ayaa lagu dabaqaa isgoysyada:

- Waa inaad wado bixisaa markaad rabto inaad sameyso leexashada dhinaca midig ka dib markaad ku istaagto iftiin cas. Leexashooyinka dhinaca midig ee casaanka ah waa la oggol yahay haddii aysan jirin calaamad mamnuucaysa.
- Dareewalada ka gudbaya wadada-socodka ee dhinaca wadada, soo galaya ama ka baxaya waddo baabuur, luuq ama baarkin waa inay wado siiyaan dadka lugeynaya. Waa sharci darro in lagu kaxeeyo wadada-socodka ee dhinaca wadada marka laga reebo inaad ka gudbeysa.
- Dareewaliinta u leexanayo bidix waa inay u hoggaansamaan baabuurta soo socda ee si toos ah ugu socda hor. (Eeg jaantuska 2.13a)
- Joogsiga jidka ee dhan walba, dareewalka soo gaaraya isgoyska marka hore ayaa hor baxaya (ka dib marka uu si buuxda u istaago). Baabuurta imaanaya isku mar, baabuurka dhanka midig jira ayaa marka hore bixi doona. (Eeg jaantuska 2.13b)
- Darawalada ka soo galaya wado ka soo baxa wadada laamiga, luuqa ama wadada dhinaceeda waa in ay wado siiyaan baabuurta marka horeba wadada weyn mareysay.
- Waa inaad wado siisaa ama u joogsataa dadka lugeynaya ee ku jira jidadka isgoysyada ee calaamadsan ama aan calaamadda lahayn.


## ISGOYSYADA AAN LA KOONTAROO LIN (AAN CALAAMADSANEYN)

Marka la joogo isgoyska aan lahayn calaamad joogsi ama seeynaalaha taraafikada, waa mas'uuliyadda dhammaan darawallada inay hoos u dhigaan xawaarahooda oo ay si taxadar leh u wajahaan. Dhammaan sharciyada kor ku xusan ee lagu dabaqo isgoysyada la kontaroolo waxay sidoo kale khuseeyaan isgoyska aan la kontaroolin. Taxaddar dheeraad ah waa in lagu isticmaalo isgoysyada aan la kontaroolin.


**Baabuurka cas waa inuu u wado siiyaa baabuurta ku soo wajahan tusaalayaashan.**




**Jaantuska 2.13a: Joogsiga labada wado (gaadiidka isgoyska ma joogsanaayo) -** Sababtoo ah baabuurka cas ayaa bidix u bixinaayo taraafikada, baabuurka cagaarka ah ee toos u socda ayaa ugu horreeyntii baxaya.



**Jaantuska 2.13b: Joogsiga dhamaan jidadka -** Labo baabuur ayaa isku mar soo gaaray isgoyska. Baabuurka cagaaran wuxuu xaq u leeyahay wadada oo wuu tagi karaa marka hore.



**Jaantuska 2.13c: Wado-siinta gawaarida isgoyska -** Baabuurta guduudan waa inay wado siiyaan baabuurta cagaaran.



**Jaantuska 2.13d: Isgoyska aan la kontaroolin -** Labo baabuur ayaa qiyaastii isku mar soo gaaray isgoyska. Darawalka jira dhinaca bidix (baabuurka cas) waa inuu wado siiyaa darawalka dhinaca midigta (baabuurka cagaaran).


## 2.22 BAABUURTA XAALADHA DEGDEGGA

Sii xaq wado-bixinta baabuurta booliska, matoorka dab-damiska, ambalaasta, ama gaari kale oo loogu talagalay xaaladaha degdega ee isticmaalaya seeriga ama hoonka hawada, iyo/ama leerarka bigbigleenaya ee casaanka ama buluuga ah adoo qaadaya talaabooyinkan soo socda:


- U bax jiid dhanka midig ee wadada, ama sida ugu dhow dhanka midig ee suurtogalka ah, marka aad aragto ama maqashid gaariga xaaladaha degdega oo ka soo socda jiho kasta.
- Haddii aad ku sugan tahay isgoys (oo ay ku jiraan meelaha martooyinka), ku wad isgoyska ka hor intaadan gees u bixin. Si kastaba ha noqotee, haddii aad joogto waddo-yar ama waddo weyn oo ay kala gooyso dhex-mare, oo uu baabuurka xaaladaha degdega ah uu dhinaca kale joogo, uma baahnid inaad istaagto.
- Ku joogso ugu yaraan 500 tallaabo gadaasha baabuur kasta oo xaalad degdeg loogu talagalay ayagoo isticmaalaya nalal iyo seeriyaal.




**3 HAAD AMA KA YAR: DHAMMAAN GAADIIDKU WAA INAY ISTAAGAAN**



Jid-weynaha labada-seed leh




Jid-weynaha labada-seed oo leh seed dhexeed loogu tala galay leexashada




Jid-weynaha sadexda-seed leh

**4 SEED/HAAD AMA KA BADAN: GAWAARIDA KA SOO SOCDAAN GADAASHA WAA IN AY ISTAAGAAN**



Jid-weynaha afarta-seed leh



Jid-weynaha afarta-seed oo leh seed dhexeed loogu tala galay leexashada

Jaantuska 2.14: Marxaladaha baska dugsiga oo istaagay

## 2.23 BASASKA DUGSIYADA

### MARXALADA 1-AAD EE LA XIRIIRTA BASKA DUGSIGA

**Waxaad gaari ku waddaa waddo laba ama saddex- haad leh**

#### Kaga spo dhawaanshaha baska xagga danbe

Markaad aragto nalalka digniinta ee casaanka bigbigleenaya ama nalka jaale-oranjiga, laguuma ogola inaad dhaafto baska dugsiga oo waa inaad u diyaargarowdaa inaad istaagto. Ku istaag gadaasha baska dugsiga marka baska dugsigu istaago oo gacanta joogsiga la dheereeyo. Ku joogso meel aan ugu yaraan 15 tallaabo ugu dhaw xagga dambe ee baska, oo sii joogso ilaa gacanta joogsiga laga soo celiyo oo baska dugsigu bilaabo inuu mar kale dhaqaaqo. Si taxaddar leh usii soco.

#### Kala kulmitaanka baska xagga hore

Markaad aragto nalalka digniinta ee jaale-oranjiga oo biligleynaya, waa inaad baabuurkaaga xawaarihiisa aadan ka badinin 20 mph oo aad u diyaargarowdo inaad joogsato. Istaag baska dugsiga hortiisa marka baska dugsigu istaago oo gacantiisa joogsiga la dheereeyo. Sii joogso ilaa gacanta joogsiga dib loo laabayo. Si taxaddar leh usii soco.

**Ku xadgudubka sharcigan waxay keeni kartaa in laysankaaga lagaa laalo/joojiyo ilaa 180 maalmood.**

### MARXALADA 2-AAD EE LA XIRIIRTA BASKA DUGSIGA

**Waxaad gaari ku waddaa waddo leh afar haad ama ka badan**

#### Kaga spo dhawaanshaha baska xagga danbe

Markaad xagga dambe uga soo dhowaanayso, xeerarku waxay la mid yihiin waddada labada ama saddexda haad leh. Markaad aragto nalalka digniinta ee casaanka bigbigleenaya ama nalka jaale-oranjiga, laguuma ogola inaad dhaafto baska dugsiga oo waa inaad u diyaargarowdaa inaad istaagto. Ku istaag gadaasha baska dugsiga marka baska dugsigu istaago oo gacanta joogsiga la dheereeyo. Ku joogso meel aan ugu yaraan 15 tallaabo ugu dhaw xagga dambe ee baska, oo sii joogso ilaa gacanta joogsiga laga soo celiyo oo baska dugsigu bilaabo inuu mar kale dhaqaaqo. Si taxaddar leh usii soco.

#### Kala kulmitaanka baska xagga hore

Markaad baska kula kulanto mid ka mid ah labada haad ee iska soo horjeeda (ama ka badan), uma baahnid inaad joogsato, xitaa haddii basku uu istaagay iyadoo nalalku ay biligleynayaan oo ay gacanta istaagu fidsan tahay. Tani waa marka kaliya ee aad ka gudbi karto baska dugsiga ee la istaajiyay oo gacantiisa joogsigu fidsan tahay.

**Ku xadgudubka sharcigan waxay keeni kartaa in laysankaaga lagaa laalo/joojiyo ilaa 180 maalmood.**



## 2.24 BAARKINKA

Darawaliinta ayaa mas'uul ka ah inay hubiyaan in baabuurtoodu aysan noqonin khatar ka dib marka ay baarkin gareeyan. Markaad baabuur baarkin gareeneeyso, raac tilmaamahan.

- Ku baarkin gareeyso aaga loo qoondeeyay baarkinka, haddii ay suurtagal tahay.
- Haddii ay qasab tahay inaad ku baarkin gareysato waddada, dhig gaarigaaga meel ka fog taraafikada/gaadiidka wadada intii suurtagal ah. Haddii ay jirto gees-wado, ku baarkin gareeyso meel u jirta 18 inji geesta wadada ama ka dhaw.
- Ku baarkin gareeyso meel si filan ka fog haad kasta oo lagu safro si aad uga fogaato faragelinta gaadiidka/taraafikada wadada.
- Iska eed gaadiidka/taraafikada ka hor inta aanad furin albaabka. Kaga soo deg gaariga dhinaca geesta wadada haddii loo baahdo.

## 2.25 LAMA OGOLLA BAARKIN

Waxaa jira meelo badan oo aadan gaari ku baarkin gareysan karin. Is xaqiiji calaamadaha mamnuucaya ama xaddidaya baarkinka. Qaar ka mid ah xannibaadaha baarkinka ayaa lagu muujiyay calaamado gees oo midab leh. **Haku baarkin gareeyan:**

- Jidka ay dadku maraan.
- Ka soo hor jeedda waddada dadweynaha ama mida khaaska ah.
- Buundo kasta oo ka baxsan xuddudaha magaalada ama tannelyada wadooyinka.
- Garabka baabuur kale oo istaagay ama la baarkin gareeyay (laba baarkin).
- In ka dhow shan tallaabo biyo-mareenka dabka; ama aaga cas ee loo qoondeeyay biyo-mareenka dabka.
- In ka dhow 10 tallabo meel u jirta calaamada joogsiga.
- In ka yar 20 tallaabo meel u jirta albaabka galitaanka ee goob dab-damis.
- In ka yar 50 tallaabo meel u jirta isgoyska tareenka.
- Gudaha "NO PARKING ZONES" oo inta badan lagu astaameeyay calaamado ama jardiino rinji jaale leh.
- Gudaha isgoyska.
- Wadada lagu lugeeyo.
- Isgoysyada gobollada iyo wadooyinka waaweyn



### BAARKINKA LOOGU TALA GALAY DADKA NAAFADAHA AH

Ku baarkin gareeyso oo kaliya meel bannaan oo loogu talagalay dadka naafada ah haddii aad heysato Ogolaanshaha Baarkinka Dadka Naafada ah. Macluumaad ku saabsan u qalmitaanka, booqo [iowadot.gov/mvd/vehicleregistration/Persons-with-disabilities](http://iowadot.gov/mvd/vehicleregistration/Persons-with-disabilities).

## 2.26 U DHAWAANSHAHA BAABUURTA LA JOOJIYAY SHARCIGA IOWA EE KA GUDBITAANKA AMA HOOS U DHIGIDA XAWAARAHA

Sharciga Iowa ee ka Gudbitaanka ama Hoos u Dhigida Xawaaraha waxa uu u baahan yahay wadayaasha baabuurta in ay baddalaan haadadka ay ku socdaan marka ay u soo dhowaanayaan mid ka mid ah baabuurta la joojiyay ee muujinaya nalalka ifaya.

- Xaalad kasta oo degdeg ah la istaajiyay, jiidid, soo kabasho, dayactir, dhismo, qashinka walxaha ah, ama gaari ururinta loo rabo dib-u-warshadaynta oo la shiday bigleynta nalashiisa.
- Baabuur kasta oo la joojiyay, oo uu ku jiro gaariga rakaab ah, oo si joogto ah u muujinaya nalalka khatarta.


Haddii haad beddeshadu aanu suurto gal ahayn, sharcigu mamnuucayo, ama aanu ammaan ahayn, waa inaad hoos u dhigtaa xawaarahaada oo aad u diyaargarowdaa inaad joojiso. Iyadoo aan la cayimin xawaare qaas ah, waa inay noqotaa mid macquul ah oo ku habboon xaaladaha jira.

**Ku xadgudubka sharcigan waxay keeni kartaa in shatiga lagaa joojiyo ilaa hal sano.**

## 2.27 GAARI KA BIXINTA TARAAFIKADA HADUU GALO SHIL FUDUD

Haddii aad ku lug yeelato shil aan dhaawac lahayn, sharciga Iowa waxa uu dhigayaa in aad ka saarto gaarigaaga haadka wadista baabuurta haddii gaarigu shaqayn karo oo si badbaado leh loo dhaqaajin karo. Daqiiqad kasta oo haadka taraafikadda ee gobollada la iskala goosho la xannibo, khatarta shil labaad ayaa u kordhaysa qiyaastii 2.8 boqolkiiba. (Eeg jaantuska 2.15)

Jaantuska 2.15: Sharciga Gaari ka Bixinta Taraafikada Hadduu Galo Shil Fudud





## CUTUBKA 3

# U DIYAAR GAROWGA WADISTA

Tagitaanka meesha aad u socoto si badbaado leh oo dhib la'aan ah waxay si weyn ugu xiran tahay go'aamada iyo tallaabooyinka aad qaadatay ka hor intaadan kicin matoorkaaga. Xaqiiji in adiga iyo baabuurkaagaba aad diyaar u tihiin waddada idinka horraysa.

### 3.1 DAYACTIRIDA GAARIKAAGA

Si habboon u dayactirka gaarigaaga kaliya kuma badbaadineyso lacag, laakiin waxay ku siineysaa faa'iido xilliga ay imaato xaalad degdega ah. Raac jadwalka dayactirka ee lagu taliyay ee ku qoran buugga milkiilaha gaariga.

### NIDAAMKA BAREEGA

Baabuurta iyo gawaarida xamuulka qaada waxay u baahan yihiin laba hab oo bareeg oo kala qeybsan, bareega cagta iyo bareeg baarkinka. Mootooyinka iyo mootooyinka yaryar waxay u baahan yihiin ugu yaraan hal. Haddii bereegyadaadu aysan u muuqanin in ay si fiican u shaqaynayaan, aay samaynayaan qeylo badan, ay lasoo baxaan ur aan caadi ahayn, ama badiilada bareega uu dhulka tago, makaanik ula tag sii uu u baaro.

## LEERARKA

- Hubi in seeynaalada, nalalka biriiga, nalalka dambe, iyo nalalka horeba ay si habboon u shaqaynayaan adiga oo ka eegaya dibadda baabuurka.
- Dhammaan baabuurta iyo gawaarida xamuulka qaada waxay u baahan yihiin laba nal oo hore ee gaariga: mid midig iyo mid bidix. Waxa kale oo aad u baahan tahay ugu yaraan hal nal oo cas gadaasha baabuurka, waana in uu muuqdaa ugu yaraan 500 tallaabo. Iftiin cad oo iftiimiya taarikada xaga danbe ayaa sidoo kale loo baahan yahay.
- Haddii baabuurku ku rakiban yahay seeynaalada leexashada, waa inay shaqeeyaan. Seeynaalada leexashada ayaa looga baahan yahay dhammaan baabuurta, gawaarida xamuulka, iyo tareelada ka ballaaran 40 inji.
- Iftiinka hore ee sida khaldan loo dhigay ayaa ka iftiimi kara meel aanu ku caawinin waxana laga yaabaa inuu indho-tiro darawallada kale. Haddii ay dhibaato kaa haysato aragga habeenkii, ama darawallada kale ay si joogto ah kuugu iftiiminayaan nalkooda hore, makaanik u gee si uu kaaga eego nalka hore.
- Nadiifi layrarka hore, kuwa kaydka, biriiga, iyo kuwa dambe. Wasakh oo dulsaar mata muraayadaha leerarka ayaa hoos u dhigi kara waxtarka iftiinka boqolkiiba 50.



Jaantuska 3.1: Ku xaqiiji dherarka diilinta taayarta adoo isticmaalayo shilin

## MURAAAYADA HORE EE GAARIGA, MASAXAYAASHA MURAAAYADA HORE, OOGADAH MURAAAYADA

Qaado tillaabooyinka soo socda si aad u hubiso inaad si fiican wax u arki karto markaad baabuur wado.

- Beddel daaqadaha burburay ama jabay. Muraayadaha waxyeelladu soo gaartay waxay si fudud ugu jebi karaan shil yar ama marka wax ku dhacaan muraayadda hore ee gaariga. Waxay kaloo qarir kartaa wax aragga.
- Nadiifi muraayadda hore ee gaariga. Iftiinka qoraxda ama nalalka hore ee gawaarida ee kusoo dhaca muraayad wasakhaysan ayaa ka dhigaysa mid adag in la arko.
- Ka dhig dareeraha loo isticmaalo nadiifinta muraayada hore ee gaariga mid buuxa oo isticmaal dhaqida ka-hortaga-barafka marka heerkulku hoos uga dhici karo heerka qabowga.
- Ka nadiifi barafka budada ah, barafka, ama qabowga **dhamaan daaqadaha**. Nadiifi daaqadaha hore, kuwa dhinaca iyo kuwa dambe inta aadan gaariga wadin.
- Hubi in masaxayaasha muraayada hore, kuwaas oo loo baahan yahay, inay ku jiraan xaalad wanaagsan. Haddi masaxadu aanay nadiifinaynin muraayada hore, bedel.
- Iska ilaali daaqadaha midabka leh. Sharciga Iowa wuxuu u baahan yahay in muraayadaha midabka leh iyo daaqadaha ee ugu dhaw dhanka midig ama bidix darawalka inay ugu yaraan oggolaadaan soo gelida 70 boqolkiiba iftiinka. Iowa ma laha ka-dhaafitaanka caafimaad ee daaqadaha midabka leh. Heerarka midabaynta ee daaqada aad [www.iowadot.gov/mvd/resources/windowtintingstandards.pdf](http://www.iowadot.gov/mvd/resources/windowtintingstandards.pdf).
- Ka dhig wax aragtidaada mid aan xannibnayn. Waxba ha ka soo laadlaadin muraayadahaaga dambe ama haka buuxin muraayadda hore istiikaro.

## TAAYARADA

Taayarada dhamaaday, duufmay, ama aan dheeli tirnayn waxay kordhin karaan masaafadaada joogsiga, waxay sababaan in lakab biyaha wadada ay kala jaraan istaabashada taayarka iyo dhulka (*Fiiri bogga 56*), waxay sababaan googo'a taayirka si degdeg ah, hoos u dhigida dhaqaalaha shidaalka, kana dhigaan gaariga mid adag in la wado oona la istaajiyi. Haddii baabuurku soo boodboodo, isteerinka uu ruxmo, ama baabuurka uu dhinac aado, u tag makaanik si uu u eego.

- Xaqiiji in taayirradaadu si fiican u buufsan yihiin. Xaqiiji in cadaadiska hawada ee gudaha taayarka adoo isticmaalaya qalabka cabbirka cadaadiska hawada marka taayiruhu qabow yihiin. **Cadaadiska taayirka ee lagu taliyay waxa uu si caadi ah ugu dul qoran yahay istiikarka lagu dhajiyay gudaha albaabka darawalka ama gudaha buugga mulkiilaha gaariga.**
- Ku xaqiiji dherarka diilmaha taayarka adoo isticmaalaya shilin. Ku dhaji shilinka gudaha diilinta taayarka "Head" marka hore. Haddii diilinta taayarku aanu iman ugu yaraan xagga sare ee madaxa Lincoln, taayirku aamaan ma ahan oo waa in la beddelaa. (*Eeg jaantuska 3.1*)

## NIDAAMKA ISTEERINKA

Haddii baabuurku ay adag tahay inuu leexdo ama aanu leexan marka ugu horraysa ee isteerinka la leexiyo, u tag makaanik si uu u eego isteerinka.

## NIDAAMKA CANDHADA GAARIGA

Candhada gaarigaaga waxay kaa caawinaysaa inaad xakamayso gaarigaaga waxayna ku siinaysaa socod raaxo leh oo ah dusha sare ee wadooyinka kala duwan. Haddii baabuurka uu aad u boodboodo, ama uu sii boodboodo ka dib markaad marto bambi ama ka dib markaad istaagto, waxa laga yaabaa inaad u baahato shoogag cusub ama qaybo kale ee candhada gaariga.

## NIDAAMKA WASAKH BIXINTA

Nidaamka wasakh bixintu wuxuu ka caawiyaa in uu ka saaro gaaska sunta ah matoorka, wuxuuna caawiyaa inuu qaboojiyo gaasaska kulul ee ka imaanaya matoorka. Uurka ka soo baxa wasakh daadaneysa wuxuu sababi karaa dhimasho waqti aad u yar gudaheed.

### WALIGAA HA UGA TAGIN MATOORKAAGOO

### SHIDAN GARAASHKA, AMA HAKU FADHIISAN

### GAARI SOCDO ADOONA FURIN DAAQADA.

## MATOORKA

Matoorka oo si liidata loo hagaajiyay waxa laga yaabaa in uu lumiyo tamarta loogu baahan yahay wadista caadiga ah iyo xaaladaha degdega ah, waxa laga yaabaa in aanu kicin, waxa dhici karta in dhaqaalihisa shidaalku xumaado, uu hawada wasakheeyo, waxana uu kugu istaagi karaa marka aad wadada marayso taas oo keeni karta dhibaato ku imaada gaadiidka wada gooshayaan. Raac habraacyada lagu taliyay gudaha buugga mulkiilaha gaariga markii loo baahdo dayactir.

## HOONKA

Hoonku uma eka inuu yahay aalad badbaado oo muhiim ah, laakiin digniin ahaan, wuxuu badbaadin karaa noloshada. Waa in kaliya loo isticmaalo digniin ahaan dadka kale.

## MURAAYADAHA

Waa inaad awood u leedahay inaad ku aragto muraayadaada dambe ugu yaraan 200 tallaabo oo kaa dambeeya. Haddii aragtidaada uu xannibo rar, waa inaad haysataa muraayad dibadda ah. Baabuurta basaska yaryar ah ama nooca basaska yaryar oo kale ah waa in ay lahaadaan muraayadaha dibada ee bidix iyo midig ah.

## 3.2 HAGAAJINTA KURAASTA IYO MURAAYADAHA

Booska saxda ah ee kursiga iyo muraayadda ayaa muhiim u ah in si badbaado leh loo xakameeyo gaariga. Hagaaji kursiga darawalka iyo muraayadaha ka hor intaadan wadin si aad u hubiso inay si sax ah kuugu diyaarsan yihiin.

### BOOSKA KURSIGA

Ku fadhiiso dhabarkaaga si adag oo ku wajahan kursiga. Waa in ugu yaraan 10 inji u dhexeeyso isteerinka iyo laabtaada, iyadoo bacda hawadu ay ku fiiqan tahay laabtaada.

Dusha sare ee isteerinka waa in aanu ka sareyn garbahaaga. U dhaqaaji kursiga hore ama gadaal si ay ciribtaadu u taabato dhulka oo aadna si degdeg ah u dhex marin karto biriiga iyo sheelaraaha. Darawalada gaagaaban ayaa laga yaabaa inay u baahdaan barkinta kursi ama fidiyeyaasha badeelaha si ay si badbaado leh ugu fariistaan meel 10 inji u jirta bacda hawada. Xakameeyaha madaxu waa inuu ahaadaa bartamaha madaxa darawalka.

### MURAAYADAHA

Habka hoose waxa uu bixiyaa aragtida ugu fiican ee haadadka ku xiga, si loo helo badbaadada ugu badan.

**Muraayada gudaha:** Si toos ah ugu fadhiiso kursiga darawalka oo hagaaji muraayadda gudaha si ay u qabata dhammaan daaqadda dambe. Tani waa muraayadda ugu muhiimsan ee loogu talagalay in lagu eego waxa ka dambeeya gaariga.

**Muraayad dhinaca-bidix:** U janjeeri madaxaaga dhanka daaqada bidix, oo u hagaaji muraayada bidixda si aad si dirqi ah ugu aragto dhinaca baabuurka. Markaad si toos ah u fadhiisato, baabuurku waa in aanu mar dambe ka sii muuqan muraayadda.

**Muraayada dhanka-midig:** U janjeero dhanka midig ka kor konsolada dhexe ee baabuurka oo u hagaaji muraayadda midigta si aad si dirqi ah ugu aragto dhinaca midig ee baabuurka.

### 3.3 NIDAAMYADA LA HORMARIYAY EE DARAWAL-CAAWINTA

Nidaamyada la hormariyay ee darawal-caawinta (Advanced driver-assistance systems, ADAS) waa astaamo teknolajiyeed oo loogu talagalay in lagu kordhiyo badbaadada wadista baabuurka. Astaamaha sida bareegga otomaatika ee degdega ah, la socodka meelaha aan sida quman loo arkeynin, iyo digniinta isku dhaca hore ayaa dhamaanteena si badbaado leh noo ilaalinaya, laakiin waa uun haddii si sax ah loo isticmaalo. Waa muhiim in la fahmo sida ADAS u shaqeyso iyo xaddidaaddooda.

Inta lagu jiro tijaabada gaari wadista, waxa laga yaabaa inay ku caawiyaan tignoolajiyada badbaadada ee gaariga sida kamaradaha dib-ulaabashada laakiin waa in aanay ku caawin tignoolajiyada ku haboon gawaarida sida aalada sida otomaatika u xakameysa bareega iyo sheelarada.

Jaantuska 3.2: Tignoolajiyada gaariga ee loo oggol yahay ama aan loo oggolayn tijaabada

NIDAAMYADA DIGNIINTA	LOO OGOL YAHAY TIJAABADA
Digniinta dib-u-laabashada	Haa
La socodka iyo digniinta beelaha aan sida fiican loo arkeynin	Haa
Tignoolajiyadaha kamarada (gadaal, aragtida dhinaca, aragtida hareeraha)	Haa
Digniinta ku aadan xawaaraha goolada	Haa
Tignoolajiyadaha ogaanshaha (ogaanshaha baaskiilka, lugeeyaha, iyo caqabadaha)	Haa
Nidaamyada digniinta ee isku dhaca xaga hore	Haa
Digniin xawaare sare	Haa
Aalada digniinta ee ka bixista haadka	Haa
Aalada darawalka ka saacideeysa baarkin gareyska	Haa
Digniinta isdhaafka gawaarida ee xaga danbe	Haa
NIDAAMKA CAAWINTA	LOO OGOL YAHAY TIJAABADA
Nidaamyada bareega otomaatika ee xaaladaha degdega ah ama caawinta bireega	Haa
Bareega otomaatika ee dib-u-laabashada	Haa
Ka caawiyaha ilaalinta haadka	Haa
Aalada ka caawinta ka fogaanshiyaha shilka ka imaan kara u leexashada bidix	Haa
Aalada sida otomaatika u xakameysa bareega iyo sheelarada	Maya
Ka caawiyaha ku baarkin gareyska barbarka si otomaatika ah	Maya

In kasta oo baabuurku leeyahay astaamo tignoolajiyadeed, waa in aad muujisaa awoodda aad ku shaqayn karto gaadhiga haddii ay tignoolajiyaddu u baahan tahay darawalku in uu gacantiisa kusoo saaro, ay noqdaan kuwo aan shaqaynayn, ama darawalku uu ku hawlgalaayo baabuur kale kaas oo aan tignoolajiyada lahayn.

## TIGNOOLAJIYADA NIDAAMYADA DIGNIINTA EE GAARIGA

Ujeedada ugu muhiimsan ee teknooloojiyadani waa in digniino la siiyo darawalka xaalado gaar ah. Tignoolajiyada nidaamyada digniinta ee gaariga waxay ogeysiyaan darawalka digniinta, dhawaaqa, iftiinka, ama gariirka, in uu shil dhow yahay inuu dhaco, ama waxay bixiyaan digniin ah inay jirto dhibaato ama cillad. Inta badan tignoolajiyadaani waa kuwo dadban, taasoo la macno ah inay uga digaan darawalka arrin iman karta laakiin si toos ah ugama hortagayaan dhibaataada ama shilka. Darawalku waxa laga yaabaa inuu u baahdo inuu isbedel ku sameeyo socodka gaariga si looga hortago dhibaato ama shil.

### Digniinta dib-u-laabashada



**Sharraxaada:** Wuxuu adeegsadaa dareemayaasha dambe si uu u sawiro walxaha yaalo gadaasha baabuurka oo uu ku ogeysiyo haddii shay la ogaado.

**Sida ay u shaqeyso:** Muuqaalka digniinta ee dib-u-laabashada ayaa sawiro gadaasha baabuurka marka darawalku u beddelo marshada dib-u-laabasho. Waxay ku ogeysiin doontaa - iyadoo isticmaaleysa cod, gariir, ama cod iyo gariir isku jira - haddii uu shay jiro ama baabuur kaas oo ku toosan darawalka.

Waa inaad muujisaa dhammaan dhaqamada lagama maarmaanka u ah in si badbaado leh loola socdo oo loo maareeyo gaarigaaga markaad gadaal-u-laabaneyso. Kuwani waxaa ka mid ah hubinta dhammaan waxyaabaha soo socda:

- muraayadaha dhinacyada
- muraayada loo isticmaalo dib-eegida
- garbaha korkiisa (eegitaanada meelaha aan sida fiican loo arkin)
- kaamiro(yin) kale, haddii la qalabeeyay

### La socodka iyo digniinta beelaha aan sida fiican loo arkeynin



**Sharraxaada:** Wuxuu kaaga digayaa gawaarida kale ee ku dhex socda meelaha aad sida fiican u arkeynin iyagoo muujinaya calaamad, cod, ama gariir. Digniinta dheeraad ah ayaa laga yaabaa inay dhacdo haddii darawalku isticmaalo calaamada leexashada marka ay jiraan baabuur kale oo haadka ku jira.

**Sida Ay u Shaqeyso:** Kormeeraha dhinaca aan sida fiican loo arkeynin wuxuu kaa caawinayaa inaad si dheeraad ah uga warqabto gaadiidka kale. Digniinta uu bixiyo kormeeraha dhinaca aan sida fiican loo arkeynin waxay noqon karaan kuwo waxtar leh marka la samaynayo beddelka haadka, laakiin darawalku waa inuusan noqon mid is qancin oo ku xirnaanin oo kaliya kormeerayaasha dhinacyaasha aan sida fiican loo arkin markuu haadadka beddelanaayo. Kuwani waxaa ka mid ah iskaan-gareynta joogtada ah:

- muraayadaha dhinacyada
- muraayada loo isticmaalo dib-eegida
- garbaha korkiisa (eegitaanada meelaha aan sida fiican loo arkin)
- kormeeraha dhinaca aan sida fiican loo arkeynin, haddii la qalabeeyay



## TIGNOOLAJIYAHA KAMARADA

### Kamarada dhinaca danbe



**Sharraxaada:** Wuxuu ka caawiyaa in si toos ah loo arko walxaha yaala gadaasha gaariga isagoo muujinaya muuqaal ballaaran oo ah gadaasha baabuurka marka uu gadaal u laabanayo. Qaar ka mid ah kamaradaha ayaa muujiya aragti ka ballaaran kuwa kale.

**Sida ay u shaqeyso:** Marka darawalku u wareejiyo marshada dhanka dib-u-laabashada, kamarada danbe ayaa bilaabta inay shaqeyso si ay u muujiso aagga ka dambeeya gaariga. Iyada oo ku xidhan gaariga, shaashada soo bandhigida ayaa laga heli karaa konsoolka dhexe, muraayada gudaha ee loo isticmaalo in gadaal lagu eego, gudaha qorax ka xijaabaha, ama meelo kale.

Ha ku tiirsanaan kamaradaha dambe, oo sii wad inaad xaqiijiso:

- muraayadaha dhinacyada
- muraayada loo isticmaalo dib-eegida
- garbaha korkiisa (eegitaanada meelaha aan sida fiican loo arkin)
- kaamiro(yin) kale, haddii la qalabeeyay

### Kaamirada aragtida dhinaca



**Sharraxaada:** Waxay muujinaysaa muuqaalka la balaariyay ee haadka dhinaca baabuurka marka aad isticmaasho calaamada leexashadaada ama aad gacanta ku dhaqaajiso aalada. Aaladani waxa uu la wadaagaa isticmaalka kormeerayaasha dhinaca aan sida fiican loo arkeynin.

**Sida ay u shaqeyso:** Aaladani waxey ku tusinaysaa aragti muuqaal ahaan ah waxa ku xiga ama ka soo baxaya garabka gaarigaaga. Waxa laga yaabaa in lala isticmaalo, ama meesha, muraayadaha qaaraamiga. Waxaad isticmaali kartaa calaamada leexashada ama waxaad shidi kartaa aalada adigoo isticmaalaya badhan inta badan ku yaal seeynaalada kabaalka leexashada. Muujintani waxa laga yaabaa in aan la heli karin marka gadaal loo laabanayo ama waxa laga yaabaa in ay ku shidmato xawaaraha hooseeya.

Kaamirooyinka dhinac-eegga waa in lala isticmaalo muraayadaha qaaraamiga iyo eegitaanada meelaha aan sida fiican loo arkin (hubinta korka garbaha). Qaar ka mid ah baabuurta cusub ayaa laga yaabaa inay ku rakiban yihiin kamirooyinka dhinac-eegga oo ku jira halkii muraayadaha qaaraamiga.

### Kormeeraha aragtida-hareeraha ama nidaamka kormeeraha aragtida-agagaarka



**Sharraxaada:** Wuxuu ka saacideeyaa darawaliinta inay si fudud u baarkin gareystaan iyagoo si fiican u fahmaya agagaarka baabuurka iyada oo loo marayo muuqaal fogaan ka araga il shimbir dusha gaariga. Kormeeraha aragtida-agagaarka ayaa kaa caawinaya muuqaal ahaan inaad u xaqiijiso booska baabuurka marka loo eego khadadka agagaarka meelaha baabuurta lagu baarkin gareysto iyo walxaha ku xiga.

**Sida ay u shaqeyso:** Kormeeraha aragtida-agagaarka wuxuu ka soo saaraa muuqaal afar kamaradood, isagoo ku muujinaya sawirada isku dhafan shaashadda sidii inay jirto hal kamarad oo leh aragtida isha shimbirta camal taas oo ka sarreysa gaariga. Afarta kamaradood ee xagasha ballaaran ee xagga hore, xagga danbe, bidixda, iyo midigta ayaa ah aasaaska muraayadda aragtida-agagaarka.

Nidaamyada kormeeraha aragtida-hareeraha ama kormeeraha aragtida-agagaarka waa in lala isticmaalaa muraayadaha qaaramiga iyo eegida dhinacyaha garbaha (eegitaanada meelaha aan sida fiican loo arkin). Qaar ka mid ah baabuurta cusub ayaa laga yaabaa in lagu qalabeeyo nidaamyada kormeeraha aragtida-hareeraha ama kormeeraha aragtida-agagaarka halkii loo isticmaali jiray muraayadaha qaaraamiga.

## TIGNOOLAJIYADAHHA OGAANSHAHHA

### Ogaanshaha baaskiilka, lugeeyaha, iyo caqabadaha



OGAANSHAHHA BAASKIILKA

**Sharraxaada:** Wuxuu ku ogeysiinayaa marka baaskiil, lugeeye, caqabad tartiib tartiib usocota ama taagan la ogaado markii gaariga lagu wado xawaare hooseeya, guud ahaan agagaarka 25 mph. Nidaamyada qaarkood waxay ogaan karaan oo kaliya baaskiil wadayaasha, dadka lugeynaya, ama caqabadaha marka si toos ah loogu socdo baabuurka hortiisa iyo marka isku jiho loo socdo. Noocyada qaarkood ee ogaanshaha caqabadaha ayaa si otomaatig ah u qaban doona bareega.

**Sida ay u shaqeyso:** Dareemayaasha ku yaal xagga hore ama dambe (ama hore iyo xagga dambeba) ee gaariga waxay ogaan karaan sida uu baabuurku ugu dhow yahay baaskiilka, lugeeyaha, ama caqabada ah dhinaca hore ama gadaalba. Kuwani caadi ahaan waxay ku saleysan yihiin raadaar. Digniinuhu waxay ku iman karanaa qaab dhawaaqyo, muuqaal, gariir, garaaca bareega sida degdega ah, ama digniino isku dhafan. Dhawaaqyada gaariga ayaa noqda kuwa degdega ah marka baabuurku u soo dhawaado baaskiilka, lugeeyaha, ama caqabada. Shil ayaa soo dhow marka dhawaaqa gaariga uu noqdo mid joogto ah.




OGAANSHAHHA LUGEEYAHHA

Waa inaadan ku tiirsanaan ogaanshaha baaskiilka, lugeeyaha, ama caqabadaha. Had iyo jeer la soco agagaarkaaga oo si joogto ah u hubi dadka baaskiil wadayaasha ah, kuwa lugeynaya, ama caqabadaha, gaar ahaan meelaha magaalooyinka.



OGAANSHAHHA CAQABADA



Dareemayaasha waxay u baahan yihiin in la nadiifiyo si ay si fiican ugu shaqeyaan.

### Digniinta ku aadan xawaaraha goolada



**Sharraxaada:** Wuxuu kaaga digayaa markaad u soo dhowaanayso goolada ama aad ka baxeyso wadada si degdeg ah.

**Sida ay u shaqeyso:** Wuxuu kula socdaa xawaaraha gaariga iyo goobta uu ku sugan yahay isagoo adeegsanaya GPS-ka wuxuuna kuugu digayaa inaad hoos u dhigto xawaaraha gaariga markaad u soo dhowaanayso goolada ama aad ka baxeyso.

Waa inaadan ku tiirsanaan digniinaha ku aadan xawaaraha goolada oo aad ilaaliso xawaaraha badbaadada leh markaad baabuur wadid oo aad u dhowaanayso goolada ama aad ka baxeyso.

## Nidaamyada digniinta ee isku dhaca xaga hore



**Sharraxaada:** Waxay kugu baraarujinaysaa isku dhac shil oo kugu soo fool leh oo ka imaanaya gaari si tartiib tartiib ah u socda ama taagan ama shay hortaada yaal si aad dhakhso u qabato bareega ama u leexato. Digniinta oo keliya si otomaatig ah uguma qaban doonto bareega darawalka. Digniinta isku dhaca xagga hore waxay sawirtaa wadada ka horeysa markaad baabuur wadeyso.

**Sida ay u shaqeyso:** Dareemayaasha ku yaal xagga hore ee baabuurka ayaa ogaan kara sida uu baabuurku ugu dhow yahay baabuurta kale ee hortaada. Kuwani caadi ahaan waa kamarad ama aalad ku saleysan raadaar. Waxaa loogu talagalay in laguugu digo marka aad si khatar ah ugu dhowaanayso baabuurka ama shayga hortaada ah. Digniinuuhu waxay ku iman karanaa qaab dhawaaqyo, muuqaal, gariir, garaaca bareega sida degdega ah, ama digniino isku dhafan. Nidaamka digniinta ee isku dhaca xagga hore waxa uu sawiraa gaadiidka kaa horeeya 20 jeer ilbiriqsi ilaa 500 tallaabo horta gaarigaaga ka dibna wuxuu kaaga digayaa inaad qabato bareega ama isteerinka aad jarto haddii ay khatari kusoo jirto jidkaaga. Tusaale ahaan, halkan waxaa ah saddex heer oo digniin ah\*:

XAWAARAHA	WAQTIGA DIGNIINKA EE KA HOR ISKU DHACA
15-18 mph	3 ilbiriqsi
18-50 mph	4 ilbiriqsi
50+ mph	5 ilbiriqsi

Had iyo jeer waa inaad taxaddar muujisaa, si joogto ah aad u eegtaa gawaarida socota, oo aadna ilaalisaa masaafada daba socodka ee badbaadada leh. Haddii aad si aan ula kac ahayn aad ugu dhawaato baabuur kale, nidaamka digniinta isku dhaca xagga hore ayaa ku ogeysiin doona si aad si degdeg ah u qabato bareega ama aad u jarto isteerinka.

## Digniin xawaare sare



**Sharraxaada:** Waxay kaa caawisaa in aad ilaaliso xawaare badbaado leh iyadoo ku dhawaaqaysa digniin haddii aad xawaare sare ku socoto.

**Sida Ay u Shaqeyso:** GPS-ka ama xarunta macluumaadka baabuurka waa inay noqotaa mid casri ah si loo hubiyo in xawaaraha lasoo dhejiyay la yaqaano. Haddii xawaaraha lasoo dhejiyay la dhafo, digniinta ayaa bilaabeysa iney dhawaaqdo ama kuu soo dirto digniino muuqaal ah sida beddelka midabka ee shaashadda ama calaamada xadka xawaaraha oo biligleynaysa. Haddii digniintu dhawaaqdo, waa inaad si taxadar leh u qaboojisaa xawaaraha baabuurka ilaa xadka xawaaraha ku habboon adigoo sii daaynaya sheelaraaha ama si fudud uqabanaya bareega. Si adag ha u qaban bareega si aad u ilaaliso xawaare badbaado leh.

Waa inaad isku hallayn digniinta xawaaraha sare waana inaad had iyo jeer la socotaa xawaarahaaga, ilaali xawaaraha badbaadada leh, una hogaansan xadka xawaaraha ee ku qoran wadada.

## Aalada digniinta ee ka bixista haadka



**Sharraxaada:** Waxay ku ogeysiinaysaa marka aad ka baxayso haadkaaga iyadoo isticmaalaysa digniino muuqaal, gariir, ama dhawaaq ah. Aaladani waxay kaa caawin kartaa in aad kugu baraarujiso in aad dib ugu laabato bartamaha haadkaaga haddii aad si khalad ah u leexato, sidaasna waxey kaaga caawinaysa ka hortagga shil.

**Sida Ay u Shaqeyso:** Aaladani waxay isku haleysaa calaamadaha waddooyinka si ay u shaqeyso. Waxaa loogu talagalay in ay ku ogeysiiso haddii baabuurku bilaabo inuu ka baxo haadka waxeyna wadataa hal ama dhowr nooc oo digniino ah.

Ha isku hallayn aaladaha digniinta ee ka bixista haadka si aad u ilaaliso booska saxda ah ee haadka.


## Aalada darawalka ka saacideeysa baarkin gareyska



**Sharraxaada:** Waxey ku ogeysiisa booska walxaha ku hareeraysan gaarigaaga markaad baarkin gareysaneyso.

**Sida ay u shaqeyso:** Gaarigu waxa laga yaabaa inuu bixiyo digniino maqal ah oo sheegaya inay jiraan walxo yaalla xagga hore ama gadaasha gaariga. Inta u dhaxaysa dhawaaqyada dhawaaqa ayaa laga yaabaa iney soo yara gaabgaabtaan inta uu gaarigu shay ku sii dhawaanayo. Cod joogto ah macnaheedu waa baabuurku wuxuu u dhow yahay shay.

Ha isku hallayn oo kaliya dareemayaasha baarkinka si aad u ogaato dhammaan walxaha. Waxaa laga yaabaa in aysan ogaan walxaha dhulka fidsan, ka hooseeya bambarka, si aad ah ugu dhow gaariga, ama aad uga fog. La soco agagaarkaaga adigoo isticmaalaya muraayadaha, eegitaanada meelaha aan sida fiican loo arkeynin, iyo kamaradaha dib-eegista markaad baarkin gareysaneyso, oo ay ku jiraan ka warqabka dadka ama walxaha laga yaabo inay soo galaan wadada baarkinka.



## Digniinta isdhaafka gawaarida ee xaga danbe



**Sharraxaada:** Wuxuu kaaga digayaa haddii hal ama dhowr baabuur ay ku dhow yihiin inay galaan dariiqa aad dib ugu laabaneyso. Waxa uu ogaan karaa baabuurta laga yaabo in ay goyso marka aad gadaal u laabaneyso.

**Sida ay u shaqeyso:** Dareemayaasha ku hareeraysan gadaasha baabuurka waxay ogaadaan baabuurta kale ee ka soo socda bidix iyo midig. Waxa laga yaabaa in lagugu baraarujiyay dhawaaq digniin ah ama nalal biligleynaya muraayadaha ama dashboardka oo kuu digaya inaad istaagto.

Ha ku tiirsanayn oo kaliya digniinta isdhaafka gawaarida ee xagga dambe oo la soco agagaarkaaga adoo isticmaalaya muraayadaha, eegitaanada meelaha aan sida fiican loo arkin, iyo kamaradaha eegista xagga dambe, oo ay ku jiraan ka warqabka dadka ama walxaha laga yaabo inay soo galaan wadada u dhow gadaasha gaariga.

## TIGNOOLAJIYADAHAA CAAWIYA DARAWALKA

Ujeedada ugu muhiimsan ee tignoolajiyadahani waa in la sameeyo qayb ka mid ah shaqada wadista xaalado gaar ah. Nidaamyada tignoolajiyada cawinta baabuurka waxa ay ka caawiyaan darawalada in ay iska ilaaliyaan khataraha iyo shilalka. Qaar baa si otomaatig ah wax ugu hagaajiya baabuurka, qaarna waxay ka caawiyaan darawalka samaynta hagaajinta, sida bareeg qabashada ama isteerin leexitin. Waxaa laga yaabaa in darawalku u baahdo inuu isbeddel ku sameeyo shaqada baabuurka si looga hortago dhibaato ama shil, laakiin baabuurku wuu caawiyaa.

## Nidaamyada bareega otomaatiga ee xaaladaha degdega ah ama caawinta bareega



**Sharraxaada:** Wuxuu dareemi karaa gaawaari u socda tartiib ama joogsaday ama shay hor yaala oo wuxuuna si degdeg ah u qabtaa bareega haddii aad ku guul daraysato inaad ka jawaabto.

**Sida ay u shaqeyso:** Haddi aad ku guul dareysato in aad bareega ama isteerinka qabato si aad uga fogaato khatar kugu soo fool leh, baabuurka si dhaqsi ah ayuu u dhimi doonaa xawaaraha ama iskii ayuu u istaagayaa si uu uga fogaado shil. Waa in aad sii waddaa in aad ka iskaan gareyso jidka khataraha oo aad ilaaliso masaafada daba-socodka ee badbaado leh.



## Bareega otomaatiga ee dib-u-laabashada



**Sharraxaada:** Waxa uu qaban karaa bareegga haddii caqabad la arko marka gaariga dib loo soo celinaayo. Waxay kaa caawinaysaa inaad iska ilaaliso shil suurtagal ah marka baabuurku u socdo gadaal-gadaal.

**Sida ay u shaqeyso:** Markaad dib u soo laabaneyso, haddii shay la ogaado, waxa laga yaabaa inaad maqashid dhawaaqyo taxane ah ama waxaad arki kartaa tilmaameyaal muuqaal ah si aad kaaga digto in shay uu yaallo gadaal. Haddii aadan ka falcelinin, bareegga dib-u-laabashada ee otomaatiga ayaa is shidaaya, bareeggayadana ayaa isla markiiba la qabanayaa si looga fogaado shil iman kara.

Ha isku hallayn tignoolajiyada bareegga dib-u-laabashada ee otomaatiga. Sii wad inaad eegto muraayadaha, hubi garabka dushiisa (eegitaanada meelaha aan sida fiican loo arkin), oo isticmaal kamaradaha eegista xagga dambe haddii ay ku qalabeysan yihiin.

## Ka caawiyaha ilaalinta haadka



**Sharraxaada:** Aaladani waxey kaa caawin kartaa iney kugu soo celiso haadkaaga haddii aad ka baxdo, oo laga yaabo inay ka hortagto shil.

**Sida ay u shaqeyso:** Waxa laga yaabaa inaad ku hesho digniin hab dhawaaq, iftiin biligleynaya, ama gariir ah haddii baabuurku ka baxo haadka. Waa inaad ku noqotaa haadkaaga; haddii aadan tilaabo qaadin, aaladani ayaa laga yaabaa inay si tartiib ah gaariga ugu jiheeyo haadkiisa. Si fudud ayaa loo baabi'iyaa iyadoo la riixayo shaaga tartiib. Aaladani ma shaqayn doonto marka khadadka haadku daciif yihiin ama ay daboolaan baraf budo ah ama wasakh.

Darawalku waa inuusan ku tiirsanaan ka caawiyaha ilaalinta haadka oo had iyo jeer waa inuu ilaaliyaa kontoroolka baabuurka gudaha wadada oo uu ku jiraa gudaha haadka wadista.



## Aalada ka caawinta ka fogaanshiyaha shilka ka imaan kara u leexashada bidix



**Sharraxaada:** Habkani waxa uu la socdaa gaadiidka marka aad bidix uga leexinayso taraafikada xawaare hooseeya (sida nalalka taraafikada). Waxay daartaa dhawaaqyada digniinta iyo nalalka daashka waxayna si toos ah u qabanaysaa bareega haddii aad bidix ugu leexinayso dariiqa baabuur kale.

**Sida ay u shaqeyso:** Nidaamka caawinta leexashada dhinaca bidixda waxa uu la socdaa gawaarida jidka soo socda marka aad bilawdo u leexinta haadka ka soo horjeeda adoo isticmaalaya xawaare hooseeya. Haddii masaafada u dhexeeya gawaarida ay aad u yar yihiin si ay u ogolaadan in leexasho la sameeyo, nidaamku wuxuu ka hortagayaa in uu baabuurku hore u socdo.

Haddii shil baabuur soo socda uu soo dhawyahay, nidaamku wuxuu joojin doonaa leexashada wakhtiga haboon isagoo bilaabaya dhaqdhaqaaqinta bareega otomaatiga ee xaaladaha degdega.

Ha isku hallayn oo kaliya aalada ka caawinta ka fogaanshiyaha shilka ka imaan kara u leexashada dhinaca bidixda. Waa inaad si badbaado leh u sawirtaa khataraha oo aadna la socotaa bey'ada wadista ee ka horreeysa oo aad go'aamisaa marka ay nabdoon tahay in lagu sameeyo leexasho gawaarida kale hortooda.

## TIGNOOLAJIYADAHHA KU HABOON

Tignoolajiyadaha soo socdaan waxay siinayaan habboonaano darawalka umana baahna codsaduhu inuu muujiyo xirfadda loogu baahan yahay. Tignoolajiyadaha ku habboon looma oggola in la isticmaalo inta lagu jiro hab-socodka tijaabada wadista.

### Aalada sida otomaatiga u xakameysa bareega iyo sheelarada



**Sharraxaada:** Waxey kordhin kartaa ama hoos u dhigi kartaa xawaaraha baabuurka si ay u ilaaliso masaafada daba-socodka ee uu dajiyay darawalku. Noocyada la hormariyay waxay xitaa gaabin karaan oona joojin karaan baabuurka markuu gaarigu ku jiro saxmadda taraafikada ka dibna wuxuu u sheelareen karaa si otomaatiga ah.

**Sida ay u shaqeyso:** Waxaad sheelareyn kartaa oo kaliya ilaa xawaaraha aad dejisatay, ka dibna waxaad shidi kartaa aalada sida otomaatiga u xakameysa bareega iyo sheelarada (adaptive cruise control, ACC). Waxaad markaas u sheegi kartaa ACC inta aad rabto in farqigaaga masaafada daba-socodka ay noqoneyso (guud ahaan masaafayinka gaagaaban, dhexe, ama dheer).


Dareemayaasha gaariga ayaa ka akhriya wadada kaa horeysa gawaarida, iyagoo ilaalinaya masaafada u dhexeysa adiga iyo gaariga ka horeeya, hoos u dhigaya xawaarahaaga haddii loo baahdo si loo ilaaliyo masaafada. Si kastaba ha ahaatee, darawalka ayaa laga rabaa inuu ka warqabo agagaarkiisa. Cimilada xun iyo xaaladaha kale ee wadista ee aan badbaadada lahayn, waxa lagula talinayaa in aanad isticmaalin aalada sida otomaatiga u xakameysa xawaaraha la dejisaday, oo uu xitaa ku jiro ACC.

### Ka caawiyaha ku baarkin gareyska barbarka si otomaatiga ah



**Sharraxaada:** Wuxuu kaa caawinayaa in uu kugu hago meel barbar oo aad ku baarkin gareysan kartid. Wali adigaa masuul ka ah bareeg qabashada iyo la socodka hareeraha.

**Sida ay u shaqeyso:** Waxaad shidi kartaa dareemayaasha ka caawinta ku baarkin gareyska barbarka sida otomaatiga ah marka aad diyaar u tahay inaad baarkin gareysato. Nidaamka ka caawinta ku baarkin gareyska barbarka sida otomaatiga ah ee baabuurka ayaa kugu wargelin doona marka uu helo meel ku habboon in lagu barkin gareysto. Waa inaad raacdaa wixii talo ah ee uu baabuurku ku siiyo. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara hor uga sii bixida booska banaan, u beddelashada marshada dhinaca dib-u-laabashada, iyo ka qaadista gacmaha isteerinka. Darawalka ayaa ka mas'uul ah qabashada bareegga. Ka dib marka baabuurka la barkin gareeyo, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad wax yar wax ka hagaajiso si aad u xaqiijiso in baabuurka uu ku jiro meel wanaagsan.



Si taxadar leh dib u eeg buugga mulkiilaha gaarigaaga si aad u akhrido waxa ku saabsan aalad kasta oo kugu cusub oo aad u xaqiijiso inaad taqaan sida ay u shaqeyaan. Haddii aad weli su'aalo qabto, la xiriir ganacsadaha gaariga si ay kuugu sharxaan.

## 3.4 KA WARQABKA MEELAHA AAN SIDA FIICAN LOO ARKEYNIN

Meelaha aan sida fiican loo arkin waa meelo ka baxsan gaarigaaga oo aan lagu arki karin iyadoo la isticmaalayo muraayadaha. Meelaha aan sida fiican loo arkin ayaa sidoo kale ay sababi karaan xannibaado ku imaado xagga aragga oo ay ugu wacan tahay qalabka baabuurta (muraayadaha gadaal-eegista, dhejitaanada albaabka, iwm.) iyo hareeraha gaari wadistaada (geedaha, qorraxda, deyrarka, buuraha, iyo derbiyada).

### MEELAHA KALE EE UUSAN SI FIICAN DARAWALKU U ARKI KARIN

(Eeg jaantuska 3.3)

- Ha ku wadin meel kale oo uu darawalka kale si fiican u arki karin. Xawaare sare ku wad ama qabooji gaariga si darawalka kale uu u arko gaarigaaga.
- Markaad dhaafeyso baabuur kale, mar meesha uu darawalka kale si fiican uusan u arkeynin sida ugu dhakhsaha badan ee aad awoodo.
- Waligaa ha ag joogsan garabka baabuur weyn sida gaariga xamuulka qaada ama bas. Baabuurta waxey leeyihin aag ballaaran oo ayna si fiican u arkin wayna ku adag tahay inay ku arkaan.

### AAGAGAAGA AADAN SIDA FIICAN U ARKIN

- Ka digtoonow meelaha dabeeciga ah ee aadan sida fiican u arkin ee ah aaga gaarigaaga kuwaas oo saameeya muuqaalkaaga ka baxsan gaarigaaga.
- Ka digtoonow meelaha aadan sida fiican u arkin markaad beddelaneyso haadadka iyo/ama aad dhex galeyso wadada gawaarida ay ku socdaan (eg jaantuska 3.3).
- Meelaha aan sida fiican loo arkin ayaa kordhin kara xaaladaha cimilada iyo iftiinka maalinka. Qorraxdu waxay abuuri kartaa meelo aan si fiican loo arkin oo leh hummaag noqodka ka baxsan oogadaha dusha daaqadahaaga. Muraayad hore ee gaariga ayaa ah meesha ugu badan ee ay ku dhacaan hummaag noqodyada iyo meelaha aan sida fiican loo arkin. Ookiyaalayaasha qorraxda ama isticmaalka qorax ka xijaabaha baabuurta badidood waxay kaa caawinayaan in indhahaaga laga ilaaliyo milicsiyada kuwaas oo adkeynaya in wax la arko.

## 3.5 SUUMANKA KURAASTA IYO KUWA XAKAMEEYA ILMAHA


### SUUMANKA KURAASTA

Kahor intaanu gaarigu xitaa uusan dhaqaaqin, qof walba waa in si fiican suunka u xiran yahay. Shilalka baabuurta waa dilaaga koowaad ee dhalinyarada. Waxa ugu fudud ee aad samayn karto si aad isaga ilaaliso inaad noqoto mid la xisaabiyay waa inaad si fiican u dhuujisataa suunkaaga.

Si fiican ugu xir suunka dhabta miskahaaga. Haddii aad uur leedahay, waxaad si badbaado leh u xidhan kartaa suunka ah dhinaca miskaha, sida ugu hooseeya ee calooshaada hoosteeda intii suurtoagal ah.

Xiro la'aanta suunka ayaa loo arkaa dembi koowaad, taasoo la macno ah in lagu joojin karo ujeeddada keliya ee ah u hoggaansanaan la'aanta sharciga suunka. Ku xadgudubka sharcigan ayaa lagu muteysanayaa ganaax dhan \$50 qofkiiba iyo \$100 socdaale kasta oo ka yar 18 sano.

Jaantus 3.3: meelaha aan sida fiican loo arkeynin



SUUMANKA KURAASTA AYAA AH HABKA UGU FIICAN EE LOOGA HORTAGI KARO DHIMASHADA IYO DHAAWACA KA IMAADA SHIL. INTAAS MARKII LAGU SII DARO, WAXAAD JABINEYSAA SHARCIGA IOWA ADOO MARKAA XIRANEYNIN HAL XABO.

IOWA WAXAY U BAAHAN TAHAY DHAMMAAN RAKAABKU EE FADHIYA KURAASTA HORE EE GAARIGA INEY XIRTAAN SUUMANKA KURAASTA. SIDOO KALE SHARCIGU WUXUU QUSEEYAA RAKAABKA FADHIYAAN KURAASTA DANBE OO KA YAR DA'DA 18 SANO.

## SUUMANKA KURAASTA IYO SHRCIYADA IOWA

- **Ilmo ka yar hal sano oo miisaankiisu ka yar yahay 20 rodol** waa in lagu sugaa nidaamka xakamaynta ilmaha ee gadaal u jeeda.
- **Ilmo ka yar lix sano** waa in lagu sugaa nidaamka xakamaynta ilmaha (kursiga badbaadada ama kursiga xoojiyaha, ma'aha suunka kursiga).
- **Ilmaha da'diisu tahay lix jir ilaa da'da 18** waa in lagu sugaa habka ilmaha lagu xakameyo ama suunka kursiga, meel kasta oo uu ilmuhu fadhiisto (hore iyo gadaalba).
- **Dadka waaweyn ee da'da 18 iyo ka weyn** waa in uu xirto suunka marka uu fuulayo kuraasta hore ee gaariga.

Ka reebitaanada isticmaalka suunka kursiga waxa laga heli karaa onlaynka: [iowadot.gov/mvd/medical-exemptions-from-safety-belt-use](http://iowadot.gov/mvd/medical-exemptions-from-safety-belt-use)

## KHURAAFADKA KU SAABSAN SUUNKA KURSIGA

**“Waa ikhtiyaarkeyga inaan xirto suunka kursiga, mana saameynayo cid aan naftayda ahayn.”**

Haddii si aan munaasib ahayn uu suunku kuugu dhuujsan yahay inta lagu jiro shil, waxaad halis u tahay inaad noqoto mid sida madfac u duula oo aad dhaawacdo ama disho kuwa kale ee baabuurka saaran. Xataa marka aad kaligaa ku dhex jirto baabuurka, haddii aan si fiican u dhuujsan suunka kursiga, xaalad aan la saadaalin karin ayaa kuu keeni karta inaad si lama filaan ah u leexato ama u qabato bareega, kaas oo kaa soo tuuri doono kursiga darawalka oona laga yaabo in uu u badan yahay inuu shil keeno.

**“Suumanka kuraasta waxey ku fiican yihiin safarrada dhaadheer, laakiin uma baahni haddii aan ku dhex safraayo gudaha magaalada.”**


In ka badan kala bar dhammaan dhimashada gawaarida waxay ka dhacaan meel 25 mayl u jirta guriga. Qaar badan ayaa ka dhaca waddooyinka leh xadadka xawaaraha in ka yar 45 mph.

**“Suunka kuraasta ayaa kugu dabin kara gudaha baabuurka.”**

Waxay qaadataa wax ka yar ilbiriqsi in la iska furo suunka kursiga. Khuraafaadkani waxa uu inta badan tilmaamayaa dhacdo uu gaarigu dab qabsaday ama ku quusay biyo qoto dheer. Shilalka noocan oo kale ah waa dhif inay dhacaan. Xitaa haddii ay dhacaan, suunka kursiga ayaa laga yaabaa inuu kaa ilaaliyo in lagu tuuro. Fursadda aad ku baxsan karto way fiicnaan doontaa haddii aad miyir qabto.

**“Dadka qaar ayaa si cad loogu tuuray shil oo waxeyna ka soo baxeen ayagoo xitaa laga yaabo in jirkooda diirmin”**

Fursadahaaga inaad ku dhiman shil aad bay u fiican tahay haddii aad ku dhex jirto baabuurka. Suumanka kuraastu waxa uu kaa ilaalin karaa in gaarigaaga aad xoog ugu baxdo dariiqa gaari kale.





## 3.6 SUGIDDA WALXAHA DABACSAN

Marka laga soo tago sugida amaanka ee naftaada iyo rakaabkaada, waa inaad sidoo kale hubisaa inaysan ku jirin shay dabacsan gaari kaas oo qof dhaawac u geysan kara haddii ay dhacdo joogsi lama filaan ah ama shil degdeg ah. 55 mayl saacaddiiba, shay 20 rodol ah ayaa ku dhaca asagoo wada xooga 1,000 rodol. Sidoo kale, iska hubi in aanay dhulka yaalin shay ku rogman kara hoosta badeelka bareega taas oo adkeynaysa ama aan suurto galineynin in la qabto bareega.

## 3.7 DABAR-GOYNTA WAXYAABAHA KEENA MASHQUULKA

Waxa jira saddex nooc oo kena mashquulka:



**Fiirinta** – samaynta wax u baahan in darawalku ka tago hawsha wadista oo uu dhinac fiiriyo (tusaale, eegida GPS-ka).



**Gacan ku qabashada** – samaynta wax u baahan in dirawalka uu ka qaado hal ama labada gacmood isteerinka (tusaale, cunista ama isqurxinta).



**Garashada** – samaynta shay sababa in maskaxda waduhu ka wareego hawsha ama meel kale diirada saarto (tusaale, dhegaysiga muusiga ama sameynta wada sheekaysiga).

Dhammaan noocyada sababa ka mashquulka waxay noqon karaan khatar marka la wado, iyo hawlo badan oo dadku caadi ahaan qabtaan isteerinka gadaashiisa waxay ku habboonaan karaan wax ka badan hal qayb.

## AALADAHA MOBILKA IYO FARIIN DIRIDA IYADOO GAARIGA LA WADO

Sharciga wadista laga mashquulay ee lowa ayaa mamnuucaya isticmaalka taleefoonada gacanta iyo aaladaha isgaarsiineed ee elektiroonigga ah ee gacanta lagu hayo si wax loo qoro, loo diro, ama loo eego fariinta elegtarooniga ah marka aad baabuur wadid. Kahor intaadan qorin, dirin, ama akhriin fariin qoraal ah, iimaylka, ama baraha bulshada, baabuurka waa in si buuxda loogu joojiyaa qaybta aan lagu safrin ee wadada.

Wax yaabaha ka reeban sharcigan waxaa ka mid ah:

- Xubnaha wakaaladaha badbaadada dadwaynaha oo gudanaya waajibaadkooda rasmiga ah.
- Xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee ku jira xaaladaha degdegga ah.
- Qofka helaya macluumaadka la xiriira badbaadada oo ay ku jiraan xaaladaha degdegga ah, gaadiidka, iyo digniinaha cimilada.

## KU HADLIDA TALEEFONKA

Darawalada da'doodu ka yar tahay 18 jir ee haysta ogolaanshaha tilmaamaha, laysanka dhexe, ama laysanka yar ee dugsiga waa ka mamnuuc inay wicitaanada aqbalaan ama ay ku hadlaan taleefonka inta ay wadaan gaariga ilaa uu baabuurkoodu si buuxda ugu istaagayo qaybta aan lagu safrin ee wadada.

## FULLINADA IYO CIQAABAHA

Wadista laga mashquulaya waxaa loo tixgaliyaa dembi taraafikeed oo "aasaasi ah" - taasoo la micno ah in sarkaalku gees kuugu jiidi karo sabab ah xadgudub aad sameysay. Bixinta ganaaxyada ka sokow, xukun wadista laga mashquulay waxa kale oo ay keeni kartaa in shatigaaga ama oggolaanshahaaga lagaa laalo ama lagaala noqdo.

Haddii aad baabuur kaxayso adoo ka mashquulsan oo aad sababto dhimasho qof kale, waxa aad wajihi kartaa in ka badan \$1,000 oo ganaax ah, in shatiga lagaa laalo, oo hadba sida ay xaaladdu tahay, lagugu soo oogo ka danbeynta dil baabuur.

## 3.8 KHAMRIGA IYO DAROOGOYINKA

Mid ka mid ah sharciyada aadka loo dhaqan geliyo ee guud ahaan waddooyinka wadanka waa baabuur wadista iyadoo la saameyn san yahay. Iowaa kama duwana, iyadoo ku ciqaabta ganaaxyo sare darawaliinta lagu soo oogo ayagoo ku sakhraansan khamri ama leh saameynta daroogoyinka.

### SHAQAYNTA IYADOO LA SAKHRAASAN YAHAY (OWI)

Magaca rasmiga ah ee dembiga baabuur wadista iyadoo la cabsan yahay waa “Operating While Intoxicated” waxaana lagu qeexaa inuu leeyahay dhiiga khamri uu kujiro (blood alcohol concentration, BAC) ee .08 ama ka sarreeya ama ku shaqeeynaya qaddar kasta oo ah walax ay dowladu xakamayso gudaha nidaamkaaga ah. BAC waxaa sida caadiga ah lagu tijaabiyaa neef-qaadaha, muunadda kaadida, ama baaritaanka dhiigga. Xitaa haddii aan lagugu xukumin dembiga OWI gudaha maxkamadda dembiyada, mudnaantaada wadista baabuurta weli waa lagala noqonayaa ugu yaraan 180 maalmood haddii aad wado gaariga adigoo sakhraansan. Ku celinta dembiyada ee wadista gawaarida iyadoo la sakhraansan yahay ayaa ah kuwa aad u daran, taasoo keeneysa in lagala noqdo shatiga darawalnimada iyo ciqaabo dembiyeedyo aad u daran.

### OGGOLAANSHAHA MALDAHAN EE TIJAABINTA

Ka ahaan qof haysta shatiga darawalnimada ee Iowaa, waxaad qandaraas ahaan ogolaaneysaa inaad ogolaato tijaabada miyir-qabka ee goobta marka ay dalbadaan sharci fulinta (Iowa Code §321J.6). Sharcigan waxa kale oo uu khuseeyaa darawaliinta aan deganayn ee ku safraya gobolka.

### DIIDAYNTA TIJAABADA

Diidmada tijaabada qalabka neefsashada ma dammaanad qaadayo inaan lagugu xukumi doonin OWI, diidmada tijaabada waxay wali keeni doontaa kala noqoshada shatigaaga. Cawaaqibaha ka dhalan kara diidmada tijaabada qalabka neefsashada ayaa aad uga daran haddii lagu guuldareysto baaritaanka, iyadoo si toos ah hal sano lagaala noqonaayo shatigaaga iyo ugu yaraan \$1,250 ganaax ah.

Haddii lagugu helo dembiga diidmada tijaabada, maxkamaddu waxay sidoo kale amar qasab ah ku bixin kartaa darajada iyo qiimaynta mukhaadaraadka ama in aaladda urinta neefta lagu rakibo gaarigaaga iyadoo la isticmaalayo kharashkaaga.

### DARAWALADA KA YAR 21

Sharciyada baabuur wadista waa ka sii adag yihiin haddii aad ka yar tahay da'da khamri cabista ee la ogol yahay. Darawalka da'da yar waxaa loo arkaa inuu gaari wado asagoo ku sakhraansan BAC ah .02 ama ka badan. Darawalka da'da yar ayaa lagala noqon

doonaa mudnaanta darawalnimada ugu yaraan 60 maalmood iyo ugu yaraan 180 maalmood haddii BAC ay tahay .08 ama ka badan. Dembiilayaasha ka yar da'da 18 uma qalmaan shatiga xaddidan ee ku meel gaarka ah iyagoo shatigooda lagala noqday sabab OWI ah.

### SHARCIGA WEELKA FURAN

Waa sharci darro in qof ama rakaab baabuur saaran lagu raro weel kasta oo alcohol ah oo furan ama aan xidhnayn. Weelasha furan ee cabitaannada khamriga ah waxaa lagu dhex qaadi karaa jirrida baabuurka. Ku xadgudubka sharcigan waxa lagu mutaysan karaa ciqaab fudud oo ah ilaa \$200 oo ganaax ah darawal kasta iyo rakaab kasta oo baabuurka saaran.

## 3.9 WADISTA IYADOO UU QOFKA LULMOONAYO

Wadista iyadoo uu qofka lulmoonayo ayaa la khatar ah sida wadista iyadoo uu qofka sakhraansan yahay. Dareewalada lulmada leh waxay leeyihiin waqtiyo falcelin oo gaaban, inta badan way ka leexdaan ama ka baxaan jidadka, way ka leexdaan wadada, waxayna u badan yihiin inay sababaan shil. **Waa inaad nasasho qaadataa, u baxdaa meel nabdoon, ama isbeddellaan darawallada haddii aad aragto mid ka mid ah kuwan soo socda:**

- Fikrada riyo-maalmeedka ama warwareeka.
- Dhibaato ku aadan xusuusashada dhowrkii mayl aad soo dhaaftay.
- Hamaansiga si isdaba joog ah ama xoqida indhahaaga.
- Dhib ku aadan inaad madaxaaga kor u qaaddo.
- Haadkaaga oo aad ka soo baxdo, daba ka galka gaari, ama ku dhicida xariijimaha garabkaaga.
- Dareemida degenaansho la'aan iyo xanaaq dhawid.




Soo jeedka 18 saacadood ee tooska ah waxay u liidataa sida dhiiga uu ku jiro khamriga (BAC) ee ah 0.08 boqolkiiba, kaas oo sharci ahaan sakhraan ah wuxuuna kaa dhigayaa mid leh qatar lamid ah inaad shil gasho.

## 3.10 U DIYAARINTA WADADA HORE – IOWA 511

Wey caqli fiican tahay inaad horay u sii qorsheyso ka hor intaadan u bixin safar kasta - hadday tahay waddo caadi ah ama waddo dheer. La soco waxyaabaha saameynaya safarkaaga sida cimilada xun, dhismaha waddooyinka, shilalka, iwm. Booqo [www.511ia.org](http://www.511ia.org) ama soo dejiso ablikeeshinka mobilka ee bilaashka ah si aad ula socoto xaaladihii ugu dambeeyay ee safarka ee waddooyinka waaweyn ee Iowa iyo gobolada dhexdooda.

Jaantuska 3.4: Iowa 511



**SHID SEERAYAASHADA**  
Daar xogta aad rabto inaad aragto sida xidhnaanshaha waddooyinka, kamaradaha taraafikada, macluumaadka wadista xilliga jiilaalka, iwm.

**SAMEE BAARITAAN**  
si aad u hesho macluumaadka safarka ee meel gaar ah, dariiq, ama waddo.



## CUTUBKA 4

# XIRFADAHA AASAASIGA EE WADISTA BAABUURTA

Ma jiro buug-gacmeed gabi ahaanba ku bari kara sidaad u noqon lahayd darawal badbaado leh. Daraasaduhu waxay muujinayaan in khatarta shilku ay ku yaraato waayo-aragnimada – waayo-aragnimada kaliya ee lagu kasbado wax-barida iyo kucelcelinta.

### 4.1 KICINTA BAABUURKA

Ka xaqiiji buugga mulkiilaha baabuurka hababka bilawga ugu wanaagsan ee baabuurka. Nidaamyadu way kala duwan yihiin iyadoo ku xiran haddii baabuurku leeyahay duritaan shidaal, iyo nooca gudbinta.

### 4.2 BADDELIDA MARSHADA GAARIDA

#### GUDBINTA OTOMAATIGA AH

Markaad wadeyso baabuur ku qalabaysan gudbinta otomaatiga ah, looma baahna in gacanta lagu beddelo marshada. Taa baddalkeeda, xulaha marshada ayaa mas'uul ka ah oo kaliya inuu dhaqaajiyo baabuurka isagoo isticmaalaya kolomka P-R-N-D-L.

**P** – “Park” wuxuu gaariga u xiraaya baarkin gareys

**R** – “Reverse” waxaa loo isticmaalaa dib-u-laabashada

**N** – “Neutral” waxaa loo isticmaala in matoorka looga tago shaqo la'aan

**D** – “Drive” waxaa loo isticmaala in uu gaariga hor u kaxeeyo

**L** – “Low Gear\*” waxaa loo isticmaala in uu xadido xawaaraha matoorka\*

\*Ogsoonaw: tan waxa kale oo loo matali karaa sida “3, 2, 1” taasoo tilmaamaysa marshada ugu sareysa ee gudbinta otomaatigga ah ay u wareegi karto.

## KU BEDDELIDA MARSHADA GACANTA

Baabuurta leh marshada lagu beddelo gacanta, warejinta marshada ayaa nidaaminaya xawaaraha kala duwan ee uu baabuurku ku socon karo. Iyada oo ku xiran tirada geerka la heli karo, darawalku waa in uu ka beddeli karaa “dhexdhexaad” ama “1” una beddelo marshooyinka sarsare, “2, 3, 4...” si loo sheelareeyo. Si taas loo sameeyo, badeelka saddexaad ee loo yaqaan “clutch” ayaa loo isticmaalaa in lagu beddelo inta u dhaxaysa marshooyinka.

**Tallaabada 1:** Ku riix kalaajka cagtaada bidix

**Tallaabada 2:** Ku wareeji usha marshada adoo isticmaalaya gacantaada midig

**Tallaabada 3:** Si tartiib ah ugu istaag badeelka saliida adigoo isla markaaba sii deynaya kalaajka

Ku soo celi nidaamkan markaad “hoos u dhigeysa marshada” ama markaad u baahan tahay inaad hoos u dhigto xawaaraha aad ku socoto si aad u joogsato. Habkan waxa kale oo loo isticmaalaa in gaariga dib loogu celiyo iyada oo loo bedelayo “Reverse” oona laga soo badalaayo “Neutral” ama “1”.

## 4.3 SHEELAREYNTA

Si tartiib ah oo habsami leh u sheelaree. Isku dayga in aad si degdeg ah u bilawdo wadista waxa ay keeni kartaa in taayirraduhu wareegaan, gaar ahaan meelaha simbirirrada ah, taas oo keenaysa in gaarigu simbiriro. Baabuurka leh sheelarada gacanta, ku celceli isticmaalka kalaajka iyo sheelaraaha si matoorku aanu si degdeg ah u socon ama u istaagin marka aad kala wareejineysa marshooyinka.

## 4.4 BAREEG QABASHADA IYO JOOJINTA

Isticmaalka bareegga gaarigaaga si aad u joogsato waa mid ka mid ah xirfadaha ugu muhiimsan ee la barto. Waqtiga ay taayirradaadu ku qaadanayso inay istaagaan waxay ku xiran tahay miisaanka, cabbirka, iyo culayska baabuurka, iyo sidoo kale xaaladda taayaradiisa. Wakhtiga falcelinta ee aad cagtaada saarayso badeelka bareegga ee baabuurka sidoo kale waa muhiim. Barashada sida habsamida leh ee wax ku oolka leh ee loo joojiyo waxay qaadan kartaa ku celcelin badan .

Xitaa haddii gaarigaaga iyo ficil celentaadu ay ku jiraan xaalad sare, oogooyinka kala duwan ee waddooyinka ayaa weli saameeya sida ugu dhakhsaha badan ee aad u istaagto. Waddooyin quruurux ah ee dabacsan, barafka budada ah iyo baraf, ama xitaa laami qallalan ayaa laga yaabaa inay sababto in gaarigaagu uu taraaraxo haddii bareeg si adag loo qabto. Xawaaraha sare, waxay qaadataa waqti dheer in la joogsado. (Eeg jaantuska 4.1)


Jaantuska 4.1: Masaafada istaaga

### MASAAFADA ISTAAGA

MASAAFADA KA-FALCELINTA + MASAAFADA BAREEG QABASHADA = MASAAFADA ISTAAGA

mph					
20	44	+	25	=	69
30	66	+	57	=	123
40	88	+	101	=	189
50	110	+	158	=	268
60	132	+	227	=	359
70	154	+	310	=	464

#### Jaantuska 4.2: Xeerka 3- ilaa 4- ilbiriqsi



U fiirso baabuurka kaa horreeya in uu dhaafo calaamad xudud dhuleed ah, sida calaamad, oo si tartiib ah u bilow tirinta. Si loo gaaro masaafada daba-socodka ee nabdoon, afka hore ee gaarigaaga waa inuusan dhaafin calaamada xudud dhuleedka ka hor intaadan tirin saddex.

### MASAAFADA DABA SOCODKA EE BADBAADADA LEH

Maadaama fursada ugu weyn ee shilku ay hortaada taal, adeegsiga qaanuunka 3-ilaa 4-ilbiriqsi wuxuu kaa caawin doonaa inaad samaysato oo aad ilaaliso masaafada aaman ah oo ku siinaysa wakhti kugu filan oo aad bareega ku qabato si aad u joogsato haddii loo baahdo. Xeerkani wuxuu kaliya ku shaqeeyaa taraafikada caadiga ah ee xaaladaha cimilada wanaagsan. (Eeg jaantuska 4.2)

- Dareewalka aan khibradda lahayn ama bilawga ahi waa inuu ilaaliyaa ugu yaraan masaafada daba-socodka ee saddex-ilbiriqsi ah iyadoo lagu jiro xaaladaha wadista ee caadiga ah.
- Masaafada daba-socodka ee labada-ilbiriqsi waxay ku filnaan kartaa xaaladaha caadiga ah ee darawalka khibrad leh.
- Xawaarayaasha 40 mph, afar ilaa shan ilbiriqsi oo ah masaafada daba-socodka ayaa lagu talinayaa. Marka xaaladaha waddooyinku ay simbiiriirixan yihiin ama baabuurka kaa horreeya kaa xannibo aragtidaada, masaafada daba-socodka ee lixda ilbiriqsi ama ka badan ayaa lagu talinayaa.

### ABS (NIDAAMKA BAREEG EE GARIGA KA DIFAACA TARAARIXIDA)

Baabuurta cusubi waxay leeyihiin ABS (nidaamka bareega ee gaariga ka difaaca taraarixida). Iska xaqiiji inaad ka akhrido buugga mulkiilaha gaariga waxa ku saabsan sida loo isticmaalo ABS. ABS-gu wuxuu kuu ogolaanayaa inaad istaagto adigoona taraarixin. Haddii gaarigaagu leeyahay ABS oo aad u baahan tahay inaad si degdeg ah u istaagto:

- Ku riix badeelka bareega sida ugu adag ee aad awoodid oona sii wad riixida.
- Waxa laga yaabaa inaad dareento inuu badeelka bareegu uu dib usoo baxayo marka uu ABS shaqaynayo. Ha sii dayn badeelka bareega. ABS-gu waxa kaliya oo uu ku shaqayn doonaa marka badeelka bareega hoos loo riixo.

### ADEEGSIGA LAYRARKA BAREEGA SI AAD ULA XIRIIRTO DARAWADAADA KALE

Haddii aad joogsanayso ama aad ku yareyneysa xawaarahaaga meel aanu darawal kale ka filayn, ama haddii baabuurka kaa dambeeya uu si dhow kuu daba socdo, riix badeelka bareegaaga saddex ama afar jeer si degdeg ah. Tani waxay ogeysiin doontaa kuwa kaa dambeeya inay ogaadaan inaad ku dhowdahay inaad hoos u dhigto xawaarahaada.

### JOOGSIYADA LOO BAAHAN YAHAY

#### Waa inaad had iyo jeer istaagtaa:

- Dhammaan calaamadaha joogsiga.
- Kahor intaadan goynin laamiga marka aad ka baxeysyo waddo gaar ah, waddo laami ah, waddo luuq ah, iwm.
- Markaad waddo dadweyne ka soo galayso waddo gaar loo leeyahay oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, meelaha baabuurta la dhigto, meheradaha, dugsiyada, kaalmaha shidaalka.
- Codsiga sarkaal kasta oo sharci fullin ah.
- Marka uu ku hago calan wadaha aagga ay shaqada dhismaha ka socoto.
- Iftiinka cas ee biligleynaya, ka dibna horay u soco haddii ay faaruq tahay.
- Dhammaan nalalka taraafikada ee casaanka ah, oo ay ku jiraan leexashada midigta ee casaanka ee la oggol yahay.
- Marka qof aragga naafada ka ah oo wata bakooraad (badanaa caddaan ama leh caarado guduudan) ama eyga hagaha uu socdo hortaada ama aad uu kuugu dhaw yahay oo sababi karta in qofka uu khatar galo.

Eeg bogga 11 ee ku saabsan joogsiyada isgoysyada tareenada iyo bogga 17 ee joogsiyada marka aad u soo dhowaanayso basaska dugsiyada oo muujinaya nalal ifaya iyo/ama gacanta joogsiga.

## 4.5 XAWAARAHHA KU HABOON

Xadka xawaaraha la dhejiyay waa xawaaraha UGU BADAN ee aad si sharci ah ku wadi karto **iyadoo ku saleysan xaaladaha wadista ee haboon**. Xawaarahaagu waa inuu ku xiran yahay xadka xawaaraha la dhejiyay, xaaladaha wadada, iyo cimilada. Sida ugu dhakhsaha badan ee gaarigaagu uu u socdo, waxey u dhigantaa masaafada badan ee aad ku qaadan doonto inaad leexato, gaabiso, ama istaagto. Tusaale ahaan, gaari ku socda 60 mph ayaa 3 jibaar socon doono masaafo la dhan kan uu baabuurka ku socda 30 mph uu ku istaagayo intuu san si fiican u istaagin. (Eeg jaantuska 4.1)

### Haddii ay dhacdo in xadka xawaaraha aan la soo dhejinin, xadadkan guud ee soo socda ayaa la dejiyay:

- 25 mph gudaha degmo kasta oo ganacsi
- 25 mph gudaha degmo la degan yahay ama mid dugsi
- 45 mph gudaha degmo kasta oo hareeraheeda magaalada ah
- 45 mph baabuur kasta oo jiidaya baabuur kale
- 50 mph ee wadooyinka aan aasasiga ahayn ee laami la'aanta laga bilaabo qorrax dhaca ilaa qorrax ka soo baxa, iyo dhammaan baabuurta xamuulka qaada ee maraya wadooyinka aan aasaasiga ahayn wakhti kasta maalintii
- 55 mph dhammaan wadooyinka aasaasiga ah, jidadka waaweyn ee magaalada ee isku xira gobollada, iyo wadooyinka aan aasaasiga ahayn, oo ay ku jiraan wadooyinka aan laamiga lahayn laga soo bilaabo qorrax soo baxa ilaa qorrax dhaca
- 70 mph wadooyinka waaweyn ee miyiga ee isku xira gobollada

Xad hoose ayaa laga yaabaa in loo dejiyo shuruud kasta oo kor ku taxan.

Iyadoo wadista sida dhakhsaha ah ay tahay sababta ugu weyn ee shilalka, waditaanka aadka u gaabab ayaa sidoo kale sababi kara shil. Isku day inaad ku wado socodka guud ee taraafikada ee wado kasta. Nidaamka isgoysyada gobollada waxaa jira xawaaraha ugu yaraan oo ah 40 mph. Gaadiidka aan ugu yaraan si dhakhso ah ugu socon karin xaaladaha caadiga ah looma oggolla isgoyska gobollada.

## 4.6 ISTEERINKA

### QABASHADA ISTEERINKA

Si loo yareeyo khatarta dhaawac ee ka imaan karta baaga hawada ee dhinaca hore oo aadna sida ugu fiican u ilaaliso kontoroolka gaarigaaga, isticmaal qabasho habboon. Gacmahaaga waa in aad dhigtaa dhinacyada iska soo horjeeda ee isteerinka 9 iyo 3 qaabka saacada ama in yar ka hooseeya 7 iyo 5 qaabka saacada. (Eeg jaantuska 4.3)

- Si fiican u fiiri hoosta wadada, ma'ahan oo kaliya hortaada kuugu dhaw. Fiiri xaaladaha gawaarida halka aad u baahan doonto inaad leexato ka hor intaadan u tegin. Sidan, waxaad haysataa wakhti aad si habsami leh oo badbaado leh u leexan karto.
- Markaad gooladaha ka leexanayso, u rog isteerinka adigoo isticmaalaya "gacan-isdul-saarka" ama farsamada "riix-jiid".
- Ha ku leexin isteerinka calaacasha gacanta oo keliya; waxaad waayi kartaa xakamaynta. Markaad dhameeyso leexashada, ku toosi isteerinka gacanta. Inaad farahaaga ka siibto waxay noqon kartaa khatar.

Jaantuska 4.3: booska gacanta ee leexinta isteerinka



## 4.7 GADAAL U LAABASHADA

Way adag tahay in la ilaaliyo xakamaynta marka baabuurka gadaal loo wadaayo. Gadaal u laabashada waa in lagu sameeyaa xawaare hooseeya. Si taxadar leh u isticmaal sheelaraaha, haddi ay noqoto inaad isticmaasho.

- Gadaal u laabashada waxay u baahan tahay inaad madaxa rogtu si aad u aragto meelo ka baxsan meelaha aad ka aragto xakameeyaha madaxa. Ha isku hallayn muraayadaha ama kamaradaha aad u isticmaaleyso gadaal u laabashada oo keliya maadaama aysan bixin aragti buuxda oo ay marin habaabin karaan aragtida qotada dheer.
- Booska ka bedel miskahaaga oo leexo si aad muuqaal wanaagsan uga hesho baabuurka gadaashiisa. Gacantaada midig saar dhabarka kursiga, ku qabso meesha sare ee isteerinka gacantaada bidixda, oo ka fiiri garabkaaga midig daaqadda danbe.
- Eeg dhammaan meelaha ka dambeeya gaariga iyo meelaha gaariga aan sida fiican loo arkin ka hor iyo marka aad dib u laabaneyso.
- Sii daa bareega, ka dibna u isticmaal xawaaraha si tartiib ah, oo kaliya marka loo baahdo, si aad u xakameeyso xawaaraha. Si tartiib ah u wad.
- Isteerinka u rog jihada aad rabto in baabuurka uu ku socdo.
- Ka eeg jihada uu baabuurku uu u socdo daaqadaha dhinaca dambe.

## 4.8 FARSAMOoyinka HABBOON EE LEEEXASHADA

Qorshayso leexashooyinkaaga waqti ka hor. Go'aanso meesha aad rabto inaad tagto markaad dhammayso leexashada. Sii naftaada fursad aad ku yarayso oo aad uga fiirsato dadka lugaynaya iyo baabuurta kale. Leexashada daqiiqada ugu dambeeya waa khatar waana in laga fogaado.

Ha gaabin leexashadaada gooladaha, hana ballaarin lulida leexashooyinkaaga gooladaha. Falalkani waxay kordhinayaan fursadahaaga inaad shil gasho.

## SEEYNAALADA LEEEXASHADA

Seeynaalada leexashada waxay gaarsiiyaan waxa aad damacsan tahay dadka kale oona siiyaan wakhti ay kaga falceliyaan. Waa inaad isticmaashaa seeynaalada leexashada ka hor inta aanad bedelinin haadadka, u leexo midig ama bidix, ku biirin gawaarida wadada socota, ama baarkin gareyso.

- Shid seeynaalka mar kasta oo aad beddesho jihada. Shid seeynaalka xataa marka aanad ku arag qof kale oo agtaada jooga. Waxaa laga yaabaa inay jiraan baabuur, dad lugaynaya, ama baaskiil wadayaal meelaha aadan sida fiican u arag. Way sahlan tahay inaad tabto qof u baahan inuu ogaado waxaad samaynaysa.
- Sharciga Iowa wuxuu kaa rabaa inaad shid seeynaalka ugu yaraan 100 tallaabo ka hor intaada sameyn leexasho haddii xadka xawaaruhu yahay 45 mph ama ka yar iyo haddii xadka xawaaruhu uu ka dheereeyo 45 mph, waa inaad shidaa seeynaalka ugu yaraan 300 tallaabo ka hor intaadan leexan.
- Sida caadiga ah, shid seeynaalka ka hor inta aanad hoos u dhigin xawaarahaada.
- Ka digtoonow in aadan si degdeg ah u shidin seeynaalka. Haddii ay jiraan wadooyin yaryar, jidad baabuur, ama meelo laga soo galo oo u dhaxeeyo gaarigaaga iyo meesha aad rabto inaad u leexato, sug ilaa aad ka gudubto si aad ugu shido seeynaalka.
- Haddii baabuur kale uu ku dhow yahay inuu soo galo jidka u dhexeeya gaarigaaga iyo meesha aad qorsheyneyso inaad u leexato, sug ilaa aad ka gudubto si aad u shido seeynaalkaaga leexashada. Haddii aad hore u shido seeynaalka, darawalka kale waxa laga yaabaa inuu u maleeyo inaad qorshaynaysa inaad u leexato meesha uu darawalku joogo isaga/iyada ayaa laga yaabaa inay jidkaaga soo galaan.
- Xaqiiji in seeynaalka leexashadu uu dansan yahay kadib markaad leexashada sameyso.

## LEEEXASHOoyinka LASAMEEYO WAQTIGA NALKA CAS, KADIB JOOGSIGA

Markaad joogto goobta seeynaalka taraafikada, waxa aad u leexan kartaa dhinaca midig ee nalka cas haddi aysan jirin calaamada "NO TURN ON RED". Kahor intaadan si badbaado leh u leexan, waa inaad si buuxda u istaagtaa oo aad u hogaansataa dhammaan baabuurta kale iyo taraafikada dadka lugaynaya.

Waxa kale oo aad u leexan kartaa bidix markuu casaanka iftiimo haddii aad ka soo leexanayso haadka bidix ee waddo hal-jid leh una sii jeedda waddo kale oo hal-jid ah leh.

## DHAQDHAQAAQYADA LEEEXASHADA

### Kala Wareegyada U-da (U-Turns)

Kala Wareegyada U-da waa in lagu sameeyaa oo kaliya meelaha aan isticmaalkooda laga mamnuucin iyo meelaha ay nabdoon tahay in sidaas lagu sameeyo.

### Kala wareegyada saddex-geeska

Kala wareegyada saddex-geeska guud ahaan ma'aha dhaqaaq badbaado leh waxuuna kordhin karaa khatartaada iyo u beylah noqoshada shilalka. Way fiicantahay in aad u sii baxdo isgoyska kuugu dhow.




## 4.9 BEDELITAANKA HAADADKA

Bedelitaanka haadadka waxaa ka mid ah:

- Ka badelashada hal haad oo loo beddelo mid kale.
- Kaga soo biiirista wadada weyn dariiq soo galo wadada.
- Ka soo galista waddada geesta ama garabka.

Kaliya beddel haadadka adigoo beddelaaya hal markiiba. Kahor intaadan bedelin haadka, iska hubi gawaarida agagaarkaaga kadibna xaqiiji inay jirto meel aad si nabdoon uga gasho haadka wadana sii baabuur kasta oo horeba haadkaas ku jiray (eeg jaantuska 4.4).

Jaantuska 4.4: Bedelitaanka haadadka



**Seeynaal:** Ku wargeli darawalada kale qorshahaaga adoo si sax ah u bixinaaya seeynaal.



**Ilaali xawaaraha:** Markaad aad bedeleyso haadkaaga, si taxadar leh u samee laakiin adoon hoos u dhigin xawaarahaaga haddi aysan ahayn inaad u socoto haad ay gawaaridu si tartiib ah u socdaan. Markaad bedeleyso haadadka, si joogto ah u hubi taraafikada si aad u aragto qof kasta oo kugu soo socda si lama filaan ah.



**Eeg muraayadahaaga:** Eeg muraayadaada gadaal-eegista iyo muraayadaha dhinaca. Hubi in aanay wax baabuur ahi ku jirin haadka aad rabto inaad gasho. Hubi in aanu jirin qof ku dhaafi raba.



**Hubi meelaha aadan sida fiican u arkin:** Ka fiiri dusha garabkaaga jihada aad qorsheyneyso inaad u dhaqaaqdo. Hubi in aanu qofna u dhawayn geesaha dambe ee gaarigaaga.

Markaad madaxa rogto si aad u hubiso meelaha aadan sida fiican u arkeynin, xaqiiji inaad isteerinka toos u hayso; dadku waxay leeyihiin dabeecad dabiici ah inay gacmahooda u jeediyaan isla jihada madaxooda ay u jeedan.



**Hubi kuwa kale ee isticmaala wadada:** Xaqiiji inaad hubiso haadka fog, haddii uu mid jiro, maadaama qof ku jira haadkaas laga yaabo inuu qorsheynayo inuu u dhaqaaqo isla haadka aad rabto inaad gasho.

## 4.10 GUDBITAANKA

Kaliya dhaaf baabuur kale marka calaamadaha (bogga 8-aad) ama calaamadaynta wadooyinku kuu oggolaadaan inaad gudubto (Jaantuska 4.5), OO aadna go'aamisay inaad haysato meel kugu filan oo aad si ammaan ah ugu gudubto. Kaliya dhaaf marka ay haboon tahay.


- Sida caadiga ah, dhaaf hal baabuur marbkiiba.
- Iska ilaali inaad marto meelaha laga yaabo in uu gaari ka soo galo wadada kaa horeysa sida isgoysyada iyo wadooyinka.

Haddii ay dhaafidu lagama maarmaan tahay, qaado tillaabooyinka soo socda:

1. Eeg haadka aad rabto inaad u gudubto ee hore si aad u hubiso in boos badan jiro ka hor inta aanad isku dayin inaad gudubto.
2. Ka hubi muraayadaha iyo meelaha aadan sida fiican u arkin gawaari.
3. Seeynaalka u shid ujeeddo ah inaad rabto inaad gudubto oona sheelaree sida loogu baahdo.
4. Markaad gudbayso, la soco meesha bannaan ee hore iyo gadaasha gaarigaaga, oo eeg muraayadda gadaal-eegista.
5. Marka aad ku aragto dhinaca hore ee baabuurka aad soo gudubtay gudaha muraayada gadaal-eegista oo uu gaarigaaguna meel fiican marayo, u shid seeynaalka u jeedo, si tartiib ah oo aayar dib ugu noqo haadkaagii hore, dami seeynaalka, oo ku soo noqo kuwa wadista xawaaraha badbaadada leh.


## CALAAMADAHA WADOOYINKU WAXAY MUUJIYAAN SHARCIYAHA MARITAANKA

Jaantuska 4.5: Calaamadaha wadooyinka ee muujinaya sharciyaha maritaanka




### LABO LAYN OO KHADAD JAALE AH SIINA LEH HAADAD AY KALA QEYBIYAAN KHADAD CADAAN GOOS GOOS AH

Lama dhaafi karo labada dhinac ee xariiqyada jaalaha dhexe ah. Khadadka cad cad ee goos gooska ayaa kala saaraya taraafikada u socota isla jihada. Gudbitaanka waa la oggol yahay marka khad cad oo goos goos ah uu ku jiro haadkaaga.





### KHADADKA JAALAHA EE TOOSKA IYO MIDKA GOOS GOOSKA

Ha gudbin marka ay ku jirto khad toosan haadkaaga. Tusaalahani, haadka bidix ma soo gudbi karo. Gaadiidka ku jira haadka midiga wuu soo gudbi karaa.




### KHADKA DHEXE EE LABADA XARIIJIMO JAALADA AH LEH

La iskuma kala gudbi karo labada haad.


-  Khadadka jaalaha ah ayaa kala sooca gaadiidka u socda jihooyinka kala duwan
-  Khadadka cadcad ayaa kala saaraya gaadiidka ku socda isla jihada

## GUDBITAANKU WAA SHARCI DARRO XAALADAHA SOO SOCDA:

Jaantuska 4.6: Xaaladaha gudbiitaanada ee sharci darada ah




Ha gudbin gaari kale markaad u soo dhowaanayso buur dusheeda.



Ha dhaafin gaari kale markaad mareyso qalooc marka aragtidaada wadada la xanibay.




Ha ku dhaafin gaari kale meel 100 tallaabo u jirta buundada ciriiriga ah, marin-biyoodka, ama tanel oo leh calaamad lagu dhejiyay si laguugu ogeysiyo inay halkaas ay jirto.



Ha dhaafin gaari kale meel 100 tallaabo u jirta isgoyska tareenka.



Ha dhaafin gaari kale meel 100 tallaabo u jirta isgoyska.



Ha ka gudbin midigta.



Ha dhaafin gaari kale marka gaari soo socdaa uu aad u dhow yahay waxay noqonaysaa khatar inaad isku daydo inaad ku ag samayso dhaafitaan baabuurka aad rabto inaad ka gudubto.

## 4.11 WADISTA BADBAADADA LEH IYADOO XAALADUHU CAKIRAN YIHIIN

Markaad si badbaado leh u waddid oo aad isticmaasho farsamooyinka wadista badbaadada leh iyadoo xaaladuhu cakiran yihiin, waxaad ka warqabtaa oo diyaar u tahay wax kasta oo dhaca. **Boqolkiiba 94 shilalka halista ah waxaa sabab u ah doorashooyin khatar ah ama khaladaad ay dadku ku sameeyaan isteerinka gadaasha.** Raac hababkan wadista badbaadada leh iyadoo xaaladuhu cakiran yihiin si ay kaaga caawiyaan dhimista khatarta aad ugu lug lahaan karto shil:

### 1. Marka hore ka fikir badbaadada.

Ka fogaanshaha damacyada wadista gardarrada ku dheehan iyo feejignaana la'aanta ah ayaa ku dhigi doonta meel ka sii quwad fiican oo aad wax kaga qabato doorashada wadista dadka kale. Ka tag boos badan oo u dhexeeya adiga iyo baabuurka kaa horeeya. Had iyo jeer xiro suunkaaga kursiga si uu kaaga ilaaliyo in uu shil kaa soo tuuro baabuurka.

### 2. Ka warqab agagaarkaaga – Fiiro gaar ah sii.

Si joogto ah u hubi muraayadahaaga oo iskaan garee xaaladaha kaa horeya 20 ilaa 30 ilbiriqsi. Indhahaaga ha ahaadan kuwo dhaqdhaqaaqa. Haddii darawal kale uu u muuqdo mid muujinaya calaamadaha wadista gardarrada ku dheehan, hoos u dhig xawaarahaaga ama ka bax wadada si aad uga fogaato iyaga. Haddii darawalku uu u wado si khatar aad u daran oo aadna ka welwelsan tahay, isku day inaad ka baxdo wadada adigoo u leexanaya dhanka midig ama ka baxaya bixista xigta haddii ay nabdoon tahay inaad sidaas samayso. Sidoo kale, isha ku hay dadka lugeynaya, baaskiil wadayaasha, iyo xoolaha ee joogi kara hareeraha wadada.

### 3. Ha ku tiirsanayn oo kaliya darawaliinta kale.

Dadka kale tixgeli laakiin adiga naftaada banaanka fiiri. Ha u qaadan in darawal kale uu ka dhaqaaqi doono jidka ama uu kuu oggolaanayo inaad ku biirto. Ka soo qaad in darawaladu ay dhex mari doonaan asagoo uu shidan yahay nalka cas ama calaamadaha joogsiga diyaarna u ah inay ka falceliyaan. Qorshee dhaq-dhaqaaqyadaada adigoo filaaaya marxaladaha kiis ee ugu xun.

### 4. Raac sharciga 3-ilaa 4-ilbiriqsi. (Fiiri sawirka 4.2 ee bogga 38)

Ilaali masaafada daba-socodka si aad u hesho wakhti aad kaga falcesho haddi loo baahdo.

### 5. Xawaarahaaga hoos u dhig.

Xawaaraha la dhajiyay ayaa lagu dabaqaa xaaladaha ugu fiican. Waa mas'uuliyaddaada inaad hubiso in xawaarahaagu uu la dhigan yahay xaaladaha. Intaa waxaa dheer, xawaaraha sare ayaa dhiga xakameynta gaarigaaga mid aad u adag haddii ay wax qaldamaan.

### 6. Yeelo waddo aad ku baxsan karto.

Dhammaan xaaladaha wadista, sida ugu fiican ee looga fogaado khataraha iman kara waa in aad dhigtaa gaarigaaga meesha aad fursadda ugu fiican ugu leedahay in lagu arko karo laguna arkay. Inaad haysato waddo kale oo lagu safro sidoo kale waa lama huraan, markaa had iyo jeer naftaada uga tag meel laga baxo – meel aad gaarigaaga ka saari karto haddii dariiqo safarkaaga kuugu dhow uu si lama filaan ah u xannibmo.

### 7. Ka takhasus waxyaabaha ku mashquulinaya.

Waxyaabaha ku mashquulinaya waa hawl kasta oo aad uga weecineyso dareenkaaga hawsha wadista. Wadistu waxay mudan tahay digtoonidaada oo buuxda – markaa ahaw mid diirada saara hawsha wadista.

## 4.12 KU DHEX WADISTA GAWAARIDA SI BADBAADO LEH

### LA JAANQAAD GAWAARIDA

Gawaarida si ka xawli badan ama ka gaabis badan socodka gawaarida waxay keenaysaa in ay kororto tirada haad ka badeleshada, dhaafitaanada, iyo dhacdooyinka isdaba-raacida aadka iskugu dhaw. Tani waxay kordhinaysaa fursadaha isku dhaca baabuurta dhexdooda. Wadooyinka ugu nabdoon waa marka dhammaan baabuurta ay ku socdaan xawaare isku mid ah laakiin aanay dhaafin xadka xawaaraha.

### GAWAARIDA SIDA TARTIIBTA AH U SOCDA

Had iyo jeer diyaar u ahow inaad beddesho xawaarahaaga si aad ula jaanqaado xawaaraha gawaarida. Baabuurta qaar si degdeg ah uma socon karaan ama dhibaato ayay kala kulmaan socodka gaadiidka. Haddii aad waqti hore aragto baabuurtan, waxaad haysataa wakhti aad ku beddesho haadka ama aad si badbaado leh u qaboojisaa xawaaraha. Qaboojinta xawaaraha si kadis ah waxay sababi kartaa shil.

Baabuurta beeraha, kuwa ay fardahu riixayaan, iyo baabuurta dayactirka waddooyinka ayaa caadiyan ku socda xawaare yar. Baabuurtan waxa laga yaabaa inay dhabarka ku lahaadaan calaamad muujineysa in uu gaarigu aayar u socdo (saddex xagal oranji ah ama nalal biligleynaya).

### DABAGALIDA GAARI KALE

Isku dhacyo badan ayaa ka dhasha in si dhow loo daba socdo baabuurka kaa horeeya. Waa inaad awood u yeelatid inaad istaagto ka hor inta aanad ku dhufan wax hortaada. Xawaaraha sare wuxuu u baahan yahay masaafada badan oo joogsi. Tan maskaxda ku hay markaad daba socoto baabuur kale. Sida ugu badbaadsan uguna fudud ee lagu xukumo masaafada daba socodka ee badbaadada leh waa in la isticmaalo “Three-Four Second Rule” (eeg jaantuska 4.2 bogga 38). Tani waxay ka yeli doontaa baabuurta hortaada in masaafada kugu filan ay kaa horeeyaan oo aad si ammaan ah u istaagi karto haddii loo baahdo.

### GADAAL UGA SOO DHAWAANSHAHA SAIDKA AH

Haddii gadaal said lagaaga soo dhawaaday, u yara dhaqaaq dhanka midig oo sii kan dabada kaasoo galay aragti uu si fiican ugu arko waxa hor jira oo goor hore u shid seeynaalka leexashada, joogsiga, ama badeshada haadka. Isku day inaad hoos u dhigto xawaaraha oo ku dhiirigelinta darawalka kaa dambeeya inuu ku dhaafo. Haddii ay dhammaan suurta gali waayaan, ka bax wadada gawaarida.



## 4.13 LA-XIRIIRIDA - NALALKA HORE, HOONKA, & SEEYNAALADA XAALADAHHA DEGDEGGA AH

Darawalada qaarkood mar walba fiiro gaar ah ma siiyaan waxa hareerahooda ka dhacaya. Shilalka badanaa waxay dhacaan sababtoo ah hal darawal ma arko darawal kale, ama marka mid ka mid ah uu sameeyo wax darawalka kale uusan filaneynin. Waa muhiim in darawaladu ogeysiyaan dadka kale ee isticmaala waddooyinka inay halkaas joogaan, iyo waxay qorsheynayaan inay sameeyaan.

### NALALKA HORE

Marka laga soo tago inay kaa caawiyaan inaad wax ku aragto habeenkii, nalalka hore waxay caawiyaan darawalada kale inay ku arkaan. Daar nalalkaaga hore mar kasta oo ay dhibaato kaa haysato inaad aragto baabuurta kale, sababtoo ah waxay u badan tahay inay dhib kala kulmaan inay ku arkaan. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah ceeryaamo, roob culus, ama barafka budada ah.

Baabuur badan ayaa ku qalabaysan layrarka hore oo si otomaatig ah u shidma, laakiin xaaladaha qaarkood, sida duufanta barafka ee maalintii, nalka gudaha gaarigu waa mid leh iftiin ku filan, nalkaaga hore ee otomaatiga waa in lagu shidaa gacanta.

Sharciga Iowa wuxuu u baahan yahay isticmaalka labada nal ee hore laga bilaabo qorrax dhaca ilaa qorrax soo baxa ama mar kasta oo ay aragtidu tahay 500 tallaabo ama ka yar, (ceeryaamo, roob culus, barafka budada ah, iwm.). Tilmaanta wanagsan ayaa ah inaad shido nalka hore mar kasta oo aad shido masaxayaasha hore ee gaariga.

### HOONKA

Xaaladaha qaarkood, hoonkaaga ayaa loo isticmaali karaa in lagu soo jeediyo dareenka darawal kale oo looga hortago shil. Isticmaal hoonkaaga marka:

- Dadka lugaynaya ama baaskiil wadayaasha ay u muuqdaan in ay ku soo socdaan haadkaaga safarka.
- Aad dhaafayso darawal bilaabay inuu usoo leexdo haadkaaga.
- Uu jiro darawal aan dheg jalaq u siin ama laga yaabo inuu dhib kala kulmaayo inuu ku arko.
- Aad imanayso meel aanad arki karin waxa kaa horreeya, sida ka bixista luuq ciriiri ah.
- Aad aragto in gaari kale uu halis ugu jiro inuu kugu dhaco.
- Waxaad u baahan tahay inaad uga feejig galiso joogitaankaaga baabuurta kale, darawallada, dadka lugaynaya, ama xayawaanka.
- Aad lumiso xakamaynta gaarigaaga oo aadna u socoto qof.

### NALALKA KHATARTA

Haddii baabuurku ku halaabo wadada dhexdeeda, iska hubi in darawalada kale ay ku arki karaan. Inta badan shilalka ayaa dhaca sababtoo ah darawalku ma arag baabuur taagan ilaa ay ka noqotay mid daahda inuu istaago. Waa kuwan qaar ka mid ah hab-raacyada haddii ay dhibaato baabuur ku haysato oo ay tahay inaad istaagto.

- Haddii ay suurtagal tahay, si badbaado leh uga foguee baabuurkaaga waddada iyo meel ka fog gawaarida wadada socdaan.
- Daar nalalkaaga khatarta xaaladaha degdegga ah si ay u muujiyaan inaad ay dhibaato ku haysato.
- Haddi aanad gaarigaaga ka bixin karin wadada, isku day inaad istaagto halka darawalada kale ay sida cad ugu arki karaan gaarigaaga. Ha ku joogsan buur korkeeda ama meel goolad agteeda ah.
- Haddii aad ku xanniban tahay haad ay gawaaridu ku safraan, adiga iyo rakaabkaagu waa in aad si degdeg ah uga baxdaan baabuurka oo aad istaagtaan meel ammaan ah; marka ay suurtagal tahay, ka fog garabka wadada iyo meel aad uga fog gaadiidka socda.
- Ogaysii maamulka in adiga ama qof kale uu gaariga ka halaabay.

*Boggan si ula kac ah ayaa banaan looga tagay.*



## CUTUBKA 5

# ISTICMAALKAXIRFADAHAAGA GAARI WADISTA

---

Hadda oo aan soo baranay waxyaabo badan oo aasaasi ah, waa waqtigii aad baran lahayd sida aqoontaada wadista baabuurta loo isticmaali karo xaaladaha iyo deegaanada kala duwan. Intaa waxaa dheer, waxaad sidoo kale baran doontaa farsamooyinka wadista baabuurta xaaladaha lama filaanka ah, sida cimilada xun iyo xaaladaha degdegga ah.

### 5.1 ISGOYSYADA

Isgoosyadu waa meel kasta oo ay gawaaridu isugu imaadan ama ka gudbaan. Waxaa ka mid ah: meelaha wadada laga gooyo, waddooyinka yaryar, jidadka baabuurta, meelaha baabuurta la dhigto, iyo waddooyinka u furan safarka dadweynaha.


**Tallaabada 1:** Kahor intaanad gelin isgoyska, horay u eeg si aad u aqoonsato nooca isgoosyada iyo aalad kasta oo lagu hago taraafikada (calaamadaha, seeynaalada taraafika, iyo calamadaha laamiga).

**Tallaabada 2:** Iskaan garee isgoyska ka hor intaanad u dhaqaaqin si aad u hubiso in wadadu isgoysku faaruq tahay.

**Tallaabada 3:** Eeg bidix, midig, iyo bidix mar labaad gaadiidka kugu soo socda iyo dadka lugaynaya. Weligaa ha u qaadan in darawal kale uu boos kula wadaagi doono ama ku siin doono boos.

Ka digtoonow calaamada leexashada ee “beenta” ah. Ha leexin sababtoo ah baabuurka soo socdaa wuxuu leeyahay ishaariyaha leexashada. Dareewalku waxa laga yaabaa inuu qorsheeyo inuu kaa leexiyo ama uu illoobay inuu damiyo seeynaalka ka hor leexashada. Tani waxay si gaar ah run u tahay mootooyinka; seeynaaladooda inta badan iskood iskuma damiyaan. Sug ilaa darawalka kale bilaabo inuu leexdo ka dibna sii soco haddii ay ammaan tahay in sidaas sameeyso.





Jaantuska 5.1: Ka gudbida ama bixix u leexashada wado miyi oo afar haad ah leh

## KA GUDBIDA AMA BIDIX U LEEXASHADA WADO MIYI OO AFAR HAAD AH LEH

(Eeg jaantuska 5.1) Ha isku dayin inaad mar qudha ka gudubto labada dhinac ee taraafikada si aad iskaga ilaaliso inaad ku istaagto dhexda. Si badbaado leh uga gudub isgoyskan adoo qaadaya tillaabooyinka soo socda:

1. Joogso calaamada joogsiga, bidix eeg oo u gudub meesha dhexda marka ay nabdoon tahay inaad sidaa samayso.
2. Ahaw mid ku istaaga meesha dhexe. Eeg midigta. U gudub ama u leexo bidix marka ay nabdoon tahay in sidaas la sameeyo.


Darawaliintu waa inay ogaadaan in gaadiidku si xawli ah ugu socdo bey'adan. Taxaddarka iyo feejignaantu waa muhiim. Ogsoonow in baabuurta dheer, sida semi-yada, laga yaabo in aysan istaagi karin meesha dhexe haddii meesha dhexe ay dhuuban tahay.

## 5.2 KU WADISTA GOBOLLADA DHEXDOODA IYO JID WEYNAHA

### JID YARAHA KU GEYNAYA WADADA WEYN

Jid yaraha ku geynaya wadada weyn waxaa loogu talagalay inaad ka gasho wadada gobollada dhexdooda iyo jid weynaha, waxeyna leeyihiin sadex qeyb. (Eeg jaantuska 5.2)


- 1 **Aagga kasoo galka:** Qeybtani waxey ku siinayaa wakhti aad ku iskaan gareyso jidka oo aad ku qiimayso inta boos ee aad gali karto iyo xawaaraha loo baahan yahay.
- 2 **Aagga sheelareynta iyo ku biiritaanka:** Isticmaal aaggan si aad u gaadhsiiso gaadhigaaga xawaaraha taraafikada oo aadna ku biirtid marka ay nabdoon tahay inaad sidaas samayso. Gebi ahaanba haku istaagin jid yaraha aad wadada kasoo galeyso ilaa ay lagamamaarmaan tahay mooyee.
- 3 **Qeybta ku safrida ee gobollada dhexdooda:** Gawaarida markii horeba ku sii jiray wadada gobollada dhexdooda ama dariiqa weyn waa in ay ka gudbaan, hoos u dhigaan xawaaraha, ama ay xawaarahooda kor u qaadan si ay u oggolaado in gawaarida wadada yar ay u soo galaan.



Jaantuska 5.2: Qeybaha jid yaraha ku geynaya jid-weynaha

## 5.3 KALA LEEHASHADA ISDHAAFSIGA EE SIDA DHEEMANKA AH

Isweydaarsiga noocaan ah waxaa loo adeegsadaa isgoysyada labada waddo ee taraafiggu oo aad u sarreeya. Naqshadaynta gaarka ah waa mid aan caadi ahayn sababtoo ah waxay toosisaa darawalada dhinaca ka soo horjeeda ee wadada si kooban ka hor intaysan u leexin jihada saxda ah. Kala leexashada isdhaafsiga ee sida dheemanka ah ayaa kor u qaada waxtarka iyadoo u baahan taraafikada inay waqti yar ku qaataan isgoyska wadooyinka qadiimiga ee ay kontoroolka nalalka taraafikada. (Eeg jaantuska 5.3)



Jaantuska 5.3: Kala leexashada isdhaafsiga ee sida dheemanka ah (Tusaale waxay tusinaysaa I-35 iyo First Street ee kala leexashada isdhaafsiga ee sida dheemanka ah ee Ankeny.)

## 5.4 MARTOYINKA (ROUNDABOUTS)

Martooyinku waa isgoysyo ku haga taraafikada habka kasoo horjeedka jihada sida ay saacadu u socoto ee agagaarka goobaabinta/jasiirada dhexe. Ma lahan calaamadaha joogsi ama seeynaalada taraafikada. Calaamadaha wado siinta, calamadaha jihooyinka, iyo calamadaha laamigu waxay hagayaan taraafikada isgoyska. Gaadiidku guud ahaan way sii wadi doonaan socodkooda, laakiin waxa ay ku socdaan xawaare hooseeya oo yaraynaya in gawaaridu dabada iska galaan markey joogan isgoysyada qadooyinka qadiimiga ay hagaan calaamadaha joogsiga ama seeynaalka taraafikada.

### MARTADA HALKA-HAAD LEH (eeg jaantuska 5.4)

#### Darawaliinta

**Ku dhawaanshaha:** Hoos ugu dhig xawaarahaaga kan lagu taliyay ee meesha lagu dhajiyay oo wado u bixi dadka ku lugeynaya jid-goyska.

**Soo gal:** Markaad ku soo dhawaato calaamadaynta xariiqda wado bixinta, wado u bixi gawaarida joogaan martada. Sug ilaa aad ka arkeyso farqiga masaafu ee u dhexeeya gawaarida, ka dibna ku biir taraafikada gawaarida jooga martada habka kasoo horjeedka jihada sida ay saacadu u socoto.

**Gudub:** Sii gudub meertada ilaa aad ka gaarto waddadaada. Iska ilaali inaad ku istaagto meertada.

**Ka bax:** Seeynaalka shid, ka bacdi uga bax meertada midigtaada. Wado sii dadka ku lugeynaya jid ka goyska.


#### Dadka lugeynaya

**Ku dhawaanshaha:** Marka aad joogo jid ka goyska loogu talagalay dadka lugeynaya, bidix eeg.


**Gudub:** U gudub jasiiradda kala qaybisa ee kor loo yara qaaday. Eeg midigta. Dhamee u gudbida dhinaca ka soo horjeedka ee lagu lugeeyo.

#### Baskiil wadayaasha

Guud ahaan, baaskiil wadayaasha ah waa in ay baaskiiladooda kula dhex maraan jid-ka goysyada dadka lugeynaya iyagoo isticmaalaya sharci la mid ah kuwa dadka lugeynaya. Baaskiil-wadayaasha khibrada leh ayaa laga yaabaa inay u maraan martooyinka sida darawaliinta. Ha ku wadin agagaarka hareeraha. Baaskiil-wadayaasha isticmaalaya meertada waa in ay raacaan sharciyada darawaliinta. Ku soco bartamaha haadka si aad uga ilaaliso baabuurta inay ku dhaafan. Wado sii dadka lugeynaya ee maraaya jid-ka goyska.



Jaantuska 5.4: Martada halka-haad leh



Jaantuska 5.5: Martada leh haadad badan

## MARTADA LEH HAADADKA BADAN (eeg jaantuska 5.5)

### Samee

- Markaad u soo dhawaaneyso martada, iyo horaanba xariiqda wado siinta, dooro haadka ku habboon iyadoo la raacayo calamadaha kantaroolka haadka iyo calamadaha laamiga.
- Markaad gelayso martada, wado sii dhammaan gawaarida horeba gudaha u jiro martada.
- Ka dib markaad jidka dhaafto ka hor intaad ka bixin, shid seeynaalka u leexashada midigta, ka dibna ka bax.
- Ka digtoonow gawaarida kale ee haadka kale.

### Ha sameeyn

- Ha ku bedelin haadadka gudaha martada.
- Ha dhaafin ama haku ag wadin baabuurta waaweyn ee xamuula ama basaska. Waxa laga yaabaa in ay haadadka ka baxaan ama aanay ku arkin.
- Ha ku wadin banaanka haadka oo ka sii fog inta la ogol yahay. Tani waxay yaraynaysaa hufnaanta martada waxayna khatar ku abuurtaa gawaarida sida sharciga ah uga soo baxaya haadka gudaha.

## 5.5 KU WADISTA WADADA MIYIGA/JAAYGA

Qaar ka mid ah xaaladaha waddooyinka iyo khataraha wadista baabuurta ayaa ah kuwo u gaar ah jay-ga miyiga iyo waddooyinka qardajeexa ah marka loo eego waddooyinka laamiyada ah. La soco oo hagaaji waxyaalahan soo socda.

### DHIMISTA JIIDITAANKA

Ku wadista quruurux dabacsan way ka adag tahay ku wadista laamiga sababtoo ah taayirradaadu ma laha jiidista loo baahan yahay si ay kuu siiyaan kontorool xasilan. Xawahaaga yaree, iska ilaali inaad si lama filaan ah u leexato, sheelarada qabo oo si tartiib ah u qabo bareega, oo kordhi masaafadaada daba socodka.

### ARAGTIDDA LA XAKAMEEYAY

Geedaha, beeraha galleyda, dhismayaalka, buuraha, iyo boorka ayaa xannibi kara aragtida darawalka ee baabuurta imanaysa, ama baabuurta dhinaca ka soo galayaan. Aqoonsa meelaha aadan sida fiican u arkin si aad si fiican isugu diraaaso oo aadna ugu diyaar garowdo khataraha iman kara.

## ISGOYSYADA AAN LA KOONTAROO LIN

Isgoosyada aan la koontaroolin ayaa aad ugu badan wadooyinka jaayga ah. Laguma xukumo calaamadaha wado siinta ama joogsiga. Dhammaan darawaladu waa inay taxaddaraan, gaabiyaan xawaaraha, oo ay u diyaar garoobaan inay u joogsadaan gaadiidka soo socda. Xasuusnoow, mar walba kuma tiirsanaan kartid daruuraha boorka si aad u go'aamiso haddii baabuurta goyneysa ay soo kugu soo dhawaanayaan.

**MARKA LA JOOGO ISGOYSKA AAN LA KONTAROO LIN,**

**BAABURKA BIDIXDA WAA INUU WADO BIXIYAA.**

**MARNABA HA U MALAYN IN ISGOYSKU FAARUQ YAHAY,**

**AMA IN GAWAARIDA KALE AY ISTAAGI DOONAAN.**

## GARBABA JILICSAN

Garbaha wadooyinka miyiga ah ayaa caadi ahaan ah kuwo jilicsan oo aan is-haysan marka loo eego bartamaha waddada. Garbaha leh quruurux/qashin dabacsan ayaa baabuurta ka dhigaya mid aad u adag in la xakameeyo waxayna u jiidayaan gaarigaaga dhinaca godka. Had iyo jeer xawaarahaaga hoos u dhig markaad la kulanto baabuur kale ama wakhti kasta oo aad ku socoto meel u dhow ama garabka wadada quruuruxa.

## BOORKA

Isticmaal leyrar hoose ee nalalka hore si aad baabuurkaaga uga dhigto mid u muuqda kuwa kale inta lagu jiro xaaladaha aadka u boorka ah.

## LA KULMIDA BAABURTA SOO SOCOTA

Wadooyinka quruuruxda ee miyiga way dhuuban yihiin oo mqabaan calaamadaha haadka. hoos u dhig xawaarahaaga oona si taxadar leh u sii soco, adoo u dhaqaaqaya meesha ugu fog dhinaca midigta haddii ay nabdoon tahay inaad sidaas samayso. Gaadiid badan ayaa abuura daruuro boor ah iyo hoos u dhaca aragtida.

## BUUNDOOYINKA CIRIIRIGA AH

Darawaliintu waa inay taxaddaraan markay ku wajahan yihiin buundooyinka ciriiriga ah. Buundooyin badan oo ku yaalla wadooyinka jayga ah ee miyiga ayaa ka ciriirsan waddada, waxayna qaadi karaan hal baabuur oo keliya markiina. U diyaargarow inaad u istaagto gawaarida soo socda.

## BUUROOYINKA JAN-JEERA IYO QALOOCYADA

Kahor intaadan gaarin cirifka buurta ama ka hor inta aanad gelin qalooca, hoos u dhig xawaarahaaga, u dhaqaaq dhanka midig ee wadada oo iska eeg baabuurta soo socota. Buuraha iyo qaloocyada wadooyinka miyiga ayaa inta badan jan-jeera oona fiican marka loo eego wadooyinka waaweyn.

## ISGOYSYADA WADADA TAREENADA

Had iyo jeer hoos u dhig xawaarahaaga, fiiri labada dhinac, oo u diyaargarow inaad u istaagto tareen ka hor intaadan gudbin wadooyinka tareenka. Si ka duwan inta badan isgoosyada tareenada ee wadooyinka waaweyn, sida caadiga ah ma jiraan nalal cas oo biligleynaya, gambeelada digniinta, albaabada laga gudbo ama calaamadaha laamiyada ee isgoosyada wadada tareennada ee miyiga.

## GAWAARI WAAWEYN AMA/IYO GAWAARI SI TARTIIB AH U SOCDA

Waa wax iska caadi ah in wadooyinka miyiga aad kala kulanto gaadiid si tartiib ah u socdo iyo gawaarida waaweyn sida qalabka beeralayda, ATV/UTV-yada, baaskiilaha, gawaarida ay fardaha riixayaan, iyo qalabka loo isticmaalo dayactirka wadooyinka gudaha wadooyinka miyiga. Waa muhiim in aad waqti horeba aqoonsato baabuurtan oo aad hoos u dhigto xawaaraha markaa u soo dhawaaneyso.

Qalabka waaweyn ee beertu waxa laga yaabaa inay ku sameeyaan leexasho ballaaran meelo laga soo galo oo aan calaamad lahayn. Qalabka beeralayda qaarkood ayaa ka balaaran wadada lafteeda. Si taxaddar leh u soco markaad isku dayeyso inaad dhaafto. Waxa laga yaabaa in aanay arkin gaarigaaga, calaamada leexashadana way adag tahay in la ogaado.

## 5.6 WADISTA HABEENKII

Maskaxda ku hay waxyaabaha soo socda marka aad ku dhex waddo meel mugdi ah.

- Si loo magdhabo hoos u dhaca aragtida, hoos u dhig xawaarahaaga oo kordhi masaafadaada daba socodka.
- Dhaldhalaalka iftiinka hore ee gawaarida soo socda ayaa adkeynaya in la arko. U fiirsashada dhinaca midig ee wadada iyo hagaajinta muraayada gadaal-eegista waxay kaa caawin kartaa yaraynta dhalaalka iftiinka hore.
- Layrarka hore waa in la shidaa ka hor intaan qorraxdu dhicin si baabuurka uu u noqdo mid muuqda.
- Iftiinka sare waa in la isticmaalo kaliya marka darawalada kale aysan arkeynin, sida jidad go'doonsan oo gawaari yar leh.
- Haddii ay ku indho tiraan nalka hore ee gaari kale, hoos u dhig xawaaraha oo fiirso xariijimaha cad ee cirifka midigta ee laamiga. Iftiinka dhalaalaya ayaa laga yaabaa inuu ku dareensiyo inaad indho beeshay, laakiinse dareenku si dhakhso ah ayuu u baaba'aa.



**OKTOBAR, NOOFEEMBAR,  
IYO MAAYO WAXEY YIHIIN  
BILAHA UGU SAREEYA  
EE ISKU DHACYADA KA  
IMAADA DEERADA**

## SI LAMA FILAAN AH HA UGU BADELIN DEERADA JIHADA

### 5.7 DEERADA IYO XAYAWAANADA KALE

Iska eeg xayawaanada markaad baabuur wadeyso, gaar ahaan qorrax soo baxa iyo qorrax dhaca. **Haddii xayawaan lala kulmo, oo aysan jirin waqti lagu joogsado, ha leexan ama ha badalin jihada sababtoo ah tani waxay u badan tahay inay keento shil aad u daran.** Haddii aad ku dhacdo deerada ama xayawaan kale, raac nidaamka shilalka caadiga ah (eeg jaantuska 5.14 ee bogga 59).

Mid ka mid ah sababaha ugu waaweyn ee shilalka waddooyinka lowa waa duurjoogta, sida caadiga ah deerada. Oktoobar, Noofambar iyo Maayo waa bilaha ugu badan ee isku dhacyada ka imaada deerada; si kastaba ha ahaatee, waxay dhici karaan wakhti kasta oo sanadka ah. Deerada waxay u safraan koox koox, markaa had iyo jeer raadi xayawaan badan haddii mid la arko.

### 5.8 LA-WADAAGISTA WADADA BAABUURTA WAAWEYN EE XAMUULKA QAADA

Shilalka ay qeyb ka yihiin gawaarida waaweyn, dadka baabuurka saaran – badanaa darawalka – waxay la kulmaan 78 boqolkiiba dhimashada. Si aad naftaada iyo rakaabkaadaba u ilaaliso, isticmaal taxadar dheeraad ah markaad ku dhex socoto baabuurta waaweyn ee xamuulka iyo basaska. La-adaagista wadada ee baabuurta waaweyn ee xamuulka waxay noqon kartaa khatar haddii aadan ka warqabin xadadkooda.

#### EEG MEELAHA AAN SIDA FIICAN LOO ARKIN – “AAN LAHAYN AAGGAG”

Baabuurta waaweyni waxay leeyihiin meelo aysan si fiican u arkin, ama “aan lahayn aaggag”, agagaarka weybta hore, dhabarka, iyo dhinacyada baabuurka. Meelahan “aan lahayn aaggaga” waxay ku adkeynayaan wadayaasha gawaarida xamuulka inay arkaan. Iska ilaali in lagugu qabto meelaha “aan lahayn aaggaga” ee baabuurta waaweyn ee xamuulka. Haddii aadan ku arki karin darawalka gaariga xamuulka muraayadda gaariga, wadaha baabuurku kuma arki karo. (Eeg jaantuska 5.6)

#### KA FOGOW XAALADAH BAREEG QABASHADA DEGDEGGA AH

Gawaarida xamuulka ah iyo basaska waxay ku qaataan waqti dheer inay joogsadaan marka loo barbardhigo baabuurta yaryar. Markaad gudbeyso, eeg gaariga xamuulka hortiisa gudaha muraayadaada gadaal-egista ka hor inta aanad hore u bixin, kana fogow inaad hore ugu baxdo gawaarida xamuulka, taasoo abuureyso xaalad bareeg qabasho oo degdeg ah.

#### KA DIGTOONOW GAWAARIDA XAMUULKA EE SAMEYNAYA LEEXASHADA BALLAARAN EE MIDIGTA

Darawalada gawaarida waaweyn waxay mararka qaarkood u baahan yihiin inay si weyn ugu soo qaloocdan bidixda si ay si badbaado leh u sameeyan leexashada midigta. Si toos ah uma arki karaan baabuurta gadaashooda iyo dhinacooda ah. Marista inta u dhaxaysa baabuurka iyo jardiinka wadada waxay kordhinaysaa suurtagalnimada shil. Marka fiiro gaar ah seeynaalada gawaarida xamuulka, oo sii meelo badan oo ay ku dhaqaaqaan.



Jaantuska 5.6: Semi “aan lahayn aaggag”  
Xushmada garaafka waxaa leh FMCSA, [sharetheroadsafely.gov](http://sharetheroadsafely.gov)

## 5.9 LA-WADAAGISTA WADADA MOOTOOYINKA

- Ixtiraam meesha baabuurka banaan ee mootada iyo booska ay uga jirto taraafikada.
- Isgoysyadu waa meelaha ugu badan ee shilalka baabuurka/mootada ay ka dhacaan. Xaqiiji inaad aragto mootada oo aad ogaato xawaareheeda ka hor inta aanad bilaabin inaad leexato ama aad gasho isgoyska.
- Calaamadaha leexashada si otomaatig ah uguma damaan mootada, wadayaashuna marmar bay iloobaan inay damiyaan calaamada ka dib marka leexashadu dhammaato. Xaqiiji in aad ogtahay waxa uu moota waduhu doonayo inuu sameeyo KA HOR intaadan u dhaqaaqin wadada mootada.
- Markaad ku wadeyso gaariga gadaasha mootada, u ogolow ugu yaraan 3-4 ilbiriqsi oo masaafada daba socodka ah. Tani waxay siinaysaa wadaha waqti ku filan oo uu ku dhaqaaqo ama uu ku joogsado hadey imaato xaalad degdeg ah. Marka waddadu qoyan tahay ama simbiirix tahay, gadaal ka sii joog. Iyadoo ay kaliya laba taayar ay kula dul socdaan laamiga, mootooyinku waxaa laga yaabaa inay aad u xasilloonayn markay isku dayayaan inay si degdeg ah u joogsadaan.
- Markaad dhaafeyso mootada, u ogolow haad buuxda mootada; weligaa hala gelin isla haadka ay mootadu isticmaaleysa.
- Iska eeg waxyaalaha lama filaanka ah oo sii wadayaasha mootada qaybta ay ku leeyihiin wadada.

## 5.10 LA-WADAAGISTA WADADA BAASKIIL WADAYAASHA IYO LUGEEYAYAASHA

### Ka iskaan gareee wadada wax taayaro iyo cago ah

Si gaar ah uga taxadar inaad ka eegto dad lugeynaya iyo baaskiil wadayaal ka hor inta aadan ka leexan isgoysyada iyo waddooyinka khaaska.

### Wado sii dadka lugeenaya

U fiirso calaamada dadka lugaynaya oo sii dadka ku socda jidka xaqa wado-siinta.

### Isticmaal taxadar markaad dhaafeyso baabuurta la joojiyay

Weligaa ha gudbin gaari kale oo u istaagay ama u gaabinaya xawaaraha qof lugeynaya. Xasuusnoow, waxaa laga yaabaa inaad arki karin qofka lugeynaya marka aad u dhawaato gaari la joojiyay, markaa ka digtoonow.

### Iska ilaali baaskiilada

Dadka baaskiilada wadaan waxay xaq u leeyihiin inay waddada maraan, waxaana inta badan laga mamnuucaan inay ku socdaan waddooyinka socodka ee geesaha wadada, markaa ixtiraam xaqa ay u leeyihiin inay halkaas joogaan.

### Ka gudbida si badbaado leh

Marka aad dhaafeyso baaskiil-wadayaasha, waa in aad si buuxda u beddeshaa haadadka, adiga oo markaa siinaya baaskiil-wadaha haadka oo dhan sida aad u yeeli lahayd baabuur kasta. Ha ku soo laaban midigta ilaa aad ka arki karto baaskiil wadaha(yaasha) muraayadaada gadaal-eegista.

### Aragtida

Habeenkii iska eeg baaskiil wadayaasha oona iska fiiri milicleynta muraayadahooda ama nalalkooda.

### Iska eeg meelaha aadan sida fiican u arkin

Ka eeg baaskiil wadayaasha ka imaanaya gadaal, gaar ahaan markaad midigta u lexaneyso.



## 5.11 BAABUURTA DAAQADAHA LOO XIRAY MAALIN UU KULEEYL JIRO

**WALIGAA ha kaga tagin carruurta, dadka da'da ah, dadka kugu tiirsan, ama xayawaanka rabaayada ah baabuur daaqadaha u xiran keligood.**

Iyadoo ku xiran heerkulka iyo qoyaanka, gudaha baabuurku wuxuu kor ugu kici karaa 160 digrii wax ka yar 10 daqiiqo. Xataa maalinta uu iska yaryahay, 78 digrii, gudaha baabuurka la baarkin gareeyay wuxuu gaari karaa 100 digriis daqiiqado gudahood.

U beylah noqoshada dheer ee kulayl ba'an waxay u horseedi kartaa istaroog kulayl ama dhimasho. Haddii aad aragto qof qaba calaamadaha istaroogga kulaylka, wac 911 oo raadso daryeel caafimaad isla markiiba. Iowaa waa sharci inaad jebiso daaqada baabuurka si aad u siiso daryeel caafimaad qof ama xayawaan gudaha ku xayiran.

## 5.12 KU-WADISTA CIMILADA XUN

Sida ugu wanaagsan ee loogu diyaargarooobo ku-wadista cimilada xun waa in laga fogaado in si lama filaan ah ay kugu dhacdo. Baaritaan samee ka hor intaadan bixin si aad u go'aamiso inaad u baahan tahay inaad hagaajiso ama dib u dhigto safarkaaga. Booqo 511ia.org ama kala soo deg ablikeeshinka Iowaa 511 ee bilaashka ah si aad u aragto macluumaadka socdaalaha sida xaaladaha la xiriira cimilada ee wadada 24/7. 511 waxey kaloo bixisaa sawiro laga soo qaaday kamaradaha ku rakiban meelaha barafka iyo kamaradaha taraafigga ee sida tooska wax u tabiya si aad u hesho muuqaalka koowaad ee xaaladaha adigoo waligaa cagta dibadda u bixin. (Eeg jaantuska 5.7)

**HADDII AAD U BAAHAN TAHAY IN AAD KU-WADO CIMILADA XUN, HOOS U DHIG XAWAARAHAAGA OONA KORDHI MASAFAADAADA DABA-SOCODKA, TAAS OO KU SIINEYSA WAQTI BADAN OO AAD KU ISTAAGTO. HA ISTICMAALIN AALADA XAKAMEYSA XAWAARAHA LA DEJISADAY INTA LAGU JIRO CIMILADA XUN.**

Hubi in baabuurkaaga loo diyaariyey cimilo kasta oo xun adiga oo raacaya dayactirka caadiga ah (ka eeg bogga 20 dayactirka baabuurka). Sidoo kale waa fikrad wanaagsan inaad haysato xirmada gargaarka degdega ah ee gaadhiga markasta, gaar ahaan xilliga jiilaalka. (Eeg jaantuska 5.8)



Jaantuska 5.7: 511 cimilada xun

### Jaantuska 5.8: Xirmada badbaadada ee jiilaalka



## WADDO QOYAN/SIMBIRIIRAXASHO LEH

Ka digtoonow markaad baabuur wadid kahor, inta lagu jiro, iyo ka dib roobabka. Roobabku waxay sababi karaan aragga oo yaraada, beddela caadooyinka wadista dadka kale, oo beddelaan xiriirka socodka ee u dhexeeya baabuurkaaga iyo waddada. Ku dhaqan waxyaabaha soo socda:

- Daar masaxayaasha isla marka ay muraayada hore qooydo.
- Daar nalalka hore ee iftiinka hooseeye leh; tani waxay kaa caawinaysaa dadka kale inay ku arkaan.
- Si tartiib tartiib ah u wad oo u kordhi masaafadaada daba socodka ilaa shan ama lix ilbiriqsi.
- Aad u taxaddar oo yaree xawaarahaaga markaad ma reysa qaloocyada iyo markaad u dhawaaneyso isgoysyada.
- Daar qandaciyaha si aad uga ilaaliso daaqadaha inay yeeshan ceeryaamo.

### HA ISTICMAALIN AALADA XAKAMEYSA

### XAWAARAH LA DEJISADAY MARKA LAGU JIRO

### XAALAD QOYAAN AMA SIMBIRIIRAXASHO.

Haddii ay tahay inaad wax ka beddesho markaad baabuurka wadeyso, hubi in jidka kaa horreeyaa uu faaruq yahay ka hor intaadan hoos u eegin dashboodh-ka-oo iska fiiri hal ama laba ilbiriqsi oo keliya.

## LAKABKA BIYAHA EE KALA JARAAYA ISTAABASHADA TAAYARKA IYO DHULKA

Lakabka biyaha ee kala jara istaabashada taayarka iyo dhulka waxay dhacdaa sabab ah in biyaha waddada ay ka qoto dheer yihiin dheerarka diilinta taayarka. Lakabkan biyuhu waxa uu yareeyaa xiriirka dhaqaaqa ee u dhexeeya dhulka iyo taayarka waxana ay keeni kartaa luminta xakamaynta. Haddii aad arki karto biyaha qotoda dheer ee wadada, hummaag noqoshada laamiga, ama haddii baabuurka ka horeeyaa aanu wax raad ah kaga tagin biyaha, gaarigaagu wuxuu lumin karaa xakameynta ka dhasha lakabka biyaha ee kala jaray istaabashada taayarka iyo dhulka. Xawaarahaaga hoos u dhig.

## WADOOYINKA DAADKA LEH

Ku dhawaad kala bar dhammaan dhimashooyinka daadadku ay sababeen waxay ku dhacaan baabuurta. Biyaha socdaan ayaa ah kuwo aad u xoog badan oo aad u fudud in la dhayalsado. In yar biyo uu dherarkoodu yahay 6 inji ayaa laga yaabaa inay xaaqaan baabuur, oo ay ku jiraan SUV-yada iyo gawaarida abdi bilayaasha.

- Weligaa ha ku dhex wadin waddo daad leh ama buundo. Meesha biyaha ka hooseya ee jidka ah ayaa gebi ahaanba noqon karta mid la xaaqay. Soo leexo oo raadso waddo kale.

- Ha ku dhex jirin baabuur uu daad qaaday. Haddii baabuurkaagu uu ku xannibmo biyaha daadku, ka tag baabuurka oo u dhaqaaq meel sare.

- Haddii baabuurkaagu uu qaaday daadku oo uu quusiyo, isdeji. Sug inta biyuhu ay gaariga ka buux samayaan. Marka uu baabuurku buux samo, albaabadu way fudud yihiin in la furo. Neefta qabso oo u soo dabaal dusha sare.

## CEERYAAMO

- Isticmaal nalalka iftiinka yar ama nalalka ceeryaamada haddii gaarigaagu leeyahay. Ha isticmaalin iftiino sare – waxay la hummaag noqoshadaan ceeryaamada, taasoo keenaysa dhalhalaal iyo hoos u dhaca aragtida.
- Hoos u dhig xawaarahaada ilaa xawaarahaagu la mid yahay awooddaada wax-aragtida.
- Haddii loo baahdo, ka bax waddada oo hel meel ammaan ah oo aad ku baarkin gareysato.


## DUUFAANNADA

Adeegga Cimilada Qaranka waxay soo saartaa “la-socodka” duufaan marka onkod daran ay suurtagal tahay inuu soo saaro xaalado u eg duufaan. Tani waxay kaliya ka dhigan tahay in duufaan ay suurtagal tahay. Haddii digniin la soo saaro, duufaan baa soo dhow oo dadka oo dhan waa inay isla markiiba raadsadaan hoy. Taleefishinnada waxyaabaha laga sii daayo, raadiyayaasha cimilada, iyo seerinada bannaanka ayaa laga yaabaa inay dadka uga digaan duufaan firfircoon aaga.

- Haddii aad baabuur wado inta lagu jiro duufaanta, habka ugu fiican ee ficilku waa inaad heshid dhismo adag oo aad hoy uga raadsato.
- Haddii aadan awoodin inaad gaarto hoy, gees u bax, madaxaaga geli hoosta daaqadaha gaariga, dhuuji suunkaaga, oo madaxa ku dabool gacmahaaga ama shay sida buste ama barkin.
- Beddel ahaan, haddii aad si badbaado leh uga bixi karto gaarigaaga, ku gabo bohol ama tog hoose oo dheer adigoo markaa madaxaaga ku daboolayo gacmahaaga ama shay kale.
- Ka fogow buundooyinka iyo meelaha la maro.



Jaantuska 5.9: Barafka ayaa ku samaysma buundooyinka marka hore sabab ah hawada wareegaysa ee korka iyo hoosta oogada wadada.



## BARAF IYO BARAFKA BUDADA AH

- Hubi in gaarigaaga oo DHAN uu ka nadiifsan yahay barafka budada ah iyo baraf ka hor intaadan wadin, tan waxaa ku jira daaqadaha, layrarka hore, calaamadaha leexinta, iyo nalalka dambe.
- Ka digtoonow baraf madow. Marka heerkulku hoos u dhaco, qoyaanku wuxuu isu rogi karaa baraf dusha waddada. Inta badan barafkan waxaa loogu yeeraa baraf madow sababtoo ah wey adag tahay in la arko oo inta badan wuxuu kula kulmaa darawallada si lama filaan ah. Barafka madow wuxuu ka dhici karaa meel kasta, laakiin wuxuu ku badan yahay buundooyinka iyo wadooyinka kor loo qaaday, halkaas oo uu qoyaanku si dhakhso ah ku qaboobo sabab ah hawada wareegaysa kor iyo hoosta wadada. Sababtaas awgeed, buundooyinka iyo wadooyinka kor loo qaaday waxa laga yaabaa inay yihiin kuwo simbiirirax ah xitaa marka oogoooyinka waddooyinka kale aysan sidaas ahayn. *(Eeg jaantuska 5.9)*
- Markaad ka bilaabayso inaad ka gaariga ka wado meel aad ku istaagtay, taayirrada si toos ah u wad oo si tartiib ah u sheelaree si aad uga fogaato in ay taayirada wareegaan.
- Yaree xawaarahaaga si aad u soo kabto luminta jiiditaanka.
- Ha isticmaalin xakameeyaha xawaaraha la dejisaday marka ay jiraan xaalado baraf ama barafka budada ah.
- Bilow in aad gaabiso xawaarahaaga ka hor intaadan gaarin joogsiga aad filayso inaad ka sameyso isgoyska ama leexashada. Bareeg oo kaliya qabo marka aad ku socoto xariiq toosan. Masaafoyinka joogsigu waxay noqon karaan kuwo 10 jeer ka weyn markey jiraan xaaladaha barafka iyo barafka budada ah.
- Ka fogow baabuurka kaa horreeya si aadan ugu baahanin inaad si lama filaan ah u joogsato, taasoo keeni karta taraarax.

## La wadaagista wadada barafka budada ah

Haddii aad baabuur wadeyso inta lagu jiro xilliga qaboobaha ee lowa, waxay u badan tahay inaad jidka kula wadaagi doonto barafka budada ah mar uun.

- **Ka digtoonow markaad usoo dhawaanayso gaariga xaaqa barafka budada ah.** Gawaarida xaaqa barafka budada ah ayaa caadi ahaan ku shaqeeya 25-35 mph. Darawallo badan ayaa ku guul daraystay inay ogaadaan tan oo ay waxeyna uga dhacaan gadaal.
- **Waligaa haka gudbin dhinaca garabka ee gaariga xaaqa barafka budada ah.** Gawaarida xaaqa barafka budada ah ayaa barafka u dhaqaajin doonta garbaha.
- **Sii meel ay ku shaqeeyaan.** Gawaarida xaaqa barafka budada ah ayaa leh meelo ballaaran oo aysan si fiican u arkin, waxaana laga yaabaa inay ku ag sameeyaan hareerahooda daruur baraf budo ah, taasoo kugu adkeynaysa inaad aragto oo ay ayagana ku arkaan. Way fiicantahay inaad dib u istaagto oo aad dulqaadato ilaa aad si badbaado leh uga gudbi karto.
- **Oggolow meel badan markaad gudbayso.** Badeelaha xaaqida ee gawaarida barafka xaaqa ayaa laga yaabaa inay ku dheganaadaan in ka badan ballaca gaariga.

## Ku go'doonsan gudaha barafka budada ah

Waa kuwan qaar ka mid ah talooyinka ku aadan haddii aad ku xanniban tahay gudaha barafka budada ah.

- Haddii ay suurtagal tahay, u bixi baabuurkaaga garabka oo ku dhex jir si aad uga fogaato inay kugu dhacaan baabuurta kale.
- Wac 911 si aad u hesho gargaar degdeg ah. Si aad gacan uga geysato hagidda shaqaalaha degdegga ah goobtaada, raadi lambarada ka bixista wadada, tiirarka ay ku qoran yihiin maylalka, jidadka isgoysyada, ama calaamadaha dhulka.
- **Meesha ugu nabdoon waa inaad ku sugnaato gudaha gaarigaaga oo aad dhuujsato suunkaaga.** Gaarigaagu waa hoyga aad u baahan karto si aad u noolaato waxana uu ku ogoalanayaa in ay ku helaan shaqaalaha samatabbixinta.

## 5.13 XAALADDA DEGDEGGA AH EE KU AADAN FASHILKA QALABKA

Si kasta oo aad taxaddar u leedahay, mar uun, waxaa laga yaabaa inaad isku aragto xaalad degdeg ah. Haddii aad u diyaargarowdo, waxaa laga yaabaa inaad ka hortagto natiijooyin kasta oo halis ah.



### TAAYARKA OO SIMO

Haddii taayirkaagu si lama filaan ah u simo:

- Si adag u qabo isteerinka oo si toos ah u wad baabuurka.
- Tartiib tartiib hoos ugu dhig xawaaraha gaarigaaga. Cagtaada ka qaad badeelada saliida oo si fudud u isticmaal bareega.
- Ha ku joogsan wadada haddii ayba guud ahaan suurtoagal tahay. Jidka uga bax meel nabdoon.

Haddii taayar hore uu qarxo, xaaladda degdegu way ka sii darnaan kartaa. Qaraxa taayarka hore ayaa baabuurka si xoog leh ugu ruxruxi doona dhinaca baabuurka ee uu taayarka ka simay. Ka digtoonow inaad saxin markaad isteerinayso ka dib markuu taayarka hore qarxo. Isku day inaad toosiso baabuurka, ka dibna si tartiib ah ugu dhaqaaq garabka midig ee wadada sida ugu dhakhsaha badan.

### LEERARKA

Haddii nalalkaaga hore ay si lama filaan ah u damaan:

- Isku day inaad shido dhowr jeer.
- Isku day inaad shido layrkaaga iftiinka sare leh.
- Shid biriyeyasha degdega ah, shid seeynaalada, ama nalalka ceeryaamada haddii nalka hore aanu dib u shidmin markaad isku daydo inaad shido.
- Jidka ka bax sida ugu dhakhsaha badan.

### ISTAAGA MATOORKA

Haddii matoorku istaago adoo gaariga wado:

- Si adag u qabso isteerinka. Isteerinka waa ay adkaan doontaa in la leexiyo, laakiin waad leexin kartaa.
- Jid ka bax. Bareegyadu wali waa ay shaqayn doonaan, laakiin waa inaad aad u riixdaa badiilka bareega.

### BADIILKA SALIIDA OO AAN DHAQAAQEYNIN

Haddii matoorku aanu hoos u dhigin xawaarihiisa, ama aanu kicin markaad cagtaada ka soo qaado maarshada:

- Indhaha ku hay wadada.
- Si degdeg ah sheelarada ugu badel dhexdhexaad.
- Jidka ka bax marka ay nabdoon tahay inaad sidaa samayso.
- Demi matoorka ka dib markaad istaagto.

### NIDAAMYADA QUFULKA ISTEERINKA

Baabuur badan ayaa lagu rakibay habab quful isteerin ah oo loogu talagalay in looga hortago tuuganimada. Waligaa furaha ha saarin hana u oggolaan rakaabku inay taabtaan furaha marka ad baabuur wado. Haddii furaha la saaro, isteerinka ayaa xiri doona. Tani waxay sababi kartaa luminta xakamaynta baabuurka waxayna keeni kartaa shil.

### FASHILKA INUU SHAQAYN WAAYO BAREEGA

Haddii biriigaagu uu joojiyo inuu shaqeeyo:

- Dhawr jeer riix badiilka bareega. Tani waxay badanaa dhisi doontaa cadaadis bareeg oo kugu filan si ay kuugu ogolaato inaad istaagto.
- Haddii taasi shaqayn waydo, isticmaal bareega baarkinka. Si tartiib ah u kor ugu qaad gacanta barreega baarkinka si aadan u xirin taayirrada dambe oo aadan u sababin taraarax. U diyaar garow inaad sii deyso bareega haddii uu baabuurku bilaabo inuu taraaraxo.
- Haddii taasi shaqayn waydo, billow inaad u guurto sheelarooyinka hoose oo raadi meel nabdoon oo aad ku joogsato. Hubi in baabuurkaaga uu ka baxsan yahay waddada. Ha wading gaari bareeg la'aan.

## 5.14 KA QEYB AHAANSHAHA SHIL

Ka qeyb ahaanshaha shil, iyada oo aan loo eegin siduu u fudud yahay, waxay noqon kartaa mid cabsi ah. Hadafka ugu weyn ee qiimeynta shil kasta waa in la hubiyo in dhammaan darawallada iyo rakaabku ay badbaado qabaan. U isticmaal kuwan soo socda hage ahaan waxa la sameeyo marka shil dhaco.



### TALLAABADA 1: GAARI KA BIXINTA TARAAFIKADA HADUUU GALO SHIL FUDUD

Haddi ay suurtagal tahay, hubi in gaarigaagu ka baxay wadadii taraafikada, la damiyay, oo aanu mar dambe dhaqaaqeynin.



### TALLAABADA 2: LA XIRIIR SHARCI FULINTA

La xiriidh sharci fulinta si aad uga warbixiso shilka adigoo wacaya 911. Xaqiiji inaad sharaxdo inta ugu badan ee macluumaad ee suurtagalka ah oo ay ku jiraan dhaawacyada suurtagalka ah iyo goobta shilka.

Waa sharciga gobolka in booliiska loo sheego shil ku lug leh dhaawac ama dhimasho qof kale, ama burbur hantiyeed oo ka badan \$1,500. Ku guuldareysiga inaad sidaas sameyso 72 saacadood gudahooda ka dib dhacdada waxay kuu horseedi doontaa inaad lumiso mudnaantaada wadista iyo ganaaxyo kale.



### TALLAABADA 3: U SHEEG SHARCI FULINTA CAYMISKA IYO MACLUUMAADKA XIRIIRKA

Diyaar u noqo inaad siiso sarkaalka fulinta sharciga:

- Macluumaadka caymiska baabuurka
- Diiwaangelinta baabuurka
- Laysanka darawalka




### TALLAABADA 4: WARGELI CAYMISKA

Tixgeli masuuliyadaada daboolida si aad u qiimeyso kharashyada loo baahan doono in la bixiyo iyo waxa aad xaq u leedahay inaad hesho. Haddii lagu tixgeliyo inaad qalad ka gashay shil aad galisay darawal kale, waxaad u baahan doontaa inaad ka hadasho kharashyada aad ku bixin doonto iyaga sidoo kale.

## 5.15 LA MACAAMILITAANADA SHARCI FULINTA

Waxaad la macaamili kartaa sharci fulinta sababo kala duwan oo ay ku jiraan joogsiga taraafikada. Markaad la macaamilayso sarkaalka fulinta sharci, is deji oo raac tilmaamaha.

Haddii aad qabto otisimka iyo/ama aad tahay dhagool ama qof maqal adag, waxaad dooran kartaa in tilmaame lagugu daro laysankaaga ama aqoonsigaaga. Tilmaamaha noocan ah wuxuu ku daabacan yahay laysankaaga/aqoonsigaaga wuxuuna sidoo kale ka muuqan doonaa kaydka xogta ee ay adeegsadeen sharci fulinta si loo eego macluumaadka darawalka inta lagu jiro joogsiga taraafikada. Tani waxay ka caawinaysaa sarkaalku inuu si wanaagsan ugu diyaargarooobo inuu kula macaamilo.



Jaantuska 5.10: Muujiyaha heerka otisimka iyo dhagoolnimada ama muujiyaha culayska maqalka

## JOOGSIGA TARAAFIKADA/GAADIIDKA

Haddii aad aragto baabuurka sarkaalka sharci fulinta oo kuu sheegaya inaad joogsato, si taxadar leh ugu leexo meel banaan marka ay nabdoon tahay. Haku joogsan haadka safarka. Jidadka ama waddooyinka waaweyn ee mashquulka ah, waxa ugu wanaagsan inaad istaagto meel baabuurta lagu baarkin gareeyo ama waddada dhinaceeda oo leh mashquul yar. Demi gaarigaaga, gacmahaaga ha muuqdaan (waxaa lagu talinayaa inay dul ahaadan isteerinka), is deji, oo raac tilmaamaha sarkaalka.

Sarkaalku waxa laga yaabaa inuu waydiiyo darawalka ama rakaabka inay is aqoonsadaan (magaca, taariikhda dhalashada, iwm.) oo ay bixiyaan laysanka ama aqoonsiga, caddaynta caymiska, iyo diiwaangelinta baabuurta. Alaabtan si habboon ugu dhig hal meel oo keliya oo baabuurka dhexdeediisa ah, oo sug inta sarkaalku ku waydiinayo alaabta ka hor inta aanad gaarin.

Haddii aad hesho tikitka taraafikada ah, si xushmad leh u aqbal tikitka. Saxiixida tikitka taraafikada macnaheedu ma'aha inaad dembi qiranayso, waxay caddaynaysaa inaad heshay.



# DIYAAR MA U TAHAY IMTIXAANKAAGA?

Ka hel ku tababar qaashada imtixaan aqooneedkeena onlaynka [iowadot.gov/mvd/driverslicense/manuals-and-practice-tests](https://iowadot.gov/mvd/driverslicense/manuals-and-practice-tests) dabadeed ballan qabso si aad u gasho imtixaanka dhabta ah.

Waxaan rajeyneynaa inaan kugu aragno wadada si nabad ah.



---

Macluumaadka buuggani waxa uu waafaqsan yahay Xeerka Iowa iyo Xeerarka Maamulka.

[www.legis.iowa.gov/law/iowaCode](http://www.legis.iowa.gov/law/iowaCode)

[www.legis.iowa.gov/law/administrativeRules](http://www.legis.iowa.gov/law/administrativeRules)

---

Iowa DOT waxay xaqiijisaa takoor la'aanta iyo shaqaaleysiinta loo siman yahay dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha si waafaqsan Title VI iyo Title VII ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 iyo xeerarka kale ee takoor la'aanta. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama caawinaada gaar ah ee dadka naafada ah ama aad leedahay aqoon xaddidan oo ku aadan Ingiriisiga, kala xirii Xuquuqda Madaniga ah ee Iowa DOT 515-239-1111 ama iimayl ahaan [civil.rights@iowadot.us](mailto:civil.rights@iowadot.us).



---

IOWA DEPARTMENT OF TRANSPORTATION